**Ka caawinta dhammaan dadka degan Washington si ay u noolaadaan, u shaqeeyaan, u wadaan gaadiid, oo ay ugu horumaraan noloshooda.**

# WASHINGTON HAGAHA DARAWALKA







**Dhamaan Adeegyada!**

**I iskaan-garee**

WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF LICENSING

dol.wa.gov

# Aqoonsigaaga miyaa lagu raaci karaa diyaarad?

# REAL ID









**REAL ID waa sharci dhigaya in shatiga darawalnimada iyo kaararka aqoonsiga ay buuxiyaan heerar amni oo gaar ah si loo aqbalo marka lagu raacayo duullimaadyada gudaha dalka ama lagu galayo xarumaha dowladda federaalka qaarkood. Shatiga wadista iyo aqoonsiyada caadiga ah ma buuxiyaan shuruudahaas.**

**Shatiga iyo kaararka aqoonsiga ee la xoojiyey waxay ka mid yihiin doorashooyinka u dhigma heerka amniga ee REAL ID. Ma haysataa waxaad u baahan tahay?**

Sawir koodhka QR ama booqo **dol.wa.gov/real-id** si aad u ogaato faahfaahinta.




## Qof kasta si nabad ah ayuu ku tagayaa guriga.




**Dhinac uga leexo 200 fiit ka hor iyo ka dib goobta shilka.**

**Gaabi xawaarahaaga ilaa 10 mph ka hooseeyaxadka xawaaraha ee lagu qoray goobta.**

## Shilalka gaadiidku waa sababta ugu weyn ee dhimashada iyo dhaawaca darawallada da'da yar ee Mareykanka.

# OGOW HALISTA SHILALKA la xiriirta da'da 16 ilaa 25

Waddooyin Qoyan

**Khibrad la'aan**

Suunka Kursiga Oo Aan La Xidhanin

**Wadista Habeenkii**

Xawaare | Daal

**Mukhaadaraadka iyo Khamriga**

Rakaabka Dhallinyarada ah

**Wadista Laga Mashquuliyey**

- Imisa qof ayaa sanad kasta ku dhinta waddooyinka Mareykanka?
- Waa maxay yoolka dhimashada Taraafikada ee Washington?

TARGET ZERO

STUDENT DRIVER



WASHINGTON STATE DEPARTMENT OF LICENSING | dol.wa.gov

Washington Driver Guide | 520-390 | Somali | (N/12/25)

# JADWALKA MAWDUUCYADA

## Waxeynu nahay Washington


**Hordhac**
Mawduucyada
Sinnaanta dhammaan macaamiisha
Macluumaadka Xiriirka | dol.wa.gov


## 1 | Shatiyada


**Go'aansiga in la wado .......... 1.0**

**Lambarka lagu qoondeeyay Washington (Lambarka WDL (Washington Driver License, Laysanka Darwalnimo ee Washington) .......... 1.1**

**License Express .......... 1.2**

**LXafiisyada Shatiga iyo Gawaarida Shatiyada iyo Xafiisyada Gawarida .......... 1.3**

**Dadka Degan Gobolka Washington .......... 14**

**Deggenayaasha cusub .......... 1.5**
Deggenayaasha cusub ee da'doodu tahay 18+ sano .......... 1.5
Deggenayaasha Cusub: da'da 16 ilaa 17 sano .......... 1.5
Aqoonsigaaga .......... 1.5
Caawinta dadka aan hoyga lahayn .......... 1.5

**Aqoonsiga iyo shatiga darawalka .......... 1.6**

**Real ID .......... 1.7**

**Helitaanka Shatiga Wadista ee Shakhsiyeed .......... 1.8**
Shatiga Tababarka .......... 1.8
Helitaanka shatigaaga wadista shakhsi ahaaneed: da'aha 16 ilaa 17 sano .......... 1.8
Helitaanka shatigaaga wadista shakhsi ahaaneed: da'aha 18+ sano .......... 1.8
Shatiga dhexe ee wadista (Intermediate driver license) .......... 1.8
Ruqsadaha beeraha .......... 1.8
Warqadaha digniinta wakhtiga hore .......... 1.8

**Caafimaad** ........ **1.9**
Baaritaanka aragga ........ 1.9
Deeq-bixiyaha xubnaha jidhka ........ 1.9
Doorarka caafimaad ........ 1.9

**Taageerooyinka** ........ **1.10**

**Darawalo da' ah** ........ **1.11**

**Imtixaannada Shatiga Wadista Shakhsiyeed** ........ **1.12**
Lawo imtixaano ........ 1.12
Galida imtixanada ........ 1.12

**Tawabarka waxbarasho ee dawarawalnimo** ........ **1.13**
Ka weyn 18 ........ 1.13

**Hagayaasha Darawallada Cusub** ........ **1.14**

**Sii heysashada shatigaaga wadista** ........ **1.15**
Beddelidda shatigaaga wadista ........ 1.15
Cusboonaysiinta shatigaaga wadista ........ 1.15
Shati dhacsan ........ 1.15
Luminta ahmiyadaada gaari wadista ........ 1.15
Xadgudubyada khamriga, daroogada, iyo hubka ........ 1.15
DUI (Driving under the influence, Wadista iyadoo la saamaysan yahay) ........ 1.15
Sharciga dhalooyinka furan (Open container law) ........ 1.15

**Adeegyo Dheeraad ah** ........ **1.16**
Beddelka cinwaanka ama magaca ........ 1.16
Diiwaangelinta codbixinta (Voter registration) ........ 1.16
Diiwaangelinta adeegyada la xusho (Selective service) ........ 1.16
Diiwaangelinta mataahanada (Twin registry) ........ 1.16

## 2 | Gaadiidka

**Adeegyada Gaadiidka** ........ **2.0**
Shahaadada Milkiyadda (Certificate of Ownership title) (Shahaadada Lahaanshaha) ........ 2.0
Diiwaangelinta ........ 2.0
Cinwaanka Gaadhiga ........ 2.0

**Warbixinta libka** ........ **2.1**
Qof ilaa Qof ........ 2.1
Shirkad ilaa Qof ........ 2.1

**Taarikadaha Gaadhiga** ........ **2.2**

**Ceymiska loo baahan yahay** ........ **2.3**

**Garo gaadhigaga** ........ **2.4**
Howlaha ........ 2.4
Isbeddelada ........ 2.4
Tiknoolajiyada ammaanka gaadhiga ........ 2.4

**Gacan ku heynta Gaadhiga** ........ **2.5**
Cagaha ........ 2.5
Dusha muraayadaha ........ 2.5
Iftiinka hore ee gaariga ........ 2.5
Iftiinka bireegyada ........ 2.5
Calaamadaha leexashada ........ 2.5
Calaamadaha gacanta ........ 2.5
Iftiinka digniinta khatarta ........ 2.5
Kursiga darawalka ........ 2.5

**Ilaalinta rakaabka** ........ **2.6**
Suunka amniga iyo ilaalinta rakaabka ........ 2.6
Kursiyada carruurta ........ 2.6
Baqshiinnada hawada ee badbaadada ........ 2.6

**Isteerinka** ........ **2.7**
Isteerinka gacanta lagu hago (Soo Jiidida/Riixida) ........ 2.7
Isteerinka isku badalka gacan ilaa gacan ........ 2.7
Isteerinka halka gacan ........ 2.7

**Bareeg qabasho** ........ **2.8**
Cadaadinta bareega ........ 2.8
Nidaamyada Bireega ee Aan La Xakameeynin ........ 2.8

**Sheelareyn** ........ **2.9**

**Miisaanka dheellitiran** ........ **2.10**

Kala-beddelidda hore iyo gadaal ....... 2.10
Wareegidda dhinacyada ....... 2.10
Liicliicida gaariga ....... 2.10

**Barta tixraaca gaadhiga ....... 2.11**

**Meelaha aan la arag ee adiga kugu xeeran ....... 2.12**

**Meelaha aan la arag ee gaadiidka kale ....... 2.13**
Fiirinta iyo kormeerka ....... 2.13

**Ka hor inta aadan dhaqaaqin ....... 2.14**

## 3 | Darawalada

**Adiga gadaal ka fadhiya isteerinka ....... 3.0**
Caafimaad ....... 3.0
Caafimaad jireed ....... 3.0
Araga ....... 3.0
Aragtida habeenkii ....... 3.0
Maqalka ....... 3.0

**Wadida iyado la dawaqsanyhy ....... 3.1**
Khamriga iyo wadista ....... 3.1
Hashiishka iyo wadista ....... 3.1
Daawooyinka iyo wadista ....... 3.1
Isticmaalka daroogooyin kala duwan iyo wadista ....... 3.1
Daalka iyo wadista iyadoo la hurdeysan yahay ....... 3.1
Xanuun maskaxeed ....... 3.1
Wadista gardarada ku dheehan ....... 3.1
Tartamada iyo bandhigyada waddooyinka ....... 3.1
Cadhada waddooyinka ....... 3.1
Haddii aad la kulanto cadhada waddooyinka ....... 3.1
Haddii aad tahay dhibane cadhada waddooyinka ....... 3.1
Soo sheegista cadhada waddooyinka ....... 3.1

**Go’aan qaadasho xog-ogaal ah waddada ....... 3.2**
Sababta go’aan xog-ogaal ah ay muhiim u tahay ....... 3.2

Sameey go'aano fiican ........ 3.2

**Ku Xallinta Dhibaatooyinka Waddada ........ 3.3**

**Ka fogaanshaha Wadista Mashquulka ah ........ 3.4**
Xeerka wadista mashquulsan ee Washington ........ 3.4

**Darawaliin Fariidiinta ah ........ 3.5**
Yeelo feejignaan ........ 3.5
Baadhista iyo kormeerka si muuqaal ah ........ 3.5

**Ixtiraamka iyo mas'uuliyadda ........ 3.6**
Ogeysiisyada taraafikada ........ 3.6
Qashinka ........ 3.6
Bey'ada ........ 3.6
Isla-socodka ........ 3.6

## 4 | Wadooyinka

**Wacyigelin iyo iskaashi ........ 4.0**

**La wadaagista dadka ........ 4.1**

**La wadaagista wadada basaska iskoolka ........ 4.2**
Markaad baska ka danbeyso ........ 4.2
Markaad baska hortiisa joogto ........ 4.2

**La wadaagista wadada basaska safarka ........ 4.3**

**La wadaagista baabuurta waaweyn ........ 4.4**
Mashiinka loo isticmaalo in uu ka saaro barafka waddooyinka ........ 4.4

**La wadaagista wadada mootooyinka ........ 4.5**
Raacista ........ 4.5
Haadadka ........ 4.5
Leexashada ........ 4.5
Dusha sare ee jidka ........ 4.5
Leerarka ........ 4.5

**Waddo la wadaagista baaskiil wadayaasha ............. 4.6**
Talo guud ........ 4.6
Gudbida baaskiil-wade ........ 4.6
Leeniyada baaskiilka ........ 4.6

**La wadaagista waddada tareenada ........................... 4.7**
Xusuusinta amniga muhiimka ah ........ 4.7
Goorta loo baahan yahay in caawimaad la raadsado ........ 4.7
Tareenka Fudud ........ 4.7

**La wadaagista gaadiidka beeraha ............................. 4.8**

**La wadaagista gaadiidka imaarjansiga ah ............... 4.9**

## Shuruucda wadooyinka

**Sharciga taraafikada ................................................ 4.10**
Tilmaamaha gaari wadista guud ........ 4.10
Qalabka lagu hago gaadiidka ........ 4.10
Nalalka jaban ama calaamadaha ........ 4.10

**Calaamadaha nalka taraafikada ................................. 4.11**
Nalalka taraafigga ee yaryar ee waddooyinka waaweyn ........ 4.11

**Astaamaha ............................................................ 4.12**
Calaamadaha ugu badan ........ 4.12
Calaamadaha Aagga Shaqada ........ 4.12
Calaamadaha Adeegga ........ 4.12
Calaamadaha madadaalada ........ 4.12
Calaamadaha meesha loo socdo ........ 4.12
Calaamadaha kale ee gaadiidka ........ 4.12

**Isgoysyada caadiga ah ee ugu badan ....................... 4.13**

**Leexashada .......................................................... 4.14**
Halka laga soo leexdo ........ 4.14

**Isgoysyada kale** ........ **4.15**
Raanboodyada ........ 4.15
Waddooyinka dheeman ahaanta u naqshadeysan ee kala baxa ........ 4.15
Isgoys Aan la xakameyn ........ 4.15

**Calaamadaha waddada** ........ **4.16**
Haadadka ........ 4.16
HOV (High Occupancy Vehicle, Gaadiidka Dadka Badan Qaada) / Baabuur wadaag ........ 4.16
Haadadka dib loogu soo noqon karo ........ 4.16
Haadadka qoondeysan ........ 4.16
Haadadka lacagta laga bixiyo ........ 4.16
Calaamadaha waddooyinka ee kale ........ 4.16

**Aaggaga** ........ **4.17**
Aag iskool ........ 4.17
Aag shaqo ........ 4.17
Aagga xaaladaha degdega ah ........ 4.17

**Baarkin** ........ **4.18**
Xeerarka guud ee baarkinka ........ 4.18
Barkin toosan iyo mid xaglo leh ........ 4.18
Baarkin barbar ah ........ 4.18
Dhigashada gaarigaaga buur ........ 4.18
Baarkinka dadka naafada ah loogu tala galay ........ 4.18
Baarkinka goobta gaariga korontada ku shaqeeya lagu jaajgareeyo ........ 4.18

**Gaadiidka** ........ **4.19**
Isjiidista ........ 4.19
Xafid xamuulkaga ........ 4.19
Xoolaha ........ 4.19

**La xiriiro badaha** ........ **4.20**
Doonyaha rakaabka qaada ee biyaha u kala goosha ........ 4.20
Xeebaha ........ 4.20

# 5 | Qataraha


**Khataraha wadista baaburta .................................... 5.0**
Ogaanshiyaha qatarta ........................................ 5.0
Fahamka khataraha iman kara ........................................ 5.0
Ogaanshaha xaaladda aad ku sugan tahay markaad waddo baabuur ........................................ 5.0
Maareynta ama ka hortagga khataraha ........................................ 5.0

**Xawaare .................................... 5.1**
Xawaare aad u sarreeya ........................................ 5.1
Xadka Xawaaraha ........................................ 5.1
La qabsiga xawaaraha iyadoo lagu saleynayo xaaladda waddada ama cimilada ........................................ 5.1

**Banaan .................................... 5.2**

**Ku biiridda taraafikada kale .................................... 5.3**
Hab nidaamsan oo baabuurta ay si isdaba joog ah ugu biiraan taraafikada sida ilkaha siiyeerka ........................................ 5.3

**Waqti .................................... 5.4**
Xisaabi daqiiqadaha ........................................ 5.4
Leexashada iyadoo gaari kale soo dhow yahay ........................................ 5.4

**Diirad .................................... 5.5**
Feejigan ........................................ 5.5
Aagga aragga ee darawalka ........................................ 5.5
Marinka socdaalka ........................................ 5.5
Khadka tooska ah ee aragga ........................................ 5.5
Xog aruurin ........................................ 5.5

**Xaaladaha waddada iyo wadista .................................... 5.6**
Habeen wadista ........................................ 5.6
Qalooca ........................................ 5.6
Wadooyin leh turaanturo ........................................ 5.6
Sambariirixasho ........................................ 5.6
Marka taayirrada ay lumiyaan jiidashada sababtoo ah biyo yaal waddada ........................................ 5.6

**Cilladaha ama fashilka baabuurka .................................... 5.7**
Taayarada ........................................ 5.7
Tamarta ........................................ 5.7

Iftiinka hore ee baabuurka ........ 5.7
Badhanka sheelarada ........ 5.7

**Gudbinta ama muujinta khataraha ........ 5.8**

**Isku dhacyada ........ 5.9**
Ku dhicidda ama shilka baabuur ........ 5.9
Soo sheegidda shil ........ 5.9
Soo sheegidda dhaawac ........ 5.9
Wicista 911 ........ 5.9
La kulanka ama taabashada xadhkaha korontada ........ 5.9
Markaad aragto shil ka dhacaya ........ 5.9
Sanduuqa gurmadka degdegga ah ........ 5.9

**Ciidamada fulinta sharciga ........ 5.10**
Marka boolis ku joojiyo baabuurkaaga ........ 5.10
Helidda warqad ganaax ah ........ 5.10

## Macluumaadka

**Gunaanad**
Ereybixin
Helitaanka iyo Wax Sii Qabanqaabinta
Afeef

# Waxeynu nahay Washington

Hagahan wuxuu muujinayaa qiyamka guud ee ay wadaagaan reer Washington:

- Waxaan nafteena iyo dadka kale u daryeelnaa annagoo raacna sharciyada waddooyinka.
- Waxaan fiiro gaar ah u leenahay dadka waddooyinka ku nugul.
- Marka aan wadno, waxaanu noqonaa kuwo feejigan, miyir qabta, oo go'aan sax ah qaata.
- Waxaan rabnaa in qof walba si nabad ah u gaaro meeshii uu u socdo.



## MAWDUUCYADA

Department of Licensing (DOL) ee Gobolka Washington ayaa soo saarta Hagaha Rasmiga ah ee Darawalka ee Gobolka Washington (Washington State Driver Guide). Hagahan wuxuu tixraacayaa sharciyo badan oo gobolka ah wuxuuna bixiyaa talooyin ammaan oo laga yaabo inaanay ku jirin sharciyada laftooda. Dhammaan macluumaadka ku jira waa kuwo la hubo oo sax ah waqtigii la daabacay. Dhammaan macluumaadka ku jira waa mid ugu dhow saxnaanta ugu badan waqtigii la daabacay. Si kastaba ha ahaatee, hagahan laga yaabee inuusan ka tarjumayn isbeddelladii ugu dambeeyay ee ay samaysay Golaha Sharci Dejinta ee Washington. Waxaad ka heli kartaa nooca ugu cusub ee hagahan DOL mareegta: dol.wa.gov.

## SINNAANTA DHAMMAAN MACAAMIISHA

Department of Licensing (DOL) waxay ka go'an tahay in la dhiso dhaqan loo dhan yahay iyadoo lagu dhaqmo qiyamka kala ah: kala duwanaansho, sinnaanta, ka mid ahaansho, kalsooni, iyo ixtiraam. Meel kasta oo suurtagal ah, waxaan bixinnaa adeegyo siman oo aan meesha ka saarno caqabadaha macaamiisheena ka hor istaagi kara inay helaan adeegyada. Waxaan bixinnaa caawimaadyo gaar ah marka ay macaamiishu codsadaan, si ay u helaan adeegyada iyo goobaha aan bixino. Sidoo kale, waxaan bixinnaa adeegyo luqadeed si loogu fududeeyo macaamiisha aan af Ingiriisiga ku hadlin. DOL waxay si buuxda ugu go'an tahay mabaadi'da PEAR (Pro-Equity Anti-Racism, Kor u qaadidda Sinnaanta iyo Ka hortagga Cunsuriyadda). Hay'addu waxay leedahay koox xooggan oo firfircoon oo PEAR ah oo ka kooban xubno ka socda bulshada, shaqaale, iyo hoggaamiyeyaal iska kaashanaya abuurista deegaan adeeg oo ka jawaaba baahiyaha iyo talooyinka bulshada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caawimaadyada iyo helitaanka adeegyada, fadlan eeg bogga ugu dambeeya ee hagahan.

## MACLUUMAADKA XIRIIRKA | DOL.WA.GOV




**Shatiga darawalnimo adeega macamiisha:**
360-902-3900

**Shatiga gaadiidka adeega macamiisha:**
360-902-3770

Facebook.com/WashingtonDOL

Instagram.com/wa_licensing

LinkedIn.com/company/Washington-state-department-of-licensing

Threads.net/@wa_licensing

X.com/WA_DOL

Youtube.com/WALicensing


CUTUBKA I
LEYSANKA
1
SPEED
LIMIT
25

## 1.0 | GO'ANSASHADA GAARI WADISTA

Inaad noqoto darawal waa mudnaan iyo masuuliyad labadaba. Waa arrin kaa mid noqon doonta inta badan noloshaada. Qaado waqti aad ku horumariso aqoontaada iyo xirfadaha wadista. Waxay kaa caawin doonaan inaad samaysato caadooyin badbaado leh oo aad dhisto asaas nolol-dhan ah oo wadis masuuliyad leh.

## 1.1 | NUMBER WDL (ASSIGNED WA NUMBER, LAMBARKA QOFKA LOO QOONDEEYO EE WA)

Dhammaan laysannada, oggolaanshaha iyo kaararka aqoonsiga ee gobolka Washington waxaa la siiyaa lambarka gaarka ah ee Washington (Washington number). Nambarkaan adiga ayuu qaas kuu yahay. Inta badana waxey bilaabataa xarfaha WDL (Washington Driver License number, Lambarka Laysanka Darwalnimo ee Washington).

## 1.2 | LICENSE EXPRESS

Haddii aadan haysan lambarka WDL, waad heli kartaa adigoo tagaya xafiiska laysanka wadista (driver licensing office) ama adigoo abuuraya akoonti cusub oo ku jirta License Express. License Express waa mareeg amaanka leh oo kuu oggolaanaysa inaad gasho adeegyo badan oo ay bixiso DOL. Linkiga License Express waxaa laga heli karaa geeska sare ee midig ee dol.wa.gov bogga hore. Isdiiwaangeli adigoo isticmaalaya magac-adeegsi iyo furaha sirta ah oo ku fudud inaad xasuusato. Darawalada cusub waa inay sameystaan akoontigooda gaarka ah. Ma heli kartid adeegyo adigoo isticmaalaya akoonti qof kale. Akonka waa inaad adiga leedahay.

**Gudaha License Express, waxaad samayn kartaa waxyaabahan soo socda:**

- Ballan ka samee xafiiska laysanka wadista.
- Horay u codso ruqsada barashada wadista.
- Jadwal u samee Imtixaamidaada Lahaanshaha Xirfadaha Gaari Wadista.
- Soo cusbooneysii shatiga darawalnnimada.
- Maamul taabyada gaadhigaaga.
- Cusbooneysi cinwaankaaga.

Haddii aadan xasuusan lambarkaada WDL ama aad qabto su'aalo ku saabsan akoontiga License Express, ka wac adeegga macaamiisha ee leysan-siinta darawalka ee DOL lambarka 360-902-3900.

## 1.3 | SHATIYADA IYO XAFIISYADA GAWAARIDA

Shaqaalaha ku sugan xafiisyada laysanka wadista waxay kaa caawin karaan inaad hesho laysanka wadista ama kaarka Aqoonsiga. Booqo xafiiska laysanka gaadiidka (vehicle licensing office) si aad u hesho caawimaad la xiriirta laysanka iyo diiwaangelinta gaadhiga. Hubi inaad la xiriirto xafiiska ku habboon adeegga aad rabto.




## 1.4 | DADKA DAGAN GOBOLKA WASHINGTON

Waxaa lagu tiriyaa deggane gobolka Washington haddii mid ka mid ah qodobadan ay run tahay:

- Waxaad haysataa guri ama hoy aad si shaqsi ah ugu nooshahay gobolka Washington.
- Waxaa laguu diiwaangeliyey inaad ka codbixiso gudaha Washington.
- Waxaad u isticmaashaa cinwaan Washington ah markaad bixineyso canshuuraha federaalka ama kuwa gobolka.
- Waxaad ka heshaa gargaar barnaamijyada dadweynaha ee gobolka Washington.
- Waxaad dhigataa dugsiga ku yaal gobolka oo aad bixisaa lacagta waxbarashada sida deggane Washington, ama waxaad tahay waalid masuul ah oo ilmihiisu dhigto dugsi dadweyne oo ku yaal gobolka.
- Waxaad ku nooshahay gaari-guriyeed ama doon aan si joogto ah meel ugu xirnayn, horey ayaad ugu nooleyd Washington, mana haysato guri joogto ah gobol kale.

# 1.5 | DAD DEEGAANKA EE CUSUB




## DEGGENAYAASHA CUSUB EE DA'DOODU TAHAY 18+ SANO

Deggenayaasha cusub ee haysta laysan darawalnimo oo gobol kale ah waxay haystaan 30 maalmood si ay u helaan laysanka darawalnimada ee gobolka Washington. Haddii laysankaaga gobol kale uu dhacay, waa inaad ka gudubtaa imtixaanka aqoonta wadista iyo imtixaanka xirfadda wadista ka hor intaadan helin laysanka Washington. Laysamada qaarkood waxaa la wareejin karaa adigoon mar kale galin imtixaannadaas. Ka raadi driver **training and testing (tabbabarka iyo tijaabinta darawalka)** bogga dol.wa.gov si aad u hesho faahfaahinta imtixaanka ee khusaysa xaaladdaada gaarka ah.

## DEGGENAYAASHA CUSUB: DA'DA 16 ILAA 17 SANO

Haddii aad ka yar tahay 18 sano oo aad haysato laysan gobol kale laga bixiyey, waa inaad codsataa Laysanka Dhexe ee Darawalnimada Washington (Washington Intermediate Driver License). Wasaaradda DOL waxay u baahan doontaa inay ansixiso tababarkaaga wadista ee gobol kale oo ay hubiso in aad haysatay ruqsadda barashada ugu yaraan 6 bilood. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan wareejinta koorsadaada tababarka wadista ee Washington, fadlan iimayl u dir barnaamijka dugsiga tababarka darawalada cinwaanka tse@dol.wa.gov.

## HUWIYADAADA

Si aad u hesho ruqsadda barashada, laysanka darawalnimada, ama kaarka Aqoonsiga, waa inaad keentaa dukumiintiyo caddeynaya aqoonsigaaga.

- Ka raadi **identification requirements brochure (xaanshi macluumaadeedka shuruudaha aqoonsiga)** bogga dol.wa.gov si aad u aragto dukumiintiyada lagaa rabo.
- Keen nuqullada asalka ah ee dhammaan dukumiintiyada lagama maarmaanka ah marka aad tagayso xafiiska laysanka darawalnimada.

DOL2GO

## ADEEGYADA

- **Marka ugu horraysa ee aad codsanayso laysanka ama kaarka aqoonsiga ee Washington, oo ay ku jirto nooca la xoojiyey**
- **Laysanka gobol kale laga soo wareejinayo**
- **Cusboonaysiinta laysanka, ruqsadda, ama kaarka Aqoonsiga**
- **Diiwaanka darawalka**
- **Warqadaha dib-u-soo celinta laysanka**
- **Dib-u-eegista dukumiintiyada si loo caddeeyo aqoonsiga.**




## CAAWINTA DADKA AAN HOYGA LAHAYN

Haddii aad la tacaalayso hoy la'aan, waxaad u qalantaa kaarka aqoonsiga bilaash ah ama mid qiimo dhimis leh. Dadkana helaya kaalmo dowladeed waxay sidoo kale u qalmi karaan kaarka aqoonsiga qiimo dhimis leh. Si aad u hesho gargaar, la xiriir xafiiska DSHS (Department of Social and Health Services, Waaxda Bulshada iyo Adeegyada Caafimaadka) ee deegaankaaga. Booqo dshs.wa.gov oo isticmaal halka tilmaameyso si aad u hesho adeegyada deegaanka.

# Shatiga darawalnimada ee caadiga ah iyo aqoonsiga (ID)




- ✓ Aqoonsiga
- ✓ Wadista gaari (kaliya laysanka darawalnimada)
- ✗ Safarka gudaha dalka diyaaradda
- ✗ Safar diyaaradeed caalami ah
- ✗ Gudubka xadka dhulka ama badda
- ✗ Gelitaanka xarumaha federaalka
- ✗ La jaanqaadaya shuruudaha REAL ID

# 1.6 | AQOONSIGA IYO SHATIYADA DARAWALNIMADA

## Leysanka Darwalnimada iyo Aqoonsiga la adkeeye




- ✓ Aqoonsiga
- ✓ Wadista gaari (kaliya laysanka darawalnimada)
- ✓ Safarka gudaha dalka diyaaradda
- ✗ Safar diyaaradeed caalami ah
- ✓ Gudubka xadka dhulka ama badda (sida Kanada, Mexiko, iyo Kariibiyaanka)
- ✓ Gelitaanka xarumaha federaalka
- ✓ La jaanqaadaya shuruudaha REAL ID

## 1.7 | REAL ID(AQOONSIGA SAXDA AH)

REAL ID waa sharci, ma aha kaar aqoonsi dhab ah.

Laysanka darawalka ee la xoojiyay (enhanced driver license) ama Aqoonsiga waa mid ka mid ah dhowr ikhtiyaar oo buuxiya shuruudaha REAL ID. Laysamada darawalnimada ee caadiga ah lama aqbali doono si loogu isticmaalo baraha amniga garoomada diyaaradaha, gudubka xuduudaha Mareykanka, ama gelitaanka dhismayaasha federaalka ee amniga leh.

Booqo REALIDwa.com si aad u daawato fiidiyowyo macluumaad leh, u qaadato su'aalo fudud oo kaa caawinaya go'aaminta nooca ID ee aad u baahan tahay, oo aad wax badan uga barato REAL ID.






# 1.8 | HELITAANKA LAYSANKA DARAWALNIMO SHAKHSI AH

## RUQSADDA TABABARKA

Kahor intaadan dalban ruqsadda tababarka, waa inaad haysataa lambarka WDL.

**Haddii aad ku jirto koorsada tababarka darawalnimada**
Waxaad dalban kartaa ruqsaddaada marka aad gaarto 15 sano jir. Ka codso xafiiska laysanka darawalnimada ama onlayn 1 ilaa 10 maalmood ka hor inta aysan koorsadaada tababarka bilaaban. Noqo mid diyaar u ah inaad siiso iskuulkaaga darawalnimada lambarkaaga WDL si loogu diiwaangeliyo.

**Haddii aadan iska diiwaangelin koorsada tababarka darawalnimada**
waxaad qaadan kartaa imtixaanka aqoonta marka aad gaarto 15½. Markaad imtixaanka ku gudubto, waxaad heli doontaa ruqsaddaada. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad sugtid ilaa aad gaarto 18 sano jir si aad u gasho imtixaanka xirfadda wadista oo aad u hesho laysanka darawalnimada.

Ruqsaddaada tababarka waxay ansax tahay 1 sano (waana la cusboonaysiin karaa adigoo bixiya kharash yar). Natiijada imtixaanka aqoontaada waxay ansax tahay 2 sano. Haddii aad waqti dheer sugtid kahor intaadan galin imtixaanka xirfadda, waxaa laga yaabaa inaad mar kale gasho imtixaanka aqoonta.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo aqoonsiyo, shatiyo, iyo rukhsado ah oo loogu talagalay dadka degan Washington.

## HELITAANKA SHATIGAAGA WADISTA SHAKHSIYEED: DA'DA 16 ILAA 17 SANO

**Si aad u hesho laysankaaga wadista ugu horreeya, waa inaad:**

- Haysataa ruqsadda tababarka ugu yaraan 6 bilood.
- Da'daadu tahay ugu yaraan 16 sano isla markaana aad degan tahay gobolka Washington.
- Dhammaystirtaa koorso badbaadada taraafikada oo lagu oggolaaday dugsiga tababarka wadista.
- Haddii koorsada lagu qaaday gobol kale, waa in ay buuxisaa shuruudaha ugu yar ee Washington taas micnaheedu waa in koorsadaas ay ka koobnaato ugu yaraan (30 saacadood oo fasal ah iyo 6 saacadood oo tababar toos ah).
- Ku gudubtadaa labadaba Imtixaanka Aqoonta iyo Kan Xirfadda Wadista.
- Dhammaystirtaa ugu yaraan 40 saacadood oo wadis la kormeero 10 saacadood habeenkii Waa in qof haysta laysan (oo leh waayo-aragnimo 3 sano ama ka badan) (Waalidka, mas'uulka, ama qofka mas'uulka ah bartaha waa inuu xaqiijiyaa in saacadahaas la dhammaystiray.)
- Aad leedahay diiwaan nadiif ah 6 bilood ee ka horreysa codsiga laysanka.
- Aadan lahayn dambiyo la xiriira khamri ama daroogo adigoo wata ruqsadda tababarka.
- Go'aanso haddii aad rabto in laguu diiwaangeliyo deeq bixiye xubno, indho, iyo unugyo.

**Si aad laysankaaga gacanta ugu hesho waa inaad:**

- Ballan ka samee xafiiska laysanka wadista. Waxaad tan ku samayn kartaa License Express ama adigoo wacaya adeegga macaamiisha DOL ee lambarka 360-902-3900.
- La tag waalidkaa ama masuulkaaga xafiiska laysanka si uu u saxiixo foomka oggolaanshaha waalidka (parental authorization form). Foomkan wuxuu ku siinayaa oggolaansho inaad codsato, wuxuuna caddeeyaa inaad haysato ugu yaraan 50 saacadood oo waayo-aragnimo wadis ah, wuxuuna xaqiijinayaa inaadan jebin xeerarka taraafikada 6-dii bilood ee la soo dhaafay. Waalidkaaga ama masuulkaaga waa inuu muujiyaa caddayn aqoonsi iyo xiriirka uu kula leeyahay. Haddii magacyadiinnu kala duwan yihiin, keen dukumentiyo muujinaya xiriirka.

- Sug ilaa dugsigaaga tababarka wadistu uu geliyo dhammaystirka koorsadaada iyo natiijooyinka imtixaanka. Dugsigaaga tababarka wadista wuxuu haystaa 24 saacadood si uu nidaamka ugu geliyo natiijooyinkaaga markaad gudubto imtixaan kasta. Haddii dugsigaaga tababarka wadistu si rasmi ah u xirmay oo aad u baahan tahay caawimaad, iimayl u dir barnaamijka dugsiyada tababarka darawalada cinwaanka tse@dol.wa.gov.
- Bixi lambarkaada Soshal Sekuritiga ama saxiix qoraal caddeynaya haddii aadan mid haysan.
- Muuji caddaynta aqoonsiga.
- Ku baas baaritaanka aragga.
- Sawir halagaa qaado.
- Inaad bixiso dhamaan khidmadaha laysanka.

**Ka hor intaadan ka tegin xafiiska, waxaad heli doontaa laysan ku meel gaar ah oo shaqaynaya 45 maalmood. Laysankaaga rasmiga ah waxaa laguugu soo diri doonaa boostada.**

**Si aad laysankaaga uga hesho onlaynka waxaad u baahan tahay:**

- Inaad haysato sawirka ruqsad tabbabarka ee Washington.
- Inaad ka hesho oggolaansho waalidkaa ama masuulkaaga.
- Inaad hubiso in iskuulkaaga tababarka darawalnimada uu galay natiijooyinka imtixaanka iyo dhamaystirka koorsada.
- Inaad bixiso dhamaan khidmadaha laysanka.
- Daabacdo risiidka. (Kani waa shatigaaga ku meel gaarka ah. Shatigaasi ma lahaan doono sawirkaaga, sidaas darteed looma isticmaali karo aqoonsi rasmi ah.)

Shatigaaga rasmiga ah wuxuu yeelan doonaa isla sawirka uu leeyahay oggolaanshahaaga barashada ama kaarka aqoonsigaaga ee Washington.

## HELITAANKA SHATIGAAGAG WADISTA EE SHAKHSIYEED: DA'DA 18+ SANO

Haddii aad tahay 18 jir ama ka weyn, waxaad haysataa afar ikhtiyaar oo aad ku heli karto shatigaaga darawalnimo ee Washington markii ugu horraysay. Waad:

1. Ka beddeli kartaashatigaaga hal gobol oo aadna u beddeli kartaa gobol kale.
2. Ku baasi kartaa imtixaannada aqoonta iyo xirfadaha.
3. Gudub imtixaanka aqoonta, hel oggolaanshaha barashada, ku tababar wadista darawal haysta shati muddo 5 sano ama ka badan, ka dibna gudub imtixaanka xirfadaha.
4. Hel ka-dhaafitaan imtixaan si aad u hesho oggolaanshaha, qaado koorsada tababarka darawalnimada, kadibna gudub imtixaannada aqoonta iyo xirfadaha markaad dhammayso koorsada.

## SHATIGA WADISTA EE DHEXDHEXAADKA AH

Dhalinyarada Washington ee da'doodu u dhaxayso 16 iyo 17 sano waxay maraan laba marxaladood oo xaddidan ka hor inta aan la siin shati aan xadidnayn: 1) oggolaanshaha barashada iyo 2) shatiga darawalnimada heer-dhexe. Wadista adigoo wata shatiga heer-dhexe waxay ka dhigan tahay inaad raacdo shuruucda hoos ku xusan.

| **Xaddidaadaha** | **laga soo bilaabo taariiqda la bixiye ilaa 6 bilood** | **Laga bilaabo 6 bilood ilaa da'da 18 sano ama hal sano (midka marka hore yimaada)** |
|---|---|---|
| Rikaabka | Looma oggola rakaab ka yar 20 jir marka laga reebo xubnaha qoyska dhow. | Ha qaadin in ka badan 3 rakaab oo ka yar 20 jir marka laga reebo xubnaha qoyska dhow. |
| Saacadaha wadista | Ha wadin gaari inta u dhaxaysa 1 a.m. iyo 5 a.m. ilaa aad la socoto waalid, masuul, ama darawal haysta shati oo da'diisu tahay ugu yaraan 25 sano. | Xaddidaadaha habeenkii way dhamaanayaan kadib hal sano oo wadis nabdoon ah. |

Shuruucda shatiga heer-dhexe waxay sidoo kale xaddidaan isticmaalka taleefannada gacanta iyo qalabka isgaarsiinta wireless-ka inta aad waddo gaariga, xitaa haddii aad isticmaalayso tignoolajiyada gaariga la wadi karo gacan ku heynta isteerinka gaariga. Waxaad taleefanka u isticmaali kartaa keliya marka aad soo wacaysid xaalad degdeg ah.

Ciqaabaha la xiriira jebinta xeerarka taraafikada iyo shilalka aad adigu sababto waxaa lagu taxay hoos.

| Jebinta sharciga | Ganaax |
|---|---|
| **1-aad** | Xaddidaadaha hadda jira way sii soconayaan ilaa aad gaarto 18 sano. |
| **2-aad** | Shatiga waa la joojinayaa 6 bilood ama ilaa aad gaarto 18 sano, midka marka hore yimaada. |
| **3-aad** | Shatiga waa la joojinayaa ilaa aad gaarto 18 sano. |

**Ka-reebitaannada**

- **Ujeeddooyin beeraha ah.** Dadka haysta shatiga darawalnimada heer-dhexe waxay wadi karaan gaari wakhti kasta, iyagoo rakaab wata, ujeeddooyin beeraha ah awgeed.
- **Hal sano oo wadis nabdoon ah.** Dadka haysta shatiga darawalnimada heer-dhexe waxay wadi karaan gaari wakhti kasta, iyagoo rakaab wata, haddii aysan ku lug yeelan shil ama aysan jebin xeerarka taraafikada.

Looma baahna inaad hesho shati cusub markaad gaarto da'da 18 sano. Xaddidaadaha shatiga heer-dhexe si toos ah ayaa looga qaadayaa. Waxaad sugi kartaa ilaa waqtiga dib-u-cusboonaysiinta shatigaaga si aad u hesho nuqul cusub oo la cusboonaysiiyay.

## RUQSADAHA BEERAHA

Ruqsadaha beeraha waxay u oggolaanayaan darawalada da'doodu ka yar tahay 18 sano inay ku wadaan gaariga aag gaar ah oo loogu talagalay shaqada beeraha. Ma jiro shuruud da' ugu yar ah oo lagu helo ruqsada beeraha ee dhalinyarada.

Oggolaanshaha beeraha ma beddelayo ruqsada barashada. Weli waa inaad heshaa oggolaanshaha barashada oo aad buuxisaa dhammaan shuruudaha tababarka wadista ka hor intaadan helin shatigaaga darawalnimo ee ugu horreeya. Ruqsada beeraha ma dhaafayo shuruudaha lagu helo shatiga darawalnimada ee Washington marka ugu horraysa.

### WARQADAHA DIGNIINTA WAKHTIGA HORE

DOL waxay dirtaa warqado dhammaan darawalada da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 21 sano ee helay jebinta ugu horreysa ee taraafikada. Fursadda darawal uu ku galo shil waxay labanlaabantaa kadib marka uu helo jebinta ugu horreysa. Waalidiinta iyo masuuliyiinta dhalinyarada haysta shatiga heer-dhexe sidoo kale waxay helayaan warqado la mid ah marka uu dhaco shil ama jebin. Ujeeddada warqadda waa in ay ka caawiso darawalada dhalinyarada inay fahmaan halista ku jirta jebinta joogtada ah iyo in la yareeyo ku celcelinta khaladaadka.

## 1.9 | CAAFIMAAD

### BAARITAANADA ARAGGA

DOL waxay hubin doontaa araggaaga ka hor inta aan laguu soo saarin shatiga darawalnimada. Haddii aad isticmaasho muraayado sixitaan ah ama lensyo indhaha ah, tani waa lagu qori doonaa shatigaaga.

- Xasuuso inaad had iyo jeer xirato muraayadahaaga ama lensyadaada markaad wadayso gaariga.
- Si joogto ah uga hubi indhahaaga dhakhtar indhaha ku takhasusay.

### XUBIN DEEQE

Markaad helayso shatigaaga, waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad rabto inaad noqoto qof xubin deeqe ah. Haddii aad doorato, calaamadda ♥ wadnaha ee xubin ku deeqaha ayaa ka soo muuqan doonta shatigaaga, macluumaadkaagana waxaa lagu dari doonaa diiwaanka dadka bixiya xubnaha.

DONATE LIFE TODAY!

**Kala xaxiir LifeCenter Northwest barta lcnw.org ama booqo websaydka la iska-diiwaangaliyo, donatelifetoday.com, wixii macluumaad dheeraad ah.**

## CALAAMADAHA CAAFIMAADKA

Waxaad haysataa ikhtiyaarka ah inaad ku darto ama ka saarto calaamadaha naafonimada ama caafimaadka ee shatigaaga darawalnimada ama kaarka aqoonsiga. Marka ay dhacdo xaalad degdeg ah, calaamadahan waxay siiyaan shaqaalaha gurmadka xog ku saabsan sida aad ula xiriirto ama waxay u sheegaan in aad leedahay xaalad caafimaad oo saameyn karta xaaladda degdegga ah.

Waxaad ku dari kartaa mid ama in ka badan calaamadaha hoos ku taxan diiwaankaaga.




Naafonimada korriinka




Dhagoolnimada ama dhaga culayska



Digniinta caafimaad



## 1.10 | TAAGEERO

Si aad u waddo mootooyin ama gaadiid ganacsi oo waaweyn, waa inaad heshaa taageero dheeraad ah oo lagu daro shatigaaga darawalnimada gaarka ah. Waxaad heli kartaa macluumaad dheeraad ah adigoo ka raadinaya **endorsement (taageerida)** bogga dol.wa.gov oo hoos u rogaya ilaa nooca aad rabto.

## 1.11 | DARAWALADA DA'DA AH

Go'aannada ku saabsan awooddaada wadista looguma salayn karo da'da oo keliya. Si kastaba ha ahaatee, isbeddellada ku yimaada aragga, awoodda jireed, iyo falcelinta degdegga ah waxay keeni karaan walaac la xiriira badbaadada. Adigoo si sax ah u qiimeynaya isbeddellada la xiriira da'da, waxaad beddeli kartaa habkaaga wadista si aad ugu sii ahaato darawal nabdoon waddada ama aad u doorato noocyo kale oo gaadiid ah.

Haddii aad dareentay isbeddello ku yimid araggaaga, caafimaadkaaga jireed, fiiro gaar ah, ama kartidaada aad ugu falcelin karto isbeddellada lama filaanka ah, waa muhiim inaad fahanto sida isbeddelladaasi u saamayn karaan awooddaada wadis ee badbaadada leh. Wadista Si Badbaado ah Iyadoo Si Quruxsan Loo sii Gaboobayo (Driving Safely While Aging Gracefully) waa agab uu sameeyay USAA (USAA (United Services Automobile Association educational foundation, Mu'asasada Waxbarashada ee Ururka United Services Automobile Association) Educational Foundation, Maamulka Qaranka ee Badbaadada Taraafika Waddooyinka Waaweyn (National Highway Traffic Safety Administration), iyo AARP (American Association of Retired Persons, Ururka Reer Mareykan ee Dadyowga Hawlgabay). Buuggani wuxuu kaa caawin karaa inaad garato calaamadaha digniinta ah isla markaana kuu soo bandhigo talooyin waxtar leh oo kaa caawinaya inaad sii ahaato darawal badbaado leh. Si aad u soo dejiso buuggan, booqo nhtsa.gov oo ka raadi **driving safely (wadista badbaadada leh)** sanduuqa raadinta ee ku yaal qaybta sare ee bogga hore.

## 1.12 | IMTIXAANNADA SHATIGA WADISTA SHAKHSIYEED

### LAWO IMTIXAAN

Ka hor inta aan laguu oggolaanin inaad noqoto darawal shati leh, waa inaad gudubtaa laba imtixaan.

**Imtixaanka Aqoonta Wadista**

- Imtixaanka aqoonta wadista wuxuu qiimeeyaa fahamkaaga ku saabsan xeerarka waddooyinka ee gobolka Washington.
- Waa inaad marka hore gudubtaa imtixaanka aqoonta ka hor inta aadan qaadan imtixaanka xirfadda wadista.
- Markaad gudubto imtixaanka aqoonta, waxaad haysataa laba sano si aad u dhammaystirto imtixaanka xirfadda.

**Imtixaanka Xirfaddaha Wadista**

- Imtixaanka xirfadda wadista wuxuu qiimeeyaa awooddaada aad ugu dabaqayso xeerarka waddooyinka ee gobolka Washington.

- Adiga iyo imtixaan-qaadaha ayaa keliya loo oggol yahay inaad ku jirtaan gaariga inta lagu jiro imtixaanka. Waxaa laga reebayaa oo keliya xayawaanada adeegga iyo turjubaanada luqadda dhegoolaha.
- Gaariga la isticmaalayo waa inuu ahaadaa mid si sharci ah u diiwaangashan oo leh shati sax ah. Gaarigu waa inuu leeyahay caddayn caymis mas'uuliyad (oo muujinaysa magaca qofka siyaasadda iska leh ama faahfaahinta gaariga) isla markaana uu ku jiro xaalad shaqo oo ammaan ah. Nalalka biriiga, nalalka calaamadaha, iyo suunka kuraasta waa inay dhammaantood si fiican u shaqeeyaan. Imtixaan-qaadahaaga wuxuu xaqiijin doonaa dhammaan shuruudaha ka hor inta uusan imtixaanku bilaaban.




## QAABKA LOO QAATO IMTIXAANNADA

Waxaa jira laba siyaabood oo aad ku qaadan karto imtixaannada shatiga darawalnimada.

- Ka raadi goob imtixaan oo ka tirsan iskuulada tababarka darawalnimada adigoo raadinaya **approved driver training school (iskuulka loo ansixiyay tabbabarida darawalka)** bogga dol.wa.gov.
- Qorshee ballan adigoo adeegsanaya License Express si aad imtixaanka uga gasho xafiiska bixinta shatiga darawalnimada.




## 1.13 | TABBABARKA WAXBARASHADA DAWARAWALNIMADA

Iskuulada tababarka darawalnimada ee la ansixiyay si ay u bixiyaan koorsooyin loogu talagalay darawalada cusub ee da'doodu ka yar tahay 18 sano waxay **fasalka bixinaya casharka tawabarka** iyo **tabbabar dhab ah** oo uu bixiyo macallin haysta shati.

Ikhtiyaarada iskuulada waxaa ka mid ah iskuulo gaar loo leeyahay iyo degmooyin dugsiyeed oo la xushay. Khariidad muujinaysa iskuulada la ansixiyay iyo adeegyada ay bixiyaan waxaa laga heli karaa adigoo ka raadinaya **driver training school (iskuulka bixiya tabbabarka darawalnimo)** bogga dol.wa.gov.

### KA WEYN 18 SANO

Darawalada ka weyn 18 sano ee aan qaadan koorsada tababarka darawalnimada waxay la kulmaan khatar sare oo shil. Si arrintan wax looga qabto, qaar ka mid ah iskuulada tababarka darawalnimada waxay sidoo kale bixiyaan koorsooyin badbaadada taraafikada oo loogu talagalay dadka waaweyn ee cusub ee da'doodu ka weyn tahay 18 sano. Waxaad qaadan kartaa koorsooyinkan adigoo ah darawal cusub, qof cusub oo dalka Maraykanka yimid, ama si aad u cusboonaysiiso xirfadahaaga wadista. Tababar habboon iyo dib-u-eegis xirfadeed waa muhiim qof kasta da'diis.

## 1.14 | HAGAYAASHA DARAWALLADA CUSUB

Dadka waayo-aragga leh ee tababarka wadista ah waxay noqon karaan taageero weyn oo waxtar u leh darawalada cusub. In la tuso dabeecad wadis badbaado leh iyo isgaarsiin furan waa laba siyaabood oo muhiim ah oo waalidiintu ama masuuliyiintu uga qaybqaadan karaan barashada darawalada dhalinyarada ah.

Koorsooyinka tababarka darawalnimada ee ardayda ka yar 18 sano waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan fasal loogu talagalay waalidiinta ama masuuliyiinta. Ka qaybgalka kulamadan wuxuu barayaa masuuliyiinta barnaamijka iyo shuruudaha ah in la dhammaystiro 40 saacadood oo wadis maalmeed ah iyo 10 saacadood oo wadis habeenkii ah.

Khayraad dheeraad ah waxaa lagu heli karaa adigoo ka raadinaya **teen safe driving agreement (heshiiska wadista badbaadada leh ee dhalinta)** goobta dol.wa.gov.

## 1.15 | SII HEYSASHADA LEYSANKA

### BEDDELIDDA LEYSANKAAGA WADISTA

Haddii shatigaaga uu dhumo, la xado, la burburiyo, ama aanu si fiican u akhrismin, waxaad codsan kartaa beddelkiisa adigoo si toos ah uga dalbanaya onlaynka bogga dol.wa.gov. Sidoo kale waxaad si shaqsi ah uga codsan kartaa nuqul cusub xafiis kasta oo bixiya shatiga darawalnimada.

### DIB-U-CUSBOONAYSIINTA SHATIGA DARAWALNIMADA

- Taariikhda uu shatigaagu dhacayo waxaa laga heli karaa qaybta hoose ee shatiga. Waxaad dib u cusboonaysiin kartaa shatigaaga hal sano ka hor inta uusan dhicin.
- Dib u cusboonaysii shatigaaga adigoo adeegsanaya License Express, ama booqo xafiis bixiya shatiga darawalnimada.

### LAYSAN DHACSAN

- Haddii aad dib u cusboonaysiiso shatigaaga kadib marka uu dhaco, waxaa laga yaabaa inaad bixiso lacag dheeraad ah.
- Haddii shatigaagu dhacay muddo 8 sano ama ka badan, waa inaad mar kale gashaa imtixaannada xirfadda iyo aqoonta wadista.

## LUMINTA XUQUUQDAADA GAARI WADISTA

Wadistu waa masuuliyad weyn. Waa inaad had iyo jeer si badbaado leh u wadataa. Darawalada waxaa laga qaadi karaa xuquuqda wadista sababo kala duwan dartood, oo ay ku jiraan kuwa hoos ku xusan.

- Jebinta xeerarka shatiga heer-dhexe
- Inaad tahay qof yar oo lagu qabtay khamri, daroogo, ama hub
- Inaad urursato jebinno taraafik ah oo badan
- Wadista adigoo wata shati la joojiyay ama la laalay
- Inaad ka cararto booliska ama hay'adaha sharciga fulisa
- Wadista iyadoo la saamaysan yahay
- Tartanka gaadiidka ama wadista si khatar ah.
- Gelinta shaqaalaha dhismaha ama shaqaalaha gurmadka halis
- Ururinta ganaaxyo taraafik ah oo aan la xalin
- Geysashada dhaawac ama dhimasho iyadoo la adeegsanayo gaari ama ku dhicida qof iyo ka baxsashada goobta shilka
- Geysashada dembi culus oo la xiriira isticmaalka gaari
- Wadista adigoon haysan caymis
- Ku guuldareysiga qiimeynta kartida gaari wadista

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa adigoo ka raadinaya **license suspensions (laalitaannada leysanka/shatiga)** goobta dol.wa.gov.

## KHAMRIGA, DAROOGADA, IYO JEBINTA XEERARKA HUBKA

Dhalinyarada lagu qabto khamri, daroogo, ama hub waxay halis ugu jiraan in dib loo dhigo shatiga ilaa ay ka gaaraan 17 sano.

Markaad u qalanto inaad dib u hesho shatiga darawalnimada, waa inaad mar kale gashaa imtixaannada aqoonta iyo xirfadda wadista, xitaa haddii aad hore u qaadatay. Waxaad sidoo kale bixin doontaa lacag dib-u-soo-saarid ah marka lagu daro lacagta imtixaanka iyo shatiga. Haddii aad ka yar tahay 18 sano, waxaad u baahan doontaa oggolaanshaha waalid ama masuul.

# WADISTA IYADOO LA SAKHRAANSAN YAHAY (DUI)



Gobolka Washington, waa sharci-darro in lagu wado gaari adigoo saameyn ku leh khamri ama daroogo RCW (Revised Code of Washington, Xeerka Dib loo eegay ee Washington) 46.61.502. Wadista adigoo sakhraansan waxay keeni kartaa ciqaab halis ah oo naf iyo sharci labadaba ah.

Xeerka DUI (Driving under the influence, Wadista iyadoo la sakhraansan yahay) sidoo kale wuxuu khuseeyaa haddii aad xakameyso gaari, xitaa haddii uu yaallo meel la dhigay (RCW 46.61.503). Haddii aad awood u leedahay inaad maamusho mishiinka ama hawlgalka gaariga, waxaa lagu tiriyaa inaad gacanta ku hayso gaarigaas.
Sida uu qabo **Xeerka Oggolaanshaha La-Tuhunsan (Implied Consent Law)** (RCW 46.20.308), qof kasta oo waddo ku wado gudaha gobolka Washington wuxuu oggol yahay in la baaro haddii sarkaalka uu tuhmo inuu sakhraansan yahay ama daroogo isticmaalay.

**Heerka Khamriga ee Laga Ogaado Dhiigga (BAC)**
Baaritaanka BAC (Blood Alcohol Concentration, Heerka Khamriga ee Laga Ogaado Dhiigga) wuxuu cabbiraa inta khamri ee ku jirta jirkaaga. Darawallada da'doodu tahay 21 sano iyo ka badan, haddii ay yeeshaan BAC dhan .08% ama ka badan, waxaa loo tixgeliyaa inay sakhraansan yihiin, taas oo keeni karta ciqaab sharci ah. Darawallada ka yar 21 sano, haddii ay yeeshaan BAC dhan 0.02%, waxay wajahayaan ciqaab la mid ah tan dadka waaweyn.

**Tetrahydrocannabinol (THC) Heerka Hashiiska ee kujira Nidaamyada Jidhka**
Baaritaanka THC (Tetrahydrocannabinol) wuxuu cabbiraa inta walaxda THC ee ka soo baxda hashiishka ee ku jirta jirkaaga. Darawallada da'doodu tahay 21 sano iyo ka badan, haddii dhiiggooda lagu helo in ka badan 5 nanogram oo THC firfircoon halkii millilitar ee dhiigga, waxaa loo tixgeliyaa DUI, taas oo keeni karta ciqaab sharci ah. Darawallada ka yar 21 sano, haddii dhiiggooda lagu helo wax ka badan 0 nanogram oo THC firfircoon halkii millilitar, waxay wajahaan ciqaab la mid ah tan dadka waaweyn.

Haddii aad diido in lagaa baaro khamriga ama daroogada, waxaad lumin kartaa xuquuqda wadista 90 ilaa 730 maalmood, ama ilaa aad gaarto da'da 21 sano, hadba midka dheer ayaa la qaadanayaa. Muddada hakinta shatigaaga waxay ku xirnaan doontaa dhowr arrimood, oo ay ku jirto inta jeer ee aad hore u gashay xadgudubyo.

| Dadka waaweyn (21 iyo wixii ka weyn) | Dadka yaryar (wixii ka yar 21) |
|---|---|
| BAC ee 0.08% ama ka badan THC ee 5.00 ng ama ka badan | BAC ee 0.02% ama ka badan THC ka sareeyso 0.00 ng |

**Xitaa darawal khibrad leh ma wadi karo si ammaan ah kadib cabitaanka khamriga ama isticmaalka daroogada. Badbaadi noloshaada iyo tan dadka kale adigoo go'aansada inaadan waligaa wadin adigoo sakhraansan ama daroogo isticmaalay!**

Dembiyada la xiriira khamriga iyo daroogada waxay ku qoran yihiin diiwaanka wadistaada nolosha oo dhan. Haddii lagu xiro adigoo wadaya gaari adigoo sakhraansan, ciqaabtu waa mid aad u adag: luminta shatiga wadista ganaaxyo culus xabsi Koror weyn oo ku yimaada lacagta caymiska.

Dambiyada la xaqiijiyay waxay keeni karaan mid ama in ka badan oo ka mid ah ciqaabahan soo socda:

- Xuquuqda wadista oo laga joojiyo 90 maalmood ilaa 4 sano
- Shati tijaabo ah
- Qalab lagu rakibo gaariga si laguugu oggolaado inaad wadid
- Caddeyn maaliyadeed oo muujinaysa masuuliyaddaada
- Warbixin qiimeyn iyo daawayn khamri ama daroogo
- Inaad dib u codsato shati cusub, mar labaad gasho imtixaanada aqoonta iyo xirfadda wadista, isla markaana bixiso lacagta dib-u-soo-saarka

## SHARCIGA DHALOOYINKA FURAN

Sida uu qabo sharciga dhalooyinka furan (open container law), waa jabinta xeerka taraafikada haddii qof kasta oo gaariga saaran oo ku sugan waddo:

- Uu cabo khamri ama isticmaalo hashiish.
- Haysto dhalooyin khamri ama badeecooyin hashiish ah oo la furay, qabaan shaanbado la dilaaciyay, ama qayb ahaan la isticmaalay.
- Qariyo khamri ama hashiish gudaha weel aan calaamad lahayn ama si khaldan loo calaamadeeyay.

Dhalooyinka khamriga iyo badeecooyinka hashiishka ee furan waxaa lagu qaadi karaa oo keliya boorsada dambe ee gaariga ama meesha xamuulka ee gaari nooca taraaka ah. Ma bannaan in weelal khamri ama hashiish ah lagu hayo meelaha kaydka ah ee wadaha uu si toos ah u heli karo.

## 1.16 | ADEEGYO DHEERAAD AH

### BEDDELIDA CINWAANKA AMA MAGACA

Haddii cinwaankaaga isbeddelo, waa inaad cusboonaysiisaa macluumaadkaaga gudaha License Express gudahood 10 maalmood laga bilaabo maalinta isbeddelka. xafiiska shatiga wadista. (Driver Licensing office)

### DIWAANGALINTA CODBIXIYAHA (VOTER REGISTRATION)

Waxaad isaga diiwaangelin kartaa inaad codeyso gudaha websaydka Xoghaya Gobolka (Secretary of State), sos.wa.gov, ama markaad ka hesho leysan xafiiska bixiya leysanka. Dadka degan ee da'doodu u dhaxayso 16 iyo 17 sano waxay dooran karaan is-diiwaangelin hore marka ay dalbanayaan shatiga wadista ama kaarka Aqoonsiga.

### ISKA-DIIWAANGELINTA ADEEGYADA LA XULASHO (SELECTIVE SERVICE)

Waxaad isdiiwaangelin kartaa Nidaamka Adeegyada La Xulasho ee Mareykanka ( United States Selective Service System) markaad codsaneyso leysan ama kaarka Aqoonsiga. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga Xafiiska Qareenka Guud ee Gobolka Washington (Washington State Office of the Attorney General): atg.wa.gov.

### DIIWAANADA MATAANAHA (TWIN REGISTRY)

Marka aad codsanayso shatigaaga, waxaa lagu weydiin doonaa haddii aad tahay mataan. Diiwaanka Mataanaha ee Gobolka Washington (Washington State Twin Registry) waxaa loogu talagalay mataanaha xiiseynaya inay ka qaybqaataan cilmi-baarisyo caafimaad iyo saynis. Jaamacado ayaa la xiriiri kara dadka is aqoonsaday inay mataano yihiin iyagoo adeegsanaya xogta Department of Licensing. Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan booqo wstwinregistry.org.

# CUTUBKA 2
# GAADIIDKA



# 2.0 | ADEEGYADA GAADIIDKA

Sida darawal shati haysta, waa inaad raacdaa xeerarka waddada. Sidoo kale, waa inaad fahantaa shuruudaha gaadhiga aad wado. Adeegyo badan oo lagama maarmaan u ah dayactirka gaadhigaaga waxaad ka heli kartaa License Express. Link-ga License Express waxaa laga heli karaa geeska sare ee midig ee dol.wa.gov bogga hore. (Ciwaanka tooska ah waa secure.dol.wa.gov/home.) Waxa kale oo aad booqan kartaa xafiiska ruqsadda gaadiidka si aad shaqooyinka si toos ah u qabato.

## SHAHAADADA MILKIYADDA

Department of Licensing waxay bixisaa Shahaadada Milkiyadda (Certificate of ownership) (oo sidoo kale loo yaqaan title dukumeentiga lahaanshaha) inta badan gaadiidka. Dukumeentiga lahaanshahu wuxuu muujinayaa milkiilaha sharciyeysan ee gaadhiga, VIN (Vehicle Identification Number, Nambarka Aqoonsiga Gaadhiga), iyo macluumaadka bangiga (haddii uu jiro amaah). Tani waa dukumiinti muhiim ah! Ku hay meel ammaan ah, laakiin ha gelin gudaha gaariga.

## DIIWAANGELINTA

Dhammaan baabuurta waa in lagu diiwaangeliyaa Department of Licensing. Kahor intaadan diiwaangelin baabuur gudaha gobolka Washington, waa inaad haysataa laysanka darawalnimada (haddii aan sharcigu kaa dhaafin). Macmiisha sheegta in laga dhaafay shuruudda laysanka waxay buuxin karaan Foomka Diiwaangelinta Baabuurka ee Laysanka Darawalnimada laga dhaafay (Vehicle Registration Driver License Exemption). Dad cusub oo ku soo guuray gobolka waxay haystaan 30 maalmood si ay u dhammaystiraan diiwaangelinta baabuurkooda. Baabuur kasta oo laga soo iibsado gobol kale waa in si degdeg ah loogu diiwaangeliyaa gobolka Washington.

Si aad u diiwaangeliso baabuurkaaga, waxaad u baahan doontaa:

- Certificate of Ownership (Title) Shahaadada Lahaanshaha ee Hadda (dukumeentiga lahaanshaha baabuurka).
  (Haddii aad lumiso shahaadada lahaanshaha baabuurkaaga, la xiriir gobolka uu ka soo baxay si aad u codsato mid cusub.)
- Laysanka darawalnimada ee Washington waa in ay haystaan dhammaan dadka baabuurka lagu diiwaangeliyey.

Dukumeenti cusub oo diiwaangelin ah ayaa lagu siin doonaa sannad kasta markaad cusboonaysiiso taabyadaada baabuurka. Saxiix diiwaangelinta cusub ee la siiyay oo ku hay gudaha baabuurkaaga.

## CIWAANKA BAABUURKA

Beddelidda cinwaankaaga ee ku yaal laysanka darawalnimada ma beddelayso cinwaanka diiwaangelinta baabuurka. Waxaad cinwaankaaga ku beddeli kartaa khadka tooska ah adigoo adeegsanaya License Express, ama si shaqsi ah uga tag xarunta diiwaangelinta baabuurta.

# 2.1 | WARBIXINTA IIBINTA

## SHAQSI ILAA SHAQSI

Haddii aad iibiso, beddelato, hadiyad siisid, ama ka takhalusto baabuurkaaga, waa inaad buuxisaa Foomka Warbixinta Iibka Baabuurka (Vehicle Report of Sale) 5 maalmood gudahood. Ka saar taarikada (license plates) gaadhiga, bixi khidmadda, kadibna gudbi warbixinta iibka (report of sale) adigoo tagaya xafiiska liisanka gaadiidka (vehicle licensing office), ama booqo bogga oo ku qor **report of sale (warbixinta iibka)** barta dol.wa.gov. Warbixinta iibka ma wareejiso lahaanshaha baabuurka. Marka baabuur la iibinayo, shahaadada lahaanshaha (title) waa in ay saxiixaan oo taariikhda ku qoraan milkiilayaasha, kadibna lagu wareejiyaa iibsadaha. Iibsadaha waa inuu keenaa shahaadada la saxiixay xafiiska shatiga si uu u wareejiyo lahaanshaha gudahood 15 maalmood, si uu uga fogaado lacag ganaax ah.

## IIBIYAHA GAADIIDKA ILAA QOF GAAR AH

Haddii baabuurka uu iibiyo dukaanka iibka baabuurta, mararka qaarkood dukaanku wuu kuu gudbin karaa warbixinta iibka, balse ma aha waajib sharci ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaa adiga kuu fiican inaad isla adigu gudbiso warbixinta iibka.




## 2.2 | SHATIGA TAARIKADA GAADHIGA

Taarikadaha shatiga waa in si cad oo muuqata loogu dhejiyaa hore iyo gadaalba ee baabuur kasta oo laga diiwaangeliyey gobolka Washington. Waa iney ahaadaan kuwo nadiif ah si fududna loo aqrin karo. Waad isticmaali kartaa xarig ama fareem ku wareegsan taarikadda shatiga, laakiin sharci darro ayey tahay in lagu daboolo xarfaha, tirooyinka, ama taabyda ku yaal taarikadda.

## 2.3 | CEYMISKA LOO BAAHANYAHAY

Waa inaad sidataa caddeynta caymiska adiga ama aad ku hayso gudaha baabuurkaaga. State-ka Washington wuxuu ku waajibinayaa inaad haysato oo aad sidato caddeyn caymis mas'uuliyadeed. Caymiskaagu waa inuu daboolaa ugu yaraan qodobadan:

- $25,000 ama ka badan – lacag lagu bixinayo dhaawaca jirka ama dhimashada hal qof haddii shilku saameeyo hal qof
- $50,000 ama ka badan lacag lagu bixinayo dhaawaca ama dhimashada laba qof ama in ka badan hal shil gudaheed
- $10,000 ama ka badan lacag lagu bixinayo dhaawaca ama burburka hantida dadka kale hal shil gudaheed




Gaadhi walba wuxuu leeeyahy dabeecado asaga u qaas ah Baabuurta way ku kala duwan yihiin cabbirkooda, matoorkooda, qalabka amniga, qalabyada dheeraadka ah, tignoolajiyada, iyo sida ay u maamulmaan waddada. Waa muhiim inaad akhrido buugga tilmaamaha ee baabuur kasta oo aad waddo. Qaado waqti aad ku barato qaybaha aasaasiga ah ee baabuurka.

## HOWLAHA

Markaad gaariga gasho, waxaad si fudud ku ogaan kartaa haddii yahay mid otomaatig ah ama midka leh giyarka gacanta. Isticmaalka mid kasta wuxuu u baahan yahay aqoon iyo tababar. Akhri buugga milkiilaha (owner’s manual) si aad u fahamto nidaamyada, qalabyada, cabbirayaasha, iyo aaladaha khaaska u ah baabuurkaas. Baro nidaamka farsamo ee baabuurkaaga ka hor intaadan kaxayn, si maskaxdaadu u diiradda saarto waddada markaad waddo.

## ISBEDDELADA

Markasta oo aad baabuur gasho, waa inaad sameysaa hagaajin si ay ugu habboonaato badbaadadaada, xakamaynta, iyo raaxadaada. Hagaaji isteerinka, kursiga, iyo muraayadaha, si aad u yeelato aragti cad oo wanaagsan. Waa inaad si fudud u gaari kartaa bareegyada, baydalka, iyo qalabka xakamaynta.

## TIGNOOLAJIYADA BADBAADADA GAADIIIDKA

Horumarka iyo hal-abuurnimada ka jira warshadaha gaadiidka ayaa horseeday horumarinta nidaamyada badbaadada kuwaas oo ka caawiya in la yareeyo saameynta khaladaadka aadanaha Iyo dhaqamada aan badbaadsanayn. VST (Vehicle Safety Technology, Tignoolajiyada Badbaadada Gaadiidka) iyo ADAS (Advanced Driver Assistance Systems, Nidaamyada Caawiya Wadista ee Casriga ah) waxay yareeyaan saameynta shilalka iyagoo isku dayaya in shilalka laga hortago. Nidaamyadan waxay bixin karaan digniino horudhac ah ama dheeraad ah kuwaas oo kordhiya waqtigaaga falcelinta. Nidaamyadan waxay bixiyaan digniino horudhac ah ama dheeraad ah oo kaa caawin kara inaad si degdeg ah uga falceliso xaaladaha degdegga ah. Adigaa weli si buuxda mas'uul uga ah hawlgalka iyo wadista gaadhigaaga.

Xitaa haddii gaarigaagu leeyahay VST iyo ADAS, waa inaad sii waddaa isticmaalka farsamooyinka ogaanshaha khatarta iyo aqoonta xeerarka waddooyinka, sababtoo ah nidaamyadan waxay leeyihiin xaddidaadyo. Tusaale ahaan, nidaamyadan waxay ku ogeysiin karaan haddii uu jiro gaari ku jira aaggaaga aadan si fiican u arkin; si kastaba ha ahaatee, ma ogaan karaan haddii uu jiro gaari laba waddo u jirta oo sidoo kale qorsheynaya inuu ku biiro taraafikada. Sidoo kale, tignoolajiyada ogaanshaha ee gaarigaaga mararka qaar ma aqoonsan karto dadka lugeynaya, wadanaya kuraasta curyaamiinta, ama fuushan baaskiilada ee ku dhow gaarigaaga. Adiga ayaa masuul ka ah inaad siiso dadkaas xaqa waddada sida uu sharciga gobolka qabo. Intaa waxaa dheer, sensors-ka ayaa wasakh noqon kara ama calaamadaha waddooyinka ayaa libdhi kara, taasoo adkaynaysa shaqada tignoolajiyada.

Waa muhiim inaad si wanaagsan u taqaanid astaamaha iyo tignoolajiyada gaariga aad waddo. Had iyo jeer ha damin nidaamyadan ilaa xaaladaha cimilada ay aad u xumaadaan oo digniinahoodu kugu noqdaan mashquul. Hubi inaad si hufan u isticmaali karto qaababka iyo teknoolajiyada badbaadada ee gaarigaaga. Si aad wax badan uga barato tignoolajiyada badbaadada ee gaarigaaga ku rakiban, akhri buugga hagaha gaariga, weydii xafiiska iibka baabuurta, ama booqo mycardoeswhat.org.

Halkan waxaa ku yaal qaybo iyo astaamo muhiim ah oo ka tirsan VST iyo ADAS:

1. **Nidaamka ka hortagga isku dhaca.** Wuxuu ogaadaa caqabadaha hortaagan wuxuuna bixiyaa digniino si uu u ka hortago shilalka. Qalabkan waxaa ka mid ah astaamo sida AEB (Automatic emergency braking, bareeg degdeg ah oo otomaatig ah), digniinta shilka hore (Forwad Collision Warning), iyo digniinta ka bixitaanka waddada (Lane Departure Warning).
2. **ACC (Adaptive cruise control, Xakamaynta xawaaraha otomaatiga ah ee la qabsiga leh).** Waxay ilaalisaa xawaare la dejiyey laakiin waxay si otomaatig ah u yaraysaa ama u kordhisaa xawaaraha iyadoo ku saleysan fogaanta gaariga hore si loo hubiyo ammaan iyo kala fogaansho sax ah. ACC waxay ka dhigtaa safarrada dhaadheer kuwo raaxo leh, iyadoo yaraynaysa baahida lagu hagaajinayo xawaaraha mar kasta.
3. **Caawinta ilaalinta khadka waddada** Waxay la socotaa calaamadaha khadadka waddada waxayna siisaa gacan ku hagaajin ama digniin haddii gaarigu ka baxo khadkiisa si aan ula kac ahayn. Astaantan waxay sidoo kale kor u qaadaa badbaadada iyadoo ka hortagaysa in gaarigu si lama filaan ah uga leexdo waddada.
4. **Ogaanshaha meelaha aan la arki karin** Waxay isticmaashaa sensaris si ay ula socoto meelaha la arki akrin ee gaariga waxayna digniin siisaa darawalka haddii uu jiro gaari ku jira khadka ku xiga. Tani waxay yareysaa halista isku dhacyada marka la beddelayo khadka wadista.
5. **Caawinta baarkinka** Waxay isticmaashaa sensors iyo kamarado si ay uga caawiso baarkin, iyadoo bixineysa talo muuqaal ah iyo/ama cod. Tani waxay ka mid noqon kartaa astaamo sida baarkin otomaatig ah.
6. **Aqoonsiga calaamadaha taraafikada.** Waxay isticmaashaa kaamirooyin si ay u aqoonsato uguna tarjunto calaamadaha waddooyinka, kadibna waxay soo bandhigtaa xogta muhiimka ah ee darawalka. Astaantan waxay ka caawisaa darawalka inuu ilaaliyo xawaaraha la oggol yahay iyo xeerarka waddooyinka ee muhiimka ah.
7. **Nidaamka kormeerka darawalka.** Waxay la socotaa dhaqanka darawalka waxayna bixisaa digniin haddii lagu arko calaamado muujinaya hurdo ama mashquulnimo. Tani waxay kordhisaa badbaadada iyadoo ku dhiirigelinaysa darawalka inuu ahaado mid feejigan oo diiradda saaraya wadista.
8. **Digniinta taraafikada ka timaadda dhinacyada.** Waxay ka digtaa haddii gaari kale uu ka imanayo dhinac kale, gaar ahaan markaad ka baxeyso meel baarkin ah. Astaantan waxay yareysaa khatarta isku dhacyada marka aragtidaadu xaddidan tahay.

9. **Xakamaynta otomaatigga ah ee iftiinka sare.** Waxay si otomaatig ah u hagaajisaa iftiinka hore ee gaariga iyadoo ku saleysan taraafikada soo socota iyo xaaladaha deegaanka. Tani waxay kaa caawisaa inaad si fiican u aragto adigoon dhibin darawallada kale ee ka hor imanaya.
10. **Nidaamka yareynta isku dhaca.** Nidaamkan wuxuu yareeyaa saameynta haddii isku dhaca aan laga maarmi karin. Wuxuu ka sii horumarsan yahay nidaamka ka hortagga isku dhaca, wuxuuna ka koobnaan karaa astaamo sida xiridda suunka kursiga iyo bareeg qabashada gaariga kadib isku dhaca.

Tignoolajiyadu way kaa caawin kartaa, laakiin ma beddeli karto wadis feejigan. Waa inaad taqaanno astaamaha VST iyo ADAS ee gaarigaaga, si kastaba ha ahaatee waa inaad weli ku tiirsanaataa caadooyinkaaga wadista ee ammaan ah.



## 2.5 | ILAALINTA GAADIIDKA

Mas'uuliyadda hubinta in gaarigaagu ammaan yahay waa adiga. Dhib yar oo la iska indha tiro wuxuu si dhakhso ah ugu baddali karaa mid dhib weyn keena (kharash badan, mid aad khatar u ah) marka iftiinnada digniinta ee dhaashboodhkaaga ay shidmaan, tallaabo degdeg ah qaado. La tasho buugga milkiilaha gaariga si aad u ogaato dayactirka joogtada ah ee lagula taliyo.

## TAAYARADA

| | |
|---|---|
| **Qalabka dusha taayirka kuxiran** | Taayirrada dhamaadka ah waxay sababi karaan siibasho iyo rogrogid, gaar ahaan haddii waddadu qoyan tahay. Qalabka dusha taayirka waa inuusan ka yarayn 2/32 inji. |
| **Cadaadiska taayirka** | Cadaadis taayir oo hooseeya wuxuu saameeyaa xakamaynta iyo xawaaraha gaarigaaga.<br><br>Cadaadiska saxda ah ee taayirrada waxaa lagu arkayaa calaamadda Taayarka iyo Macluumaadka Rarida (Tire and Loading Information) ee ku taal dhinaca albaabka darawalka ama buugga milkiilaha gaariga. |

## MURAAYADAHA GAARIGA

- Had iyo jeer nadiifi muraayadda hore iyo daaqadaha gudaha iyo dibadda.
- Hubi in dareeraha nadiifiyaha daaqadaha uu buuxo.
- Ka saar barafka, dhaxanta, ama ceeryaanta dhammaan daaqadaha kahor intaadan wadin.
- Ha ku dhejin waxyaabo muraayadda hore ama daaqadaha si aanay u xannibin aragtidaada.
- Raac talooyinka soo saaraha gaarigaaga marka aad beddelayso tirtirayaasha muraayadda hore.




## IFTIINKA HORE

Sharciga Washington wuxuu sheegaya in aad shiddo iftiinka hore nus saac kadib qorax dhaca ilaa nus saac ka hor qorax soo bixidda. Si kastaba ha ahaatee, si fudud ayey u xasuusnaan kartaa inaad iftiinka hore shiddo:

- Xilli walba.
- Marka ey mugdi tahay.
- marka roob da'ayo baraf jiro ceeryaamo ama qiiq jiro.

**Iftiinka hore wuxuu kaa caawiyaa inaad aragto, laakiin sidoo kale dadka kale ayaa kuu arki kara!**

Gaariga qaarkood waxay leeyihiin iftiin maalmeed (daytime running lights) oo shidma markaad daarto gaariga. Si kastaba ha ahaatee, iftiimaha maalinta ma aha kuwo u iftiin badan sida nalalka hore ee gaadhiga, sidoo kalena ma shiddaan iftiimaha danbe.

Hubi in dhammaan iftiimaha gaarigaagu ay nadiif yihiin, si fiican u shaqeeyaan, oo ay jihada saxda ah u jeedaan. Haddii calaamada "lamp out (shaqeyn la'aanta nal dibadda ah)" ay ka soo muuqato dhaashboodhka, waa waqtigii aad beddeli lahayd nalkaas.

Waxaad isticmaali kartaa iftiinkaada ugu sareeya marka aad ku waddo waddooyin furan oo aan lahayn nalal waddo, laakiin xasuuso inaad u beddesho iftiinka caadiga ah marka aad:

- 500 oo fiit u jirto gaari soo socda.
- 300 oo fiit ka dambeyso gaari kale.

## IFTIINKA BIREEGA

Iftiinka bireega wuxuu u sheegaa darawalka kaa dambeeya inuu yareeyo xawaaraha oo uu diyaar u noqdo inuu joogsado. Iftiinnadaada bireega waa casaan, waana in si cad looga arki karaa ugu yaraan ka fog 100 fiit.

Haddii iftiinka bireega uusan shaqaynayn, isticmaal ishaarada gacanta. Si taas loo sameeyo, gacantaada bidix ka saar daaqadda darawalka, farahana u fiiq dhulka hoostiisa. Tani waxay u sheegaysaa gaariga kaa dambeeya inuu yareeyo xawaaraha oo uu diyaar u noqdo inuu joogsado.

## ASTAAMAHA LEEXASHADA

Samee caado ah in aad mar kasta calaamad bixiso ka hor intaadan jihada beddelin xitaa haddii aadan arkin cid kale oo wadata jidka.

- Bixi calaamadda 100 fiit ka hor intaadan leexan.
- Kadib markaad leexato, hubi in calaamaddaada ay joojiso biligleynta si aysan u sii ifin.



## ISHAARADA GACANTA

Haddii mid ama labadaba calaamadahaaga aysan shaqayn, isticmaal ishaarada gacanta si darawallada kale ay u ogaadaan waxaad samaynayso.

**Joogsiga**
Gacantada bidix ka rido daaqada xagga darawalka. Ku fiiq fartaada dhulka. Tani waxay u sheegaysaa qofka kaa dambeeya inuu yareeyo xawaaraha oo uu diyaar u noqdo inuu joogsado.

**Bidix uleexo**
Gacantada bidix ka rido daaqada. Fartaada si toos ah ugu fiiq bidix.

**Midig u leexo**
Gacantada bidix ka rido daaqada. Gacantaada u leexi si farahaagu u tilmaamaan samada si aad u muujiso inaad leexanayso midig.

## IFTIINKA DIGNIINTA QATARAHA

Haddii gaarigaagu cilad yeesho ama aad u baahan tahay inaad joogsato xaalad degdeg ah, shid iftiinka digniinta. Tani waxay u sheegaysaa darawallada kale xaaladdaada waxayna u ogolaaneysaa inay si badbaado leh ku hareer maraan.

## KURSIGA DARAWALKA

- Habee kursigaaga si aad si cad uga arki karto muraayadda hore oo si fudud u gaari karto badeelada.
- Dhabarka kursigaaga habee si aad ugu fadhiisato si raaxo leh oo toosan. Laabtaadu waa inay ugu yaraan 10 inji ka jirtaa giraanta bareega si meesha loogu daayo baagga hawada ee badbaadada.
- Habee giraanta bareega si aad u qabsato si raaxo leh adigoo jilbaha si fudud u laabanaya.
- Iska ilaali dhaawaca qoorta adigoo hubinaya in halka-madaxa-lasaaro uu la siman yahay dhegahaaga

Markasta oo aad gaariga wado kadib qof kale, samee hagaajinta kursiga, giraanta bareega, iyo muraayadaha si aad ugu fadhiisato raaxo iyo badbaado.

## SUUNKA AMNIGA IYO ILAALINTA RAKAABKA

U xidhashada suunka kursiga si sax ah waa habka ugu waxtarka badan ee aad iskaga ilaalin karto dhaawac. Xidhashada suunka-ka waxay si weyn u yareysaa halista dhiig bax ama dhaawac halis ah haddii shil dhaco. Mar kasta xidh suun-kaaga oo hubi in dhammaan rakaabku xiran yihiin suumanka amaanka, kuwa caruurta xakameeyo, ama kuwa kor ugu qaado si sax ah.



# Xir Suunka!



Suunka kursigaaga waa inuu marayaa bartamaha laabtaada. Waligaa ha gelin gadaasha ama hoos gacanta. Suunka garabka waa inuu si fiican u daboolaa garabka iyo laabta, oo uusan ka gudbin qoorta ama wejiga. Suunka kursiga hoose waa inuu si adag oo raaxo leh u xaddidaa miskaha, hoos caloosha.

Qof kasta oo gaariga ku jira waa inuu xirtaa suunka kursiga ama si ammaan ah ugu xiran yahay qalabka badbaadada carruurta oo ansax ah.

**Waxaa sharci darro ah in aad gaariga wado ama raacdo adigoon xiran suunka ama adeegsan qalabka badbaadada carruurta. RCW (Revised Code of Washington, Xeerka Dib loo eegay ee Washinton) 46.61.687 iyo RCW 46.61.688**

Hubi in suunka kursigaaga aanu isku laabneyn, suunka hoose uu ka saaran yahay bowdadaada sare, iyo suunka dhanka jidhka uu marayo garabka dhexe. Jilibkaagu waa inuu laabmo xadka kursiga, cagahaaga waa inay taabtaan dhulka, iyo headrest-ku inuu la jaanqaado dhegahaaga.

## KURAASTA CARUURTA



Badbaadi carruurta rakaabka adigoo mar kasta isticmaalaya kursiga ku habboon da'dooda iyo cabirkooda wakhti walba oo aad (ama kuwa kale) aad la safreysaan carruur.

Nidaamyada badbaadada carruurta waa inay waafaqaan Heerarka Badbaadada Baabuurta ee Federaalka (Federal Motor Vehicle Safety Standards) oo lagu xiro gaariga iyadoo la raacayo tilmaamaha soo saaraha gaariga iyo qalabka badbaadada carruurta.

Waxaad ka heli kartaa farsamo yaqaan shahaadaysan oo ku takhasusay badbaadada carruurta si uu u hubiyo rakibidda qalabka badbaadada carruurta ee gaarigaaga.

Ka hel macluumaad dheeri ah iyo goobaha lagu hubiyo badbaadada bogga wacarseats.com.

Carruurta waa in ay joogaan heer kasta oo qalabka badbaadada ah inta kursigu u oggolaanayo ilaalinta ugu fiican.



**Gadaal u jeeda**

**Carruurta da'da ilaa 2 sano waa inay ku raacaan gaariga kursi gadaal u jeeda.**

**Da'da: Dhalasho - 2 sano**



**Horay u jeeda**

**Da'da 2 ilaa 4 sano Waa inay ku raacaan kursi leh fadhi gadaal ama hore u jeeda.**

**Da'da: 2 ilaa 4 sano**



**Caawiye**

**Da'da 4 sano iyo ka weyn: Waa inay ku raacaan kursi ama kursi kor-uqaadeah ilaa suunka hoose iyo garabka uu si habboon ugu habboonaado— badanaa da'da 8 ilaa 12 sano.**

**Da'da iyo cabirka: 4 sano ilaa 4'9"**



**Suunka kursiga**

**Dhammaan rakaabka da'da iyo dhererka ku filan u leh iney xidhaan suunka kursiga waa in ay u xidhaan si habboon.**

**Cabirka: kor-udhafay 4'9"**

## BAAGGA HAWADA EE BADBAADADA

Baagga hawada ee badbaadada iyo suumanka waxay si wadajir ah kuu ilaaliyaan haddii shil dhaco. Haddii uusan kuu xirneyn suunka kursigaaga marka baagga hawada ee badbaadadu uu shaqeeyo, waxaa khatar ku jirta inuu ku soo gaadho dhaawac culus ama geeri. Carruurta ka yar da'da 13 sano waa in aysan ku raacin kursiga hore, sababtoo ah airbag-ku wuxuu sababi karaa dhaawac halis ah ama geeri hadii eysoo boodo.




Gacmahaaga dhig dibadda giraanta bareega, qeybta kore ee giraanta. wanaagsan. Tani waxay kuu siinaysaa xakamayn.




Ka fikir giraanta bareega sida saacad. Saacad kasta waxay ka dhigan tahay meel lagu qabsado giraanta. Sawirka kore, gacmaha darawalka waxay ku jiraan 9:00 iyo 3:00.

Waxaa jira saddex hab oo leexin ah oo bixiya xakamayn siman oo joogto ah oo giraanta bareega.

# ISTEERINKA GACAN ILAA GACAN (JIID/RIIX)



Markaad isticmaasho habkan, gacmahaaga waa inay ku jiraan 9 iyo 3 ama 10 iyo 2.



Gacmahaaga ku hay booskan markaad leexanayso. Sawirka, darawalku gacanta bidix ayaa jiidaya, gacanta midigna riixaysa.



Maadaama gacmahaagu waligood ka gudbin giraanta isteerinka, waxaa yaraada halista dhaawac wejiga, gacmaha, ama gacmaha haddii airbag-ku shaqeeyo.



Gacmahaaga waligaa haka qaadin giraanta isteerinka waxaana gacanta kasta ku sii jirtaa dhinaceeda. Hal gacanta ayaa giraanta qabsata oo leexisa. Gacanta kale ayaa rogta oo joogta dhinaca ka soo horjeeda gacanta leexinaysa.



Farsamada gacan-ila-gacan waxay labada gacmood ku haynaysaa giraanta, waxay kuu oggolaanaysaa wax-ka-beddel degdeg ah, waxayna gacmahaaga ka fogeysaa aagga ay ku jirto baagga hawada ee badbaadada.

# ISTEERINKA ISKU BADALKA GACAN ILAA GACAN



Isticmaal habkan leexinta giraanta markaad ku leexanayso xawaare hoose, aragti xadidan, isgoys, markaad gaariga dhigeyso, ama markaad ka soo kabaneyso siibasho.



Markaad isticmaasho habkan, gacmahaaga waa inay ku bilaabaan 9 iyo 3 ama 10 iyo 2.



Markaad leexanayso, hal gacanta ka gudub gacanta kale si aad giraanta u qabato, ka dibna jiid giraanta sida ku habboon.



Gacanta hoose sii daa si aad dib ugu dhigto booska saxda ah ee giraanta.



Giraanta toosi markaad si habsami leh u dhammaystirto leexinta.



## ISTEERINKA HALKA GACAN

Isticmaal hal gacanta markaad gaariga gadaal u socoto ama aad adeegsanayso xakamaynta gaariga (tirtirayaasha muraayadda hore, iftiin shidayaasha, nalalka, iwm.) oo u baahan inaad gacanta ka saarto giraanta.

Booska hal gacanta ee giraanta waa muhiim si gaariga loogu hayo miisaanka saxda ah iyo leexinta xakameysan marka gadaal loo socdo.

Booska 12 waxaa lagu talinayaa kaliya marka gadaal loo socdo. Xaaladdan, jirkaaga leexi si aad u aragto waddada gadaal ka socota

# 2.8 | BAREEGA

Maamulidda gaariga si wanaagsan waxay ku xiran tahay awooddaada inaad si sax ah oo habsami leh u maamusho xawaare iyo meel mar walba.

## CADAADINTA BAREEGA

Go'aaminta cadaadinta bareega ee loo baahan yahay waa xirfad muhiim ah. Xirfaddan waxay horumari doontaa markaad tababarto oo aad la qabsato gaariga aad wado. Waxaa jira afar heer oo bareegid ah:

1. Fudud
2. Dhex-dhexaad
3. Adag
4. Xaalad Degdeg

Ujeeddadu waa inaad inta badan isticmaasho bareeg fudud iyo dhexdhexaad, laakiin mar walba waxaad isticmaali kartaa bareeg adag ama degdeg ah haddii loo baahdo. Farsamada bareegidda, ka fikir in koob biyo ah ku jiro dhabtaada oo aadan rabin inuu daato.

Dadkii gadaal kaaga imaanaya xusuusnow, sidoo kale. Bareeg adag ama degdeg ah oo aan loo baahnayn waxay ka yaabin kartaa dadka gadaal kaaga soo socda kuwaas oo filayay joojinta habsami leh.

## NIDAAMYADA BIREEGA EE AAN XIDHMIN

Nidaamka ABS (Antilock Brake System, Nidaamka Bireega ee Aan Xidhmin) ee gaarigaaga wuxuu bixiya faa'iido ammaan oo muhiim ah, maadaama uu kuu oggolaanayo inaad si hagar la'aan ah u leexato xilliga bareeg degdeg ah. ABS ma gaabiyo masaafada joojinta, laakiin wuxuu kuu oggolaanayaa inaad yeelato xakamayn leexasho oo ka fiican. Marka uu shaqeynayo, waxaad dareemi doontaa in gaarigaagu yara gariirayo.

Ku tababar bareeg adag ama bareeg degdeg ah meel weyn, bannaan, oo la siman. Ku cadaadi bareegga si xoog ah, oo dareem sida ABS-ku u joojinayo taayirrada inay xidhmaan.

# 2.9 | SHEELAREYNTA

Si aad u wadid si siman oo deggan, waa muhiim inaad barato heerarka kala duwan ee sheelareynta. Mararka qaarkood waxaad gali kartaa taraafik isdaba-joog ah halkaas oo sheelareynta kaliya ee aad u baahan tahay ay tahay inaad sii daysid bareegga. Laakiin sidoo kale waxaa jiri kara waqtiyo aad u baahan tahay inaad si degdeg ah u dardargeliso si aad uga fogaato khatar. Farsamadaada sheelareynta waa inay la mid noqotaa tan bareegga — isku day inaad dardargeliso adigoo ka fikiraya in koob biyo ah uu ku jiro jilbahaaga, adigoon rabin inuu daato.



Waa caadi in miisaanka gaariga uu yara is beddelo marka uu bilaabayo inuu dhaqaaqo. Si aad u ilaaliso xasilloonida gaariga, hubi in miisaanka uu si siman ugu qaybsan yahay dhammaan taayirrada. Dayactirka joogtada ah, cadaadiska taayirrada ee saxda ah, iyo hubinta is-hagaajinta taayirrada ayaa kaa caawin doona tan.



## GADAAL-HOR ISKU ROGA GAARIGA

Gacantaada dhig miiska si fidsan. Kor u qaad farahaaga, waxaad dareemi doontaa cadaadis badan oo ku yaal curcurkaaga. Hadda dhig farahaaga miiska oo kor u qaad curcurkaaga. Dhaqdhaqaaqan hore iyo gadaal ah waxaa lagu magacaabaa gadaal-hor isku roga gaariga (sida fallaaraha halkan lagu muujiyey).

Markaad si degdeg ah u sheelareyso, culeyska gaariga ayaa u wareega dhabarka, taasoo kordhisa cadaadiska qaybta dambe ee gaariga. Haddii aad si lama filaan ah u istaagto, culeysku wuu u wareegaa hore, isagoo kordhinaya cadaadiska qaybta hore ee gaariga.



## ISROGID DHINAC

Gacantaada dhig miiska si fidsan. Wareeji gacantaada si faraha yaryar ay miiska ugu dhagan yihiin, laakiin suulkaagu uu cirka u jeedo. Hadda dib u rogo si suulkaagu uu miiska u taabto. Dhaqdhaqaaqa dhinac-dhinaca ee gaariga waxaa la yiraahdaa isrogid (sida fallaaraha kore muujinayaan).

Markaad u leexato dhanka bidix, xoogga dibadda ee marka uu gaariga wareeganayo ayaa culeyska u wareejiya dhinaca midig ee gaarigaaga. Jidhka gaariguna dhinac buu u dhacaa.



## LIIC-LIICASHO

Gacantaada ugu hay miiska si fidsan. Dhaqaaji farahaaga bidix, isla markaana u daa gacantaada inay u dhaqaaqdo midig. Hadda si tartiib ah u rux, adigoo u muuqda sidii qof miiska u gacan haadinaya. Tani waxaa la yiraahdaa yaw (sida fallaaraha kore muujinayaan).

Markaad si xoog leh u rogeyso isteerinka dhinac ilaa dhinac, hore iyo dambena ma sii joogaan si toosan. Taayirrada hore waxay u jeedaan jihada aad isteerinka u rogeyso, halka dhabarku uu yar simbiriirixan karo, taasoo abuureysa dhaqdhaqaaq zig-zag ah.

## 2.11 | BARAHA TIXRAACA EE GAARIGA

Baraha tixraacyadu waxay ku xiran yihiin gaariga aad wadato iyo wadada aad ku jirto. Inaad barato baraha tixraacyada ee gaarigaaga waxay kaa caawinaysaa inaad si fiican u xisaabiso masaafada markaad baarkinayso, leexanayso, gadaal u socoto, ama istaagayso.

**Tusaalooyinka baraha tixraaca ee gaariga:**

- Iftiinka hore ee bidix
- Bartamaha kapotka
- Muraayadaha dhinacyada
- Bambarka dambe




Goob isgoys ah, haddii aad istaagto marka khadka istaagga uu hoos maro muraayadda dhinacaaga, waxaad ka jirtaa qiyaastii 3 ilaa 6 inji khadka. Tixraacani wuxuu kaa caawinayaa inaad ogaato meesha uu ku eg yahay hore ee gaarigaaga.




Si aad u ogaato booska aad ka joogto haadka, hubi in bartamaha kapotkaaga uu la siman yahay calaamadaha wadada. Haddii ay is le'eg yihiin, waxaad ka jirtaa qiyaastii 3 ilaa 6 inji geeska haadka.

## 2.12 | AAGAGGAADA AADAN ARKI KARIN

Aagagga aan la arki karin waa meelaha ku wareegsan gaariga ee aadan ka arki karin kursiga darawalka. Meelahan waa khatar sababtoo ah waxay gebi ahaanba qarin karaan gaari kale, mooto, ama baaskiil. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ogaato waxa ku jira aagaggaada aadan arki karin.

Mid ka mid ah siyaababaha aad ku yareyn karto aaggaada aadan arki karin waa in aad hagaajiso muraayadahaaga.

1. Hagaaji muraayadda dambe si aad si cad uga aragto daaqadda danbe adigoon u foorarin.
2. Waxaa jira laba hab oo lagu hagaajiyo muraayadaha dhinacyada si loo yareeyo aagaggaada aadan arki karin: Hab dhaqameed ama habka casriga ah. Si kastaba ha ahaatee, waa inaad sameysaa baaritaan muuqaal ah oo buuxa agagaarka gaarigaaga ka hor intaadan dhaqaaqin. Dhaqdhaqaaji madaxaaga, qoortaada, iyo jirkaaga si labada indhood ay u arkaan haddii aagaggaada aadan arki karin ay maran yihiin. Fiiro gaar ah: Marka aad madaxaaga u jeedinayso si aad u eegto, hayso isteerinka si toosan.
3. Qaar ka mid ah nidaamyada tignoolajiyada badbaadada gaadiidka ayaa leh astaamo ku digaya haddii qof ama gaari ku jiro aaggaaga aan la arki karin. Caawimaadkani waa mid faa'iido leh, laakiin samee caado ah in aad adigu si toos ah u hubiso indho la'aantaada.

# 2.13 | AAGAGGA AAN LA ARKI KARIN EE GAADIIDKA KALE

Si aad uga feejignaato deegaanka kugu xeeran, si joogto ah u eeg:

**1**. Meesha hortaada ah

**2.** Muraayadda dambe

**3+4.** Muraayadaha dhinacyada

**5+6.** Garabkaaga ka dambeeya




## FIRINTA IYO KORMEERKA

Waxa kale oo lagama maarmaan ah inaad ogaato meelaha indhaha ka qarsan ee gaadiidka kale. Isku day intii karaankaaga ah inaadan gelin meelahaas. Waad dedejin kartaa ama waad gaabin kartaa si darawalku si cad kuu arko.

Si gaar ah uga taxaddar gaadiidka waaweyn sida basaska, guryaha moobilka ah, iyo gaadiidka ganacsiga. Waxay leeyihiin meelaha indhaha ka maqan ee waaweyn, mararka qaarna waxaa loo yaqaan "meelaha aysan aag ka jirin (no zones)." Taasina waa sababta oo ah ma jiri karaan gaadiid kale oo maraya meelahaas.

U fiirso oo feejignow markaad ku dhowdahay gaadiidka waaweyn. Xasuuso: haddii aadan arkin muraayadahooda, darawalkuna ma arki karo adiga.



**Hagaaji**
Hagaaji muraayadahaaga si aad u yareyso inta ugu badan ee meelaha aragga la' ah. Mar kasta oo aad fariisato isteerinka, dib u eeg muraayadahaaga.

**Dhigtoonow**
Waa inaad ka warqabtaa wax kasta oo kugu xeeran markaad waddo. Si joogto ah u fiiri muraayadahaaga si aad ula socoto wax kasta oo isbeddelaya oo ku saabsan xaaladda wadistaada.

## 2.14 | KAHOR INTAADAN SOCON

Marka aad isu diyaarinayso inaad waddo, hab fiican oo la raaco waa:

1. **Ka hubi banaanka gaadhigaaga.** Ma jiraan waxyaabo shisheeye oo ku dheggan taayirrada, muraayad jaban oo dhulka taal ama dareere daadanaya hoosta gaadhiga? Ma jiraan waxyaabo kale oo hor istaagi kara sida carruur, xoolo yaryar, ama caqabado la xiriira cimilada?
2. **Ka hubi gudaha gaadhiga.** Ma jiraan digniino ama calaamado ifaya oo ku yaal qalabka cabbirka (gudaha dhaashboodhka)? Miyaanay daahyada daaqaduhu nadiif ahayn ama wax ka hor istaagaya aragga? Miyaanay jirin walxo dabacsan oo aan si nabdoon loo xirnayn oo u sababi kara khatar marka la waddo?
3. **Hubi dhammaan hagaajinta gudaha.** Ma dejisan yihiin muraayadahaaga? Ma ku yaallaan kursiga iyo isteerinka meel sax ah? Ma xiratay suunkaada badbaadada? Ma aamustay oo meel fog ayaad dhigtay telefoonkaaga?
4. **Adiga Iska hubi.** Ma dareemaysaa caafimaad iyo madax furan? Ma diyaar baa inaad diirada saarto wadista? Ma xasilan yihiin dareenkaaga si aad go'aanno xikmad leh ugu gaarto isteerinka gadaashiisa?

# CUTUBKA 2
# DARAWALIIN



# 3.0 | ADIGA OO GAARIGA WADAYA

Darawal ahaan, waxaad ka mid tahay bulsho ka kooban gaadiid kala duwan, waddooyin, iyo dad kala jaad ah. Is-waafajinta bulshadan waxay ku xiran tahay darawallada si ammaan ah oo masuuliyad leh ula falgala deegaanka iyo dadka kale. Waxaa jira arrimo shakhsiyadeed oo badan oo saameeya wadistaada, balse dadka badankood waxay wada leeyihiin hal ujeeddo: in ay si nabad ah u gaaraan meeshay u socdaan.

**Si aad u noqoto darawal wanaagsan, waa inaad ahaataa qof:**

1. Ogaal badan u leh naftaada, tan dadka kale, iyo saamaynta aad ku leedahay bulshada.
2. Masuul ka ah raacitaanka xeerarka waddooyinka.
3. Fahamsan sida gaarigaagu u shaqeeyo iyo inta bannaan ee uu qaato.
4. Dulqaad badan oo xasilloon.

Guushaada muddada dheer ee darawalnimo waxay ku xirnaan doontaa caadooyinka aad samaysato markaad baranayso. U tababar si ula kac ah oo ujeeddo leh. Samee caadooyin caqli leh oo ammaan ah, sida mar walba inaad gadaal u eegto si aad u hubiso meelaha aan muuqan kuwaas oo noqda kuwo si dabiici ah u dhacaya. Tani waxay kuu saamaxaysaa inaad diiradda saarto deegaanka wadista ee isbeddelaya. Marka hore waxay noqon kartaa mid kugu cuslaan karta, balse waaayo-aragnimada aad yeelato markaad gaariga waddo, waxay kaa dhigaysaa darawal ka fiican.

## CAAFIMAAD

Wadistu waxay u baahan tahay inaad ahaato mid jidh ahaan iyo maskax ahaanba u diyaarsan.

Walbahaarka maalinlaha ahi wuxuu si fudud u saameyn karaa caafimaadkaaga. Hargab daran wuxuu gaabiyaa falcelinta maskaxda wuxuuna sababi karaa xanuun jidheed. Madax-xanuun ama murqo-xanuun garbaha ah wuxuu yareyn karaa awooddaada aad gaariga ku xakamaynayso. Walbahaarku wuxuu saameeyaa awoodda aad u leedahay go'aan qaadasho xikmad leh markaad waddo gaariga. Cudurro badan ayaa saameyn kara gaari wadistaada. Kala hadal dhakhtarkaaga haddii aad ka walwalsan tahay xaalado saameyn kara gaari wadistaada.

Kahor intaadan shidin matoorka, qaado daqiiqad aad isku eegto xaaladdaada. Ma caafimaad qabtaa si ay kuu taageerto go'aan-qaadasho-xikmad leh, is-xakamayn, iyo feejignaan xaaladeed? Qaado gudo-neefsasho qoto dheer oo xoogaa ah oo diiradda saar gaari wadista. Haddii aadan si fiican dareemeyn balse aad u baahan tahay inaad meel tagto, fadlan qof kale ha wado gaariga.

## CAAFIMAAD JIREED

Caafimaadkaaga jireedka waa mudnaanta koowaad. Si toos ah ayuu u saameeyaa awooddaada aad ugu noqoto darawal ammaan ah oo wax ku ool ah. Kahor intaadan fariisan gaariga, hubi inaad caafimaad qabto **oo aadan saameyn ku yeelan khamri ama daroogo kale.**

## ARAGTI

Aragti wanaagsan ayaa aad muhiim ugu ah wadista ammaan ah, xeerarka sharciguna waxay kugu waajibinayaan inaad gudubto imtixaanka aragga kahor intaadan helin laysanka darawalnimo. Haddii aadan si cad wax u arki karin, waxaad dhib kala kulmi doontaa garashada khataraha waddooyinka iyo ka falcelintooda. Aragti fiican ayaa muhiim u ah wadista ammaan ah.

**Haddii lagaa rabo inaad xirato muraayado sixidda aragga ah:**

- Had iyo jeer xir markaad wado gaariga.
- Ka fogow isticmaalka muraayadaha sixidda ee mugdiga ama madow ee habeenkii.

**Qaybaha muhiimka ah ee aragga waa:**

- **Aragti dhinac ah.** waxaad ku arki kartaa gaadiid iyo khataro kale adigoo hore u eegaya, adigoo geeska indhahaaga ka fiirinaya.
- **Qiyaasidda masaafada iyo xawaaraha.** Aragti wanaagsan waxay kaa caawisaa inaad garato inta aad ka fog tahay gaadiidka kale, dadka lugeynaya, iyo khataraha kale.

## WAX ARAGTIDA XILLIGA HABEENKII AH

Marka la wado mugdiga, darawallo qaarkood waxay dhibsadaan iftiinka ka imanaya gaadiidka soo socda. Haddii aad dhib ku qabto aragga habeenkii, ha wadin wax ka badan intii loo baahdo, oo aad u taxaddar markaad waddo.

- Hubi in nalalka hore ee gaarigaaga shidan yihiin.
- Ka fogow iftiinka gaadiidka soo socda adigoo fiirinaya dhinaca midig ee waddada kana dhiganaya tilmaame hagitaan.
- Hubi in nalalka hore si sax ah loo jihay. Nalalka hore ee si qaldan u jihaysan waxay adkeyn karaan aragga darawallada kale waxayna yareyn karaan awooddaada aragga waddada.
- Yaree xawaarahaaga oo kordhi masaafada aad ka daba waddo. Waa inaad awooddaa inaad joojiso gaarigaaga gudaha aagga iftiinka ay abuureen nalalka hore.

## MAQAL

Dhawaaqyada buuqa, seerinta ama taayirrada oo qeylinaya waxay kuu tilmaami karaan jihada ama kuugu digayaan khatar. Sida aragga, dhibaatooyinka maqalka waxay u socdaan si tartiib ah, sidaas darteed way adag tahay in si degdeg ah loo garto. Darawallada dhegaha la' ama maqalkoodu daciif yahay badanaa way la qabsadaan iyagoo ku tiirsan aragga iyo feejignaanta badan.

Waa mamnuuc in la wado gaariga iyadoo la xirayo earbuds, earphones, ama headphones kuwaas oo gudbiya dhawaaq ama damiya buuqa.

Waad isticmaali kartaa qalab hands-free ah hal dhegood haddii uu waafaqsan yahay xeerka maamulka ee Washington (Washington Administrative Code) 204-10-045.

**Xusuusnow**: haddii aad haysato oggolaansho tababar ama laysan dhexe, ma isticmaali kartid taleefoon gacanta ama qalab elektaroonig ah xitaa haddii uu yahay hands-free markaad waddo.

maguriga ayay
ka dhigtay!

anigana! ❤❤❤

Anigana sidoo kale.
Habeen aad u fiican
ayaan qaatay

# Guriga si nabad ah ku tag. Qorsayso gaadiid aan khamri cabbin kahor intaadan baxin.

TOGETHER
WE GET
THERE

## 3.1 | WADISTA SAAMEYNSAN

Wadista saameynsan waxay dhacdaa marka wax kasta ay kugu adkeeyaan fikirka toosan, falcelinta degdegga ah, ama xakamaynta gaariga. Tani waxay ku jirtaa arrimo sida cabitaanka khamriga, isticmaalka daroogada, ama daal badan. Dhamaantood waxay khatar gelin karaan adiga, rakaabkaaga, iyo dadka kale ee waddada.

Ciqaabta wadista saameynsan ee sababtay khamri ama daroogo waa mid adag: ganaaxyo qaali ah, sicir caymis oo sare, joojinta ama la noqoshada laysanka, iyo xitaa xabsi.

Xitaa darawal khibrad leh gaari uma wadi karo si ammaan ah kadib cabitaanka khamriga ama isticmaalka daroogada. Go'aanka ah inaadan marnaba wadin adigoo saameynsan wuxuu badbaadinayaa noloshaada iyo tan dadka kale.

## KHAMRIGA IYO GAARI WADISTA

Khamrigu waa maadada ugu badan ee sababta shilalka wadista saameynsan. U feejignoow darawallada kale ee saameynsan oo sii meel bannaan si aad uga fogaato khatar.

**Khamrigu wuxuu saameyn karaa darawallada isagoo sababa:**

- Dareen degganaan iyo hurdo badan.
- Aragti ceeryaamo leh ama mid xaddidan.
- Falcelin gaabis ah, fiiro yar, iyo awood xaddidan oo lagu qiimeeyo deegaanka wadista.
- Dhibaato lagu fahmo waxa dhacaya.
- Dhibaato ku timaadda qabashada hawlo badan hal mar, sida in lagu sii jiro waddadaada iyo in laga fogaado gaadiidka kale.
- Awood la'aan lagu raaco xeerarka waddooyinka.
- Isku qabida kalsooni xad dhaaf ah, taasoo sababi karta wadis khatar ah.

**Fadlan:**

- Ha wadin wax gaariga ah haddii aad isticmaashay walax ku saameynaysa.
- Ha raacin darawal isticmaalay walxo saameyn leh, nooc kasta ama tiro kasta ha ahaadee.
- Ha u oggolaan saaxiibada ama qoyska inay wadaan haddii ay cabbeen khamri ama isticmaaleen daroogo.
- Qorshee darawal aan wax cabbin ama isticmaalin walxo saameyn leh.

## HASHIISHKA IYO WADISTA

Isticmaalka madadaalada ah ee hashiishka, THC (Tetrahydrocannabinol), iyo waxyaabaha kale ee laga sameeyo xashiishka (cuntooyinka, boomaatooyinka, qalabka qiiqa laga dhuuqo, daawooyinka, iyo kareemada) waa sharci dadka ka weyn 21 sano, laakiin wadista kadib isticmaalka hashiishka waa mamnuuc da' kasta ha ahaadee.

**Ma jiro qaddar ammaan ah oo hashiish ah oo lagu wadi karo gaari.**

Daraasado waxay muujinayaan in hashiishku uu saameyn karo darawallada siyaabo kala duwan:

- Fiiro yaraatay, falcelin gaabis ah, iyo isku-duwid liidata
- Xakamaynta gaariga oo hoos u dhacda
- Falcelin gaabis ah
- Awood la'aan lagu qiyaaso masaafada
- Hurdo badan oo korodhay
- Luminta isku-duwidda dhaqdhaqaaqa
- Shaqooyinka maskaxda iyo jidhka oo daciifay

# DAAWOOYINKA IYO WADISTA

**Waxaa jira siyaabo badan oo qofku ku noqon karo saameynsan.**

Wadista saameynsan badanaa waxay la xiriirtaa isticmaalka khamriga, cannabis, ama daroogo sharci-darro ah. Si kastaba ha ahaatee, daawooyin badan oo sharci ahaan la helo oo si caadi ah loo isticmaalo waxay saameyn karaan awoodda qofka ee wadista ammaan ah.

- Kaliya sababtoo ah daawadu waa sharci ma micnaheedu waa in lagu wadi karo si ammaan ah.
- Wadista saameynsan waa dambi ciqaable ah. Ma jiraan wax isbeddel ah ha ahaato daawo dhakhtar qoray, mid farmashiye laga iibsaday, ama mid sharci-darro ah.

Daawooyinka madax-xanuunka, hargabka, ama xasaasiyadda ee laga helo farmashiyaha waxay keeni karaan hurdo, taasoo saameyn karta wadistaada. Sida khamriga, daawooyinka dhakhtarku qoro waxay saamayn karaan falcelintaada, garashadaada, araggaaga, iyo feejignaantaada.

Ha wadin baabuur haddii aad hadda bilowday qaadashada daawo uu dhakhtarku kuu qoray markii ugu horreysay, aad bilowday daawo cusub, ama aad qaadanayso qiyaas ka badan tii hore. Sug ilaa aad ogaatid sida ay u saamayso garashadaada, isku-duwiddaada, iyo waqtiga falcelintaada. Kala hadal dhakhtarkaaga ama farmashiistahaaga. Akhri dhammaan calaamadaha digniinta ka hor intaadan wadin baabuurka. Digniinaha ka dhanka ah “isticmaalka mashiinnada culus” waxa ka mid ah wadista baabuur.

Qaar ka mid ah daawooyinka ayaa laga yaabaa inaanay saameyn weyn ku yeelan kaligood, laakiin marka lagu daro daawo kale ama khamri, waxay sababi karaan dhibaato culus. Daawooyin badan ayaa kordhiya saamaynta khamriga ama waxay leeyihiin saameyn kale oo dhinac ah. Akhri digniinaha ku yaal daawadaada ama kala hadal farmashiistahaaga ka hor intaadan cabbin khamri iyo isticmaalin daawo isku mar.

## ISTICMAALKA DAAWOOYIN BADAN IYO WADISTA BAABUURTA

Isticmaalka daawooyin badan waa marka la isku daro ama la qaato in ka badan hal nooc oo daawo ah. Isku darka khamriga, xashiishadda, ama daawooyin kale waxay dhalin karaan saamayn ka xoog badan daawo kasta oo kaligeed la isticmaalo. Waxay ka mid noqon karaan khamri, xashiishad, daroogo sharci darro ah, daawooyin dhakhtar qoro, daawooyin la iibiyo farmashiyaha, iyo walxo kale sida kuwa la neefsado. Isticmaalka daawooyin badan waa sababta ugu badan ee shilalka dhimashada leh.

Saamaynta isticmaalka daawooyin badan way ku kala duwan tahay qof ilaa qof iyadoo ku xidhan tirada la isticmaalo, inta jeer, iyo sida loo qaato. Isticmaalka daawooyin badan wuxuu kordhiyaa khatarta in la qaato qiyaas badan, dhibaatooyin maskaxeed, dabeecad khatar ah, dhaawacyo halis ah, iyo shilal.

## GAARI WADISTA IYADOO LA DAALAN YAHAY OONA HURDO-HURDO LA DAREEMAYO

Daalku wuxuu ka yimaadaa culays jireed ama maskaxeed, shaqo soo noqnoqota, xanuun, ama hurdo la'aan. Sida khamriga iyo daawooyinka, daalku wuxuu dhaawacaa araggaaga iyo go'aan qaadashadaada.

Wadista baabuur iyadoo lala daalan yahay waxay saameysaa feejignaanta, dareenka, waqtiga falcelinta, garashada, iyo awoodda go'aan qaadashada. Marka aad wado adigoo daalan, waxaad khatar ugu jirtaa inaad hurdo ku seexato isteerinka oo aad keento shil dhaawac ama dhimasho leh.

Waa kuwan calaamado muujinaya daal. **Goolaad joojiso baabuurka oo naso haddii aad tahay:**

- Aad dhib ku qabto diiradda saarista ama aadan xasuusan masaafooyinkii ugu dambeeyay ee aad soo martay.
- Aad u il-labaynayso ama aad leedahay baalal indho culus.
- Aad dhib u qabto inaad madaxa kor u hayso.
- Aadan arkin meelaha laga baxo ama calaamadaha taraafikada.
- Aad dareemayso xanaaq, daal, ama gardarro.
- Ka leexashada laanta wadada, si lama filaan ah u leexashada, ku socoshada gaari kale meel dhow, ama taabashada khadadka gariirka.




Haddii aad la safreyso darawal kale, is weydaarsada wadista. Haddii aad safar kaligaa tahay oo aad dareento daal, ka bax wadada oo qaado hurdo 20 daqiiqo ah. Way ka wanaagsan tahay in la joogsado oo la seexdo halkii laga halis gelin lahaa shil.

Ka hor intaadan gelin safar:

- Hel hurdo kugu filan — dad badani waxay u baahan yihiin 7 ilaa 9 saacadood si ay u feejignaadaan.
- Qorshee inaad istaagto qiyaastii 100 mayl kasta ama 2 saacadood kasta marka aad safar dheer ku jirto.
- Soco meel gaaban, qaado hawo nadiif ah, oo cab biyo. Qorshee safarkaaga adigoo waqti ku filan u reebaya nasashooyinka.
- Raadi qof kula safra si uu kuugu caawiyo feejignaanta, dhibaatooyinka, iyo inuu wadaago wadista.

## CAAFIMAADKA MASKAXDA

Dareemadu waxay saameyn karaan wadistaada. Waxaad go'aan fiican qaadataa markaad fahamto sida dareenkaagu u saameeyo dabeecaddaada.

Tusaale ahaan, haddii aad dareento walbahaar markaad wadayso, waxaa laga yaabaa inaad mashquusho oo cagta si xoog ah ugu saarto baydalka xawaaraha. Sida aad dareemeyso (walbahaar) ayaa beddelaya dabeecaddaada (u wadista gaariga si degdeg ah).

Hoos waxaa ku yaal dhowr hab oo lagugu dejinayo walbahaarka ka hor intaadan wadada gelin. Waxaad samayn kartaa adigoo ku fadhiya baabuur baarkin-gareysan.

1. Ka gudo-neefso sankaaga, kadibna si tartiib ah u sii daa neefta sidii adigoo doonaya inaad qaboojiso maraq kulul.

2. Si tartiib ah u tirso laga bilaabo 1 ilaa 20, ama gadaal uga tirso 100 adigoo saddex-saddex uga dhimaya (100, 97, 94, 91, 88...). Diiradda saar tirooyinka oo keliya si aad u dejiso maskaxdaada.

3. U diyaari waqti ku filan safarkaaga. Dooro inaad isxakameyso oo dulqaad u muujiso dadka kale.

Ogaanshaha dareenkaaga wuxuu kugu dhiirigeliyaa dulqaad iyo ixtiraam dadka kale ee wadada ku jira, wuxuuna kor u qaadaa dabeecad wadis oo ammaan ah.

## WADISTA GARDARRADA AH

**Wadista gardarrada ah waa dembi taraafik.**

Wadista gardarrada ah waa marka darawalku si ula kac ah u sameeyo wax khatar gelinaya dadka ama hantida.

**Dabeecadahan soo socda ayaa loo arkaa wadis gardarro ah:**

- Ficillo la sameeyo inta la wadayo oo khatar gelin kara dadka kale ama hantida.
- Ficillo ula kac ah oo ku qasbaya qof kale inuu isdifaaco.

**Dabeecadaha la xiriira wadista gardarrada ah waxaa ka mid ah:**

- Xawaareynta.
- Ku socoshada gaari kale meel aad u dhow.
- Isbeddel laan oo khatar ah.
- Isticmaalka calaamado khaldan.
- Ku xadgudubka calaamadaha iyo nidaamyada taraafikada.
- Ku wadista baabuur qof lugeynaya ama baaskiil wata meel aad u dhow.

Diiradda saar waxaad sameyneyso. Iska ilaali inaad si shakhsi ah u qaadato wadista gardarrada ah ee dadka kale. Noqo qof dulqaad badan oo cafiya dadka kale ee wadada isticmaala.

## TARTAN WADDO IYO BANDHIGYO WADDO AH

Sababtoo ah tartanka waddooyinka iyo bandhigyada aan la oggolayn waa kuwo khatar ah, ciqaabtooduna waa mid culus. Waxay khuseeyaan darawallada iyo cid kasta oo ku lug leh ama ka qayb qaadata tartanka waddooyinka. Qof kasta oo lagu helo dambigan wuxuu wajihi karaa ganaax, xabsi, iyo in gaarigiisa la xayiro.

## CADHADA WADDOOYINKA

**Xanaaq wadis waa dembi ciqaabeed.**

Xanaaq wadis waa falcelin xanaaq ah oo ku saabsan dhacdo wadada ka dhacday taas oo keenta dabeecad rabshado wata iyadoo la adeegsanayo baabuur ama hub kale. Xanaaq wadis wuxuu ka dhici karaa darawalka ama rakaabka hal gaari iyo darawal kale, rakaab kale, ama qof wadada isticmaalaya.

Waxyaabo badan ayaa keeni kara xanaaq wadis, sida walbahaar, jadwal ciriiri ah, cufnaanta taraafikada, ama caro aan wadista la xiriirin. Isii waqti ku filan safarka, ilaali masaafad ammaan ah oo ku wareegsan gaarigaaga, kana muuji dadka kale naxariis iyo xasillooni.



## HADDII AAD LA KULANTO CADHADA WADDOOYINKA

Waxaa laga yaabaa inaad la kulanto xanaaq wadis haddii aad:

- Leedahay fikrado cambaareyn iyo khilaafid xooggan oo ku wajahan dadka kale ee waddada maraya.
- Ku aflagaadeyso dadka kale ee wadada rakaabka kugula jira gudaha gaarigaaga.
- Ku xadgudbeyso sharciyada taraafikada sababtoo ah aadan la dhacsanayn.
- Ku socoshada gaari kale meel aad u dhow.
- Xawaareynta.
- Is dhexgalidda iyo ka dhex boodidda taraafikada.
- Xawaaraha kor u qaadid si aad uga gudubto iftiin taraafik ah.
- U dhexgalidda gawaarida si aad u beddelato haadadka.
- U isticmaalka hoonka gaarigaaga si xad dhaaf ah.
- Iftiimin si badan oo indho la'aan ku keeni karta gawaarida imanaya.
- Si lama filaan ah u joojin si aad u hor istaagto darawalka gadaal kaa socda.
- Ka gudbidda gaari kale ka dibna gaabisid si aad "cashar" ugu barato darawalka kale.

## HADDII ADIGA LAGU WEERARO XANAAQ WADIS

Marka aad aragto darawallo kale oo xanaaqsan, iskaga fogee xaaladda jidheed iyo maskaxeed.

- Qaado neefsasho qoto dheer oo ka leexo jidka.
- Ka fogow xawli badan, buuq, ama calaamado gacan ah oo xanaaq leh.
- Iska eeg wadada.
- U wado meel dad joogaan ama ganacsiyo furan haddii aad dareento in darawal kale ku daba socdo ama ku dhibaateynayo. La xiriir booliiska haddii loo baahdo.

# KASOO WARBIXINTA XANAAQ GAARI WADIS

Isla markiiba ku wac 911 si aad u sheegto dhacdo xanaaq wadis oo socda.

Yaraynta dhacdooyinka cadhada waddooyinka iyo wadista gardarrada ah waa arrin muhiim u ah hadafka Ciidanka Booliska Gobolka Washington (Washington State Patrol). Inkasta oo askarta iyo hay'adaha kale ee ilaalinta sharcigu ay mar walba feejigan yihiin wadista gardarrada ah, tallaabooyinka lagu hagaajinayo badbaadada taraafikada ee Washington waa marka dadka degaanku ay ficil qaadaan.

Haddii aad markhaati ka noqotay ama aad dhibane ka tahay fal wadis gardarro ah, fadlan wac 911 oo bixiso macluumaadka soo socda:

- Goobta ugu dambeysay ee lagu arkay gaadiidka
- Lambarka taarikada (haddii la yaqaan)
- Jiho ay u socdeen (dhanka ay u jeedeen)
- Waddada ama jidka weyn
- Midabada gaadiidka
- Hubka ku lugta lahaa (haddii ay jiraan)
- Soo koobidda wixii dhacay
- Doorkaaga dhacdada (dhibane ama markhaati)

## 3.2 | GO'AAN QAADASHO XOG-OGAAL AH EE KU SAABSAN WADDADA

Inaad noqoto darawal ammaan ah oo masuul ah waxay u baahan tahay wax ka badan garashada xeerarka waddooyinka. Waxay ku lug leedahay go'aan qaadasho xog ogaal ah xaalad kasta oo aad ku wajahdo inta aad wadid. Haddii aad ogtahay ama aadan ogayn, waxaad go'aanno gaartaa kumanaan jeer maalintii. Qaar ka mid ah go'aannada ugu muhiimsan waxaad qaadataa marka aad kursiga darawalka fadhido.

## SABABTA GO'AAN XOG-OGAAL AH AY MUHIIM U TAHAY

Ficil kasta oo aad samayso adigoo wado waa go'aan laga bilaabo beddelka laanta ilaa gelitaanka jid weyn. Inaad gaarto go'aan xog ogaal ah waxay ka dhigan tahay inaad tixgeliso dhammaan arrimaha khuseeya ka hor intaadan ficil samayn. Tani waxay keentaa wadis deggan oo ammaan ah adiga iyo dadka kale labadaba. Go'aannada xog ogaalka ahi waxay keeni karaan:

1. **Kor u qaad feejignaanta.** Go'aan qaadashada xog ogaalka ahi waxay u baahan tahay falanqayn joogto ah oo ku saabsan deegaankaaga. Tani waxay hagaajisaa fahamkaaga guud ee xaaladaha kugu xeeran.

2. **Kor u qaad wadista masuuliyadda leh.** Fahamka cawaaqibta doorashooyinkaaga wuxuu dhiirrigeliyaa dabeecad masuuliyad leh. Sidoo kale waxay muujisaa ixtiraam loo hayo dadka kale ee isticmaala waddooyinka.

3. **Yaree shilalka**. Inaad horay u sii odorosho dhibaatooyinka iman kara waxay kaa caawin doontaa yareynta khatarta isku dhacyada.

Go'aannada xog ogaalka ahi waxaa saameeya:

- Aqoontaada xeerarka taraafikada.
- Khibradaada ku saabsan wadista badbaadada leh.
- Awoodahaaga oo ku saleysan da'da iyo horumarka maskaxda.

Darawalada dhalinyarada ah waa inay xusuustaan in qaybta maskaxdooda ee go'aan qaadashada iyo xukunka ay weli korayso. Tani waxay ka dhigan tahay in dhalinyaradu u nugul yihiin halis qaadasho ama khalad xisaabinta xaaladaha. Dhammaan darawallada waa inay mudnaanta siiyaan go'aannada badbaadada ku saleysan halkii ay ka dooran lahaayeen xawaaraha ama cadaadiska bulshada. Tani waxay si gaar ah run ugu tahay dhalinyarada.

Darawalada waayeelka ah waa inay ogaadaan in awoodaha jireed iyo maskaxeed ay is beddelaan marka da'du kororto. Darawalada waayeelka ah waxay u nugul yihiin dhaawacyo culus marka shil dhaco, hase yeeshee, qaar badan ayaa sii ahaanaya darawallo xirfad leh oo badbaado leh xitaa da'da dambe. Iyadoon loo eegin da'da ama khibradda, dhammaan darawallada waa inay go'aansadaan inay ahaadaan kuwo feejigan oo diiradda saaraya wadista mar kasta oo ay gaariga wadaan.

## QAADO GO'AANNO WANAAGSAN

Go'aannada wanaagsan waa kuwa xog ogaalka ah. Si aad u gaarto go'aanno wanaagsan, waa inaad ogaataa waxa kugu xeeran.

1. Is-xaqiiji adigoo isticmaalaya muraayadaha gaariga si joogto ah. Ka war hay xaaladda oo dhan, oo ay ku jiraan dadka kugu dhow ee laga yaabo inay saamayn ku yeeshaan go'aannadaada. U sheeg dadka kale waxa aad damacsan tahay si ay u ogaadaan niyaddaada uguna diyaar garoobaan.

2. Gaariga u diyaari si aad ugu timaaddo halista adigoo ku jira booska saxda ah iyo xawaaraha habboon.

3. Samee kormeerkii ugu dambeeyay ka hor intaadan samayn dhaqaaq.

Habkani waa la adeegsan karaa xaalad kasta oo u baahan inaad isbeddel samayso. Had iyo jeer waa inaad ku dadaashaa inaad ahaato mid feejigan, la saadaalin karo, oo dhaqaaqiisa deggan.

## 3.3 | KU XALLINTA DHIBAATOOYINKA WADDADA

Xaaladaha lama-filaanka ah waa lama huraan, waxaana looga baahan yahay in si xikmad leh loo xalliyo. Waxaa suuragal ah in xalinta dhibaatooyinka waddooyinka ay kaa rabto isbeddello si miyir leh loo sameeyo sida:

- Inaad beddesho xawaarahaaga.
- Inaad hagaajiso booska laanta si aad khatarta u yarayso ugana fogaato halista.
- Inaad beddesho jihadaada ama waddada aad marayso si aad u gaadho meel ammaan ah oo aad xaaladda dib ugu qiimeyso.

Iska ilaali inaad dadka kale ee waddada maraaya aadan ka naxinin. U sheeg darawallada kale waxa aad damacsan tahay si aad uga hortagto dhibaato kasta.

Waxaad adeegsan kartaa qalabyo kala duwan si aad u samayso go'aanno firfircoon adigoo ku jawaabaya deegaankaaga. Mid ka mid ah qalabyadaas waa wareegga Observe, Orient, Decide, Act (U fiirso, Qaabso, Go'aanso, Fuli). Waxaa loo yaqaan wareeg sababtoo ah xaalad kasta waxay dhalisaa mid kale.




1. **Observe (U fiirso)** U fiirso xaaladda. Maxaa is beddelay? Ma jirtaa baabuur si lama filaan ah u leexatay, caqabad soo baxday, ama is-beddel ku yimid socodka taraafikada?
2. **Orient (Qaabso)** Adeegso aqoontaada iyo waayo-aragnimadaada si aad u fahamto micnaha is-beddelkaas. Sidee ayuu u saameeyaa badbaadadaada iyo tan dadka kale? Waa maxay khataraha iman kara haddii aadan wax beddelin? Fursado noocee ah ayaad heli kartaa haddii aad wax beddesho?
3. **Decide (Go'aanso)** Iyada oo ku saleysan wax aad arkayso iyo fahamkaaga, dooro tallaabada ugu ammaansan. Ma tahay inaad xawaaraha yareyso, laanta beddesho, ama muujiso niyaddaada?
4. **Act (Fuli)** Si deggan oo go'aan leh u fuli ficilka aad doorатay. Xusuusnow, isgaarsiinta cad waa muhayim si dadka kale u fahmaan u jeeddadaada.

Marka aad waayo-aragnimo hesho, waad si sahlan u maareyn doontaa wareegga OODA. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira qodobo badan oo isku beddelaya inta aad wadid. Had iyo jeer waa inaad ahaataa mid feejigan oo diyaar ah.

# 3.4 | KA FOGAANSHAHA GAARI WADISTA AAD MASHQUULKA TAHAY




Wadista ay maskaxdu ka mashquusho waa arrin halis ah oo khatar gelisa qof walba oo ku sugan ama u dhow waddada. Waxay carqaladeyneysaa feejignaanta, xukunka, iyo xirfadda lagama maarmaanka u ah wadista badbaadada leh. Mashquulnimada gudaha iyo dibadda gaadhiga waxay saameyn ku yeelan karta kartidaada falcelin iyo wadis sax ah

Mashquuliyayaashu waxay ku imaadaan qaabab iyo noocyo kala duwan:

- **Gudaha gaadhiga.** Taleefannada gacanta, cunista, dejinta raadiyaha, iyo la hadalka rakaabka.
- **Dibadda gaadhiga.** Xayeysiisyada, shilalka, iyo dhaqanka dadka kale.
- **Mashquuliyayaal jireed.** Daalka, raaxo la'aanta, iyo naafonimada jireed.
- **Mashquuliyayaal maskaxeed.** Fakar fog, walwal, iyo dareenno xooggan.

**Darawallada mashquulka ah waxay u nugul yihiin:**

- Inay ka leexdaan laantooda.
- Inay xawaare sare ama hoose ku wadaan.
- Inay ku fashilmaan arkidda iftiinnada taraafikada, calamada istaagga, mootooleyda, baaskiilleyda, ama dadka lugeynaya.
- Inay aad ugu soo dhawaadaan gaadiidka ama baaskiilleyda laanta

**Xeeldheerayaal lagu hortago mashquulnimada:**

- Horay u sii qorshee.
- Telefoonkaaga meel dhig.
- Noqo mid feejigan.

**Adigoo feejignaantaada oo dhan ku saaraya waddada, waad karaysaa:**

- Inaad si dhaqso ah uga falceliso.
- Inaad samayso go'aanno ka wanaagsan.
- Inaad kordhiso feejignaanta xaaladda.
- Inaad yarayso walbahaarka iyo daalka.

## SHURUUCDA WASHINGTON EE LA XIRIIRTA WADISTA MASHQUULKA AH

Wadista mashquulka ahi waa ficil kasta oo qofka ka leexiya feejignaanta wadista gaadhiga. Dhammaan mashquuliyayaashu waxay khatar geliyaan darawalka, rakaabka, iyo dadka kale ee waddada wadaaga, oo ay ku jiraan dadka lugeynaya.

Gobolka Washington wuxuu leeyahay shuruuc adag oo ka dhan ah wadista mashquulka ah. Ma isticmaali kartid qalab elektaroonik ah inta aad wadid (sida taleefannada gacanta, kiniiniyada, ama qalabka ciyaaraha). Tani waxay khusaysaa dhammaan darawallada, da' iyo waayo-aragnimo kasta ha lahaadeene. Waxaa la oggol yahay in la isticmaalo qalabka aan gacanta lagu hayn, laakiin wax kasta oo ka mashquuliya indhaha iyo maskaxda waddada weli waa halis. Digniinaha, iftiinnada dhalaalaya, iyo calaamadaha muuqaalka ee taleefankaaga dhammaantood waa mashquuliyayaal culus. Qaado waqti yar si aad u fahamto sida mashquuliyayaashu u saameeyaan wadistaada.

Sarkaalka ilaalinta sharciga ayaa kuu qori kara ganaax haddii aad jebiso sharciga wadista mashquulka ah. Tani waxay keeni kartaa ganaaxyo culus. Ganaaxyada kadib jebintaada ugu horreysa waa la labanlaabi karaa.

**Wadistu waa mas'uuliyad aad u culus.** Fadlan dooro inaad feejignaantaada saarto waddada oo aad noqoto qayb ka mid ah xalka lagu joojinayo wadista mashquulka ah. Waxaa laga yaabaa inay u muuqato in "qof walba sameeyo" balse daraasado ayaa muujinaya inaanay run ahayn. Go'aankaaga ayaa adiga iyo dadka kale badbaadin doona.

## 3.5 | DARAWALLADA FARIIDNIMADA LEH

Darawallada fariidnimada leh waa kuwa:

- **Ogaada** waxa ka dhacaya gudaha iyo dibadda gaadhiga.
- **Xakameeya** shidaalka, bireega, isteerinka, iyo booska gaadhigooda.
- **Si la saadaalin** karo ugu wargeliya dadka kale iyagoo isticmaalaya calaamado iyo dhaqaaqyo deggan.
- **Si miyir leh** u sameeya go'aannadooda.
- **Si ula kac ah** u bartaan una adeegsadaan xirfadaha wadista.

## U FIIRSO

Marka aad tahay darawal cusub, tirada waxyaabaha aad u baahan tahay inaad fiiro gaar ah u yeelato way badan yihiin: gaadhigaaga, shuruucda waddada, halista, gaadiidka kale, calaamadaha, calaamadaha waddada, dadka lugeynaya, baaskiilleyda... Darawallada fariidka ah waxay helaan hab ay feejignaanta u dheelitiraan.

- **Beddelidda feejignaanta.** Marka aad si degdeg ah diiradda uga wareejiso hal shay mid kale.
- **Feejignaan la qaybsaday.** Marka aad samaynayso dhowr hawlood isku mar.
- **Feejignaan diirran.** Marka maskaxda oo dhan ay diiradda saarto hal hawl.
- **Feejignaan joogto ah.** Marka aad u baahan tahay inaad si joogto ah u feejignaato muddo dheer.

**Waxyaabaha kaa caawin kara inaad feejignaato:**

- Ka saar wax kasta oo mashquuliya gudaha gaadhigaaga.
- Noqo mid si fiican u nastay.
- Qalabkaaga elektarooniga ah dami oo meel iska dhigo.
- Xadid tirada rakaabka iyo xayawaanka ee ku jira gaadhigaaga.
- Ka fogow inaad sameyso hawlo badan inta aad wadid.



## SI MUUQAAL AH U BAAR OO U FIIRSO

Baaritaanka muuqaalka ahi wuxuu la macno yahay inaad indhaha ku hubiso si firfircoon waxa kugu xeeran. Baaritaanka wuxuu ku lug leeyahay inaad dhaqaaqdo madaxaaga, qoorta, iyo jirka si aad u aragto sida ugu badan ee suurtagal ah agagaarka gaadhigaaga. Baaritaan iyo fiirin joogto ah waxay kaa caawinayaan inaad ogaato deegaanka isbeddelaya ee gudaha iyo dibadda gaadhigaaga. Waa sida aad u ururiso macluumaadka si aad u samayso go'aanno xikmad leh.

Baaritaanka joogtada ah ee muuqaalka ah wuxuu xoojiyaa awooddaada wadis badbaado leh. Hubi inaad ku waddo xawaare kuu oggolaanaya inaad si wax ku ool ah u baarto oo u fiirsato.

**Iska eeg dhinaca hore**
Si aad uga fogaato bireeg degdeg ah ama leexasho lama filaan ah, hore u fiirso:

- Xaaladaha taraafikada ee aad u baahan doonto inaad ka leexato iyo waxyaabaha qarin kara qof lugeynaya, baaskiille, ama gaadhi kale.
- Cagaha, taayirrada, hadhka, iyo dhaqdhaqaaqa ka jira gudaha, hoosta, iyo agagaarka gaadiidka la dhigey.
- Waxa ka socda meel ka sii fog gaadhiga kugu horreeya.

Inaad hore u eegto waxay kaa caawinaysaa inaad sii saadaaliso xaaladaha suuragalka ah oo aad u diyaar garowdo inaad istaagto ama jihada beddesho haddii loo baahdo.

**Iska eeg dhinacyada.**

- Marka aad u dhowaanayso isgoysyo, fiiro gaar ah u yeelo gaadiidka, dadka lugeynaya, iyo baaskiilleyda ka imanaya bidixda iyo midigta.
- U fiirso dadka lugeynaya iyo baaskiilleyda laga yaabo inay waddada gooyaan.
- Marka dhir ama walxo kale ay qariyaan aragtida dhinacyada, u fiirso dhaqdhaqaaq si aad u ogaato halis suurtagal ah iyo dadka laga yaabo inay waddada gudbaan.
- Ka hor intaadan leexan, hubi muraayadaha dhinacyada oo eeg garabkaaga si aad u aragto baaskiilleyda ama dadka lugeynaya ee kugu dhow ama doonaya inay waddada gudbaan.

**U fiirso gadaal**

Marka lagu daro inaad fiiriso taraafikada hore iyo dhinacyada, hubi taraafikada gadaashaada. Waa muhiim inaad fiiriso gaadiidka iyo baaskiilleyda gadaasha markaad beddelayso jidka, aad leexanayso, gaabisayso, dib u socoto, ama aad wadid buur dheer.

Marar badan u fiirso marka taraafikadu ay culus tahay. Haddii aad ogaato qof si aad ugu dhow ama si xad dhaaf ah kuu daba socda, waxaad heli doontaa fursad aad wax uga qabato (jid beddel, bireeg taabo, xawaare kordhi ama gaabi).

## 3.6 | IXTIRAAMKA IYO MAS'UULIYADDA

Aqoonso oo isku dhaaf dhaqanka wadis badbaado leh, mid ixtiraam leh, iyo mid mas'uuliyad leh.

- Hubi in dhammaan dadka ku jira gaadhiga ay isticmaalaan suunka badbaadada.
- Noqo qof u diyaarsan inuu gaari wado.
- U muuji naxariis iyo tixgelin dadka kale.
- Ixtiraam booska dadka kale ee isticmaalaya waddada.
- Ka fogow muran ama isqabqabsi, cidda khaldan ha ahaatee.
- Daryeel deegaanka waddada.

## TALOOYIN IYO DIGNIINO TARAAFIKO.

Digniinaha taraafikada waa ogeysiisyo la siiyo darawallada oo ku saabsan xaaladaha hadda jira ama soo socda ee taraafikada, shilalka, ama xirnaanta waddooyinka. Digniinahan waxaa bixiya saraakiisha gaadiidka, xarumaha maareynta taraafikada, ama barnaamijyada hagista.

Raadi digniino taraafiko oo kaa caawin doona inaad samayso go'aanno xog ogaal ah oo ku saabsan waddooyinka safarkaaga. Tani waxay kaa caawin kartaa inaad ka fogaato dib u dhacyo ama halis suurtagal ah. Digniinaha taraafikada waxaa lagu bixiya siyaabo kala duwan, sida calaamadaha elektaroonigga ah ee waddooyinka, baraha bulshada, idaacadaha, mareegaha taraafikada, iyo barnaamijyada taleefanka.

## QASHIN

Qashinku ma aha keliya mid foolxun. Waxa kale oo uu khatar gelin karaa dadka isticmaalaya waddooyinka. Qashinka waddooyinka yaal wuxuu keeni karaa shilal. Qashinka guban kara ama ololi kara wuxuu dhalin karaa dabab duurka ah oo waxyeeleeya deegaanka isla markaana sababi kara dhimasho. Taasi waa sababta ganaaxyada qashinka lagu tuuro ee Washington ay u adag yihiin. Adiga iyo rakaabkaaga ayaad mas'uul ka tihiin inaad si ammaan ah u xirtaan alaabta aad qaadaysaan iyo in si habboon loo tuuro qashinka.

Sharciga Gobolka Washington wuxuu dejinayaa ganaaxyo ugu yaraan ah oo lagu ciqaabo qashin-tuurka sharci darrada ah. Magaalooyin iyo degmooyin badan ayaa leh xeerar maxalli ah oo ka duwan xeerarka gobolka. La xiriir booliska deegaankaaga, xafiiska sheriff-ka, ama xafiiska degmada si aad u ogaato macluumaadka ku saabsan xeerarka qashinka iyo shuruucda deegaankaaga.

## DEEGAANKA

**Sida aad u waddo gaadhiga waxay saameyn ku leedahay deegaanka.**
Marka aad gaadhiga damin la'aanta ku dhaafto meel la dhigey, gaar ahaan garaash, wuxuu sii daayaa gaasyo waxyeello leh sida carbon monoxide oo dilaa ah. Inaad matoorka shiddo adigoon socon waxay sii kordhisaa wasakhowga hawada.

Adigoo sameeya isbeddello yaryar oo sidan oo kale ah, waxaad ka qayb qaadan kartaa dhimista wasakhowga gaadiidka:

- Dam matoorkaaga haddii aad muddo istaagtay.
- Wad si deggan halkii aad ka ordi lahayd ama ka bireegi lahayd si xooggan, taas oo shidaal badan isticmaasha.
- Hubi in taayirrada si sax ah loo buufiyo si shidaalka si hufan loo isticmaalo.
- La wadaag gaadhi ama isticmaal gaadiidka dadweynaha marka suurtagal ah si loo yareeyo tirada gaadiidka waddooyinka.

**Nooca gaadhiga aad wadid wuxuu saameeyaa deegaanka.**
Inta badan shirkadaha samaysa gaadiidka waxay sameeyeen dadaal lagu dhimayo raadadka  carbon iyagoo yareynaya wasakhowga, kordhinaya hufnaanta shidaalka, iyo hagaajinaya badbaadada si loo hagaajiyo socodka taraafikada. Inaad qorshayso waddooyin waxtar leh oo aad

la wadaagto gaadhi dadka kale waxay taageertaa dadaalladan (iyadoo leh faa'iido dhaqaale oo dheeraad ah). Sharciga Gaadhiga Nadiifka ah ee Washington (Washington's Clean Car Law) wuxuu farayaa in gaadiidka la sameeyay laga bilaabo 2009 iyo wixii ka dambeeyay ay buuxiyaan heerar adag oo hawada nadiif ah ka hor inta aan la diiwaangelin, la oggolaan, ama la iibin.

Haddii aad u baahan tahay inaad iska tuurto gaadhi ama qaybo ka mid ah, la xiriir xarunta dib-u-warshadaynta gaadiidka si ay kaaga caawiso inaad tan sameyso si u roon deegaanka.

## IS-QIIMAYN

Is-qiimayntu waa hab degdeg ah oo fudud oo muhiim u ah noqoshada darawal mas'uul ah. Waxaa la samayn karaa inta lagu jiro wadista ama ka dib wadista. Is weydii su'aalaha soo socda:

- Ma jiraan wax iga yaabiyey?
- Ma jirtaa cid aan anigu la yaabay?
- Ma sharci iyo mid xirfad ku dheehan bay ahayd wadistaydu, mise si deggan ma u socday?
- Isbeddelkee ayaan u baahanahay inaan sameeyo mar kale?

Inaad mar kasta dib u eegto xirfadaha wadista dhammaadka safarka waxay kaa caawisaa inaad hagaajiso awoodahaaga isla markaana aad sii ilaaliso xirfadahaas marka ay horumaraan. Xirfadaha waa ay yaraadaan wakhti ka dib, sidaas darteed qiimaynta joogtada ahi waxay kaa caawisaa inaad sii ahaato darawal heer sare ah.

Si aad xirfadahaaga u cusboonaysiiso, aqoonso:

- Qodobada sababa isbeddelka ku yimaada xirfadaha wadistaada.
- Isbeddellada ku yimaada hababka wadista.
- Isbeddellada shuruucda taraafikada.
- Horumarka iyo isbeddellada tignoolajiyada gaadiidka.
- Fursado waxbarasho oo nolosha oo dhan la xiriira wadista.

# CUTUBKA 4AAD WADDOOYINKA



## 4.0 | WACYIGELIN IYO ISKAASHI

Ka fikir dhammaan sababaha ay dadku u isticmaalaan waddooyinka Washington: si ay u soo booqdaan qoyska, si ay ugu geeyaan carruurta bukta dhakhtarka, ama ay dib ugu soo laabtan guriga ka dib maalin adag oo shaqo ah. Wadooyinka Washington waxaa isticmaala dadka adiga oo kale ah, nidaamka waddooyinkuna wuxuu ku tiirsan yahay iskaashiga iyo fahamka wadajirka ah ee dadka isticmaala. Waxaad filaysaa in dadka kale ay ogaadaan oo ayna raacaan xeerarka waddada. Iyaguna waxay kaa filayaan isla sidaas.

Mararka qaarkood wadooyinku waxay noqon karaan kuwo jahawareer ah. Tusaale ahaan, waxay noqon karaan kuwo dhismo ku socda ama ay buux dhaafiyeen gawaari, baabuur xamuul ah, mootooyin, baaskiil-wadayaal, iyo dad lugeynaya. Waxaa jira waqtiyo laga yaabo inaad u baahan tahay inaad dulqaad badan yeelato oo aad fikirto. Waxaa laga yaabaa inay kuu sahlanaato inaad jidka marto haddii aad xasuusato noloshu waxay noqon kartaa mid adag oo dadka intooda badani waxay samaynayaan intii karaankooda ah.

Muhiimadu waa xushmada, ixtiraamka, iyo ka warqabka dadka kale. Daryeelkaaga iyo tixgelintaadu waxay ka badbaadin karaan qof ama naftaada dhaawac halis ah ama dhimasho.

## 4.1 | LA WADAAGA DADKA

**Mar walba ka joogso dadka lugeynaya.**

Dadka lugeynaya iyo kuwa baaskiilka wata ayaa xaq u leh inay maraan waddooyinka meelaha laga gooyo iyo isgoysyada marka hore **haddii wadadu calaamadeysan tahay iyo haddii kaleba.**

- **Sug** ilaa inta qof lugeynaya uu gudbo haadkaaga iyo hal haad oo dheeri ah ka hor intaadan sii socon. Haddii qofka lugeynaya uu isticmaalayo kursiga curyaanka, bakoorad, eey haga, ama xayawaan kale oo adeege ah, sug ilaa ay si buuxda uga gudbaan wadada ka hor intaadan sii wadin gaariga.
- **Ha** ku wadin oo ha dhexgalin gaadiid soo socda si aad uga gudubto qof lugaynaya ama baaskiil wade.

Iska eeg dadka:

- **Aan adi ku arki kareyn,** sida dadka gadaasha dhismayaasha ah ama baabuurta gadaashooda, dadka lugaynaya ee dhabarka kugu haya, iyo dadka koofiyadaha xidhan ama isticmaalaya dalladaha.
- **La mashquuliyay,** sida carruurta, kuwa geeya alaabada meelo kala duduwan, shaqaalaha waddooyinka, iyo dadka lugeynaya ee taleefankooda isticmaalaya ama xiran sameecadaha madaxa.
- **Laga yaabo inay jahawareersan yihiin,** sida dalxiisayaasha iyo dadka raacaya khariidad ama raadinaya meel cusub.
- **Isticmaala kursiga curyaanka,** bakoorad, ama xayawaan adeeg. Waa sharci darro in la farageliyo xayawaanka adeegga. Ha yeerin hoon. Waxay jahawareerin kartaa ama cabsi gelin kartaa xayawaanka ama qof lugeynaya.

## 4.2 | LA WADAAGISTA WADADA BASASKA ISKOOLKA



**Raridda iyo dejinta wixii saaran bas iskool waa xaalad khatar noqon karta.**

Carruurta da'da iskoolka lagu dhigto jirta mar walba lama saadaalin karo ama khatar kuma baraarugsana. Hubi inaad ka fiirsato oo aad ka taxadarto carruurta markay fuulayaan ama ka soo degayaan baska iskoolka. Samir oo raac xadka xawaaraha iyo calaamadaha baska iskoolka.

Nalalka baska iskoolku waa sida calaamadaha taraafigga: Casaanku waa joogso, jaallena macnahiisu waa taxaddar ama hoos u dhig xawaaraha.




## MARKAAD BASKA KA DANBEYSO

**Waa sharci darro in la dhaafo marka nalalka cas ay biligleeyihiin.**

Weligaa ha dhaafin bas iskool marka nalalku biligleeyihiin. Nalalka iyo calaamaduhu waxay kuu sheegayaan in carruurtu ay dhow yihiin oo ay ka soo degayaan/ama fuulayaan baska.

- Dhammaan darawallada u socda isla jihada baska waa inay istaagaan marka nalalka cas biligleeyaan, calaamada joogsigana la dheereeyo.
- Ha isticmaalin haad leexasho oo dhexe si aad uga gudubto bas iskool. Dareewalada dhammaan kujira haadadka leexashada waa inay istaagaan.
- Waxaa laga yaabaa inaad raacdo ka dib markii ay nalalku joojiyaan biligleynta, calaamada meesha laga saaro, oo gacanta birta ah baambarka hore ee baska ay ku laabato.
- Sii wad inaad iska eegto carruurta xitaa ka dib marka nalalka cas ay joojiyaan biliglaynta.




## MARKAAD BASKA HORTIISA JOOGTO

**Waddada haadka 2-aad**
Baabuurta oo dhami waa inay joogsadaan marka nalalka cas biligleeyaan calaamada joogsigana ay fidsan tahay. Waxaad dib u bilaabi kartaa safarka jihada kaa soo horjeeda marka nalalku joojiyaan biligleynta, calaamada meesha laga saaro, oo gacanta birta ah ay ku noqoto baambarka hore ee baska.



**Wadada haadadka badan**

- Darawallada ka dambeeya bas-ka waa inay istaagaan marka nalalka cas ay shidmaan iyo calaamadda istaagga ay soo baxdo.
- Dareewalada u socda dhanka ka soo horjeedka maadaama basku aanu u baahnayn inuu istaago marka nalalka cas biligleeyaan ama calaamada joogsiga ay fidsan tahay **HADDII:**
    - **Ay jiraan saddex haad ama in ka badan.**
    - **Haadadka ay kala qaybiyaan khad dhexdhexaad ah ama bir u dhexeysa.**






## 4.3 | LA WADAAGISTA WADADA BASASKA SAFARKA

Ka joogso baabuur kasta oo taraansit ama safar ah oo ku socda isla jihadii aad fareejada ushidatay oo dib ugu soo laabanaya waddada.

## 4.4 | LA WADAAGISTA BAABUURTA WAAWEYN WADADA

La wadaagista waddooyinka si ammaan ah ee gaadiidka waaweyn iyo basaska waxay u baahan tahay in mid kasta ogaado xaddidaadahooda gaarka ah. Waxaad u baahan tahay wakhti badan iyo boos dheeraad ah markaad ku dhex waddo gaari baabuurta waaweyn hareerahooda. Marka aad u dhowdahay baabuurta waaweyn ee maraaya wadada, fiiro gaar ah u yeelo waxyaabaha soo socda:

**Muuqa.** Markaad daba socoto baabuurta waaweyn, hagaaji masaafadaada daba socoshada gawaaridaa si aad si ballaadhan ugu aragto jidka kaa horreeya.

**Aagagga aanan la arag ee darawalku uusan arki kareyn.** Haddii aad u dhowdahay baabuur weyn oo aanad arki karin muraayadaha darawalka, darawalku kuma arki karo. Gawaarida waaweyn waxaa dhinac kasta kaga yaal meelo indhuhu aysan arki karin oo uusan darawalku ku arki karin. Iska ilaali inaad ku garab wado gaarigaaga baabuurta waaweyn muddo dheer.

**Istaagista.** Baabuurta waaweyni sida ugu dhakhsaha badan uma istaagi karaan sida baabuurta yaryar. Gaari xamuul leh oo bareegiisa si sax ah loo hagaajiyay, kuna socda 55 mitir saacadii, wuxuu u baahan yahay 450 fiit si uu si buuxda ugu istaago. In hortooda aad isku goyso iyada oo aan boos ku filan jirin waxay khatar ku tahay qofwalba.

**Isku-daridda macnaha soo dhexgalitaanka gawaarida horay waddo u heysay.** Markaad soo galayso dhexda gawaari ka horreysa baabuur weyn, sug ilaa aad si cad ugu arki karto nalalkooda hore labadaba oo aad ka dhex arki karto muraayadaada dhanka dambe lagu eego ka hor intaadan soo galin hortooda. Ka dib marka aad jidka lasoo gasho, ilaali socodka gaadiidka si loo yareeyo saameynta soo gaareysa darawalada kale.

**Meel laga leexdo.** Si looga fogaado kudhicitaanka shay, baabuurta waaweyn waxay u baahan karaan in ka badan hal haad si ay u dhammeeyaan leexashada. Waxay sidoo kale u baahan yihiin 2 haad oo bannaan gudaha raanboodka. Ha dhaafin baabuur weyn marka darawalku soo leexanayo. Tani waa sababta joogtada ah ee isku dhacyada ay qeybta ka yihiin baabuurta waaweyn. U samir oo sug ilaa wakhtigoodu dhammaanayo ka hor intaadan horay u socon.

**Walxaha halista ah.** Markaad baabuur wadato, ka digtoonow baabuurta leh calaamado tilmaamaya inay sidaan walxo khatar ah. Ka fogow inaad agtooda baabuurka ku wadid markii ay suurtogal tahay.

**Qalcado sare oo dhaadheer.** Marka aad kor u kacayso ama aad ka dhaadhacayso waddooyin dhaadheer, baabuurta waaweyn ayaa si tartiib ah u socdaalaya. U diyaargarow inaad la kulanto baabuurta qunyar socodka ah ee haadka midig socda.



## MASHIINKA LOO ISTICMAALO IN UU KA SAARO BARAFKA WADDOOYINKA

Ka digtoonow markaad baabuur ku wadeyso meel u dhow qalabka saarista barafka. Mashiinada baraf ka saarida waddooyinka waxay qasbi karaan baraf ka kaca wadada oo cirka isku shareera, taasoo keenta xaalado dabaylo baraf u eg. Tani waxay yarayn kartaa aragga darawaliinta si dhow udaba socda.

## 4.5 | LA WADAAGIDA MOOTOOYINKA

Wadayaasha mootada waxay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la mid ah kuwa kale ee isticmaala wadooyinka. Waxay u hoggaansamaan isla sharciyada waddooyinka. Si kastaba ha ahaatee, maadaama ay yihiin mootooyinku gaadiid yaryar, aad bay baylah u yihiin oo way adagtahay in la arko. Ka dhigo caado inaad iska eegto mootooyinka oo aadna taxaddar ku muujiso agagaarkooda.




## DABA SOCOSHADA

U cad goo oo boos badan ha idiin dhexeeyo markii ay hortaada taagan tahay markii aad ka dambeyso mooto. Waxaad rabtaa inaad haysato wakhti kugu filan oo aad si badbaado leh ugu istaagto xaalad degdeg ah. Xaaladaha hawada iyo sagxadaha simbiririxada leh waxay dhibaato weyn ku noqon karaan wadayaasha mootooyinka. Oggolow inay idiin dhexeyso masaafo xataa in intii hore ka badan ah markii aad raaceyso ama daba istaageyso marka uu roob da'ayo ama dusha sare ee wadadu ay jilicsan tahay.



## HAADADKA

Wadayaasha mootada ayaa si joogta ah u bedelaya boosaska haadkooda, si ay wax u arkaan oo loo arko, iyo si ay uga fogaadaan walxaha wadada yaal. Waxay xaq u leeyihiin ballac haad oo la mid ah kan dhammaan gaadiidka kale. Weligaa ha galin hal haad oo ay kugu weheliso mooto, xataa haddii haadku ballaadhan yahay oo darawalka mootadu uu dhinac fog u socdo.



## LEEXASHADA

Wadayaasha mootada ayaa inta badan ka qarsoon ama laga arki karin meelaha uusan darawalka baabuurku aad u arag. Samee hubin dhabarka ka dambeeya si aad u xaqiijiso in aaggaaga aadan arki karin uu faaruq yahay. Tusaale ahaan, haddii aad u leexanayso midig, eeg bidix, eeg midig, ka dibna eeg bidix mar kale. Labo jeer in la eego waxay badbaadin kartaa naf. Darawallada galaya haad meel ka horreysa mooto ama ku hor leexanaya mooto soo socota waxaa dhici karta in aysan arag mootada. Waxay sidoo kale si khaldan u xukmin karaan xawaaraha mootada soo socota.

## OOGADDA WADADA

Oogooyinka waddooyinka meelaha buurbuuran leh iyo cilladaha aan saameynaynin darawallada kale, sida jayga, burburka, tolmada laamiga halka ay isaga xirmaan marshabiyeediga, xayawaanada yaryar, godadka, iyo xitaa godad bullaacad daboolladooda, waxay ku qasbi karaan wade mooto inuu beddelo xawaaraha ama booska haadka. Filo isbaddalo darawalka mootadu inuu sameeyo inuu u baahdo laga yaabo.

## NALALKA

**Nalalkaaga.** Sii wadeyaasha mootooyinka wakhti ku filan si ay u arkaan calaamadahaaga leexashada iyo nalalka biriiga.

**Nalalka darawalada mootooyinka.** Markii ay xawaaraha dhimayaan, darawallada mootooyinka ayaa isticmaali kara aaladda matoorka ee throttle ee aysan isticmaalin fariinada, marka nalalka fariinka ayaanan muuqanayn. Intaasi waxaa dheer, mootooyinka qaarkood ma lahan fareejooyinka leexashada oo u dema si ootamaatik ah. Xaqiiji in aad geyfan tahay oo aad dareen taxaddar u leedahay markii aad hareer socoto mooto.
Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan raacitaanka mootooyinka, booqo dol.wa.gov oo raadi **motorcycle operator manual** (buug-gacmeedka wadayaasha mootada).

## 4.6 | WADDO LA WADAAGISTA BAASKIIL WADAYAASHA

Baaskiillaydu waxay leeyihiin xaquuq la mid ah, waajibaad la mid ah, iyo xilal la mid ah kuwa darawallada baabuurta. Sida mootooyinka, baaskiiladuhu way yar yihiin oo si fiican looma arki karo, taasoo kordhisa khatarta darawalka inay ku dhuftaan iyo in si xun ugu dhaawacmaan ama ku dhintaanba.



## HAGITAAN GUUD

- Markaad gees u leexinayso ama aad inta jidka weyn kasoo leexato aad galayso waddo baabuur oo gaar ah, ka fiirso baaskiil-wadeyaasha ku jira halka jidka laga gooyo ama marshabiyeedka.
- Markaad joogto isgoysyada, mudnaanta u sii wadayaasha baaskiillada si la mid ah sidaad u siin lahayd gaadiidka.
- Lama wadaagi kartid haad baaskiille. Sida sharciga ah, baaskiiladlayaashu waxay isticmaali karaan wadada oo dhan waxayna ku wadi karaan meelaha sida wanaagsan kuugu muuqan kara adiga iyo darawallada kaleba. Marka aad ka danbeyso baaskiil wade, ka dambee ugu yaraan 3 fiit oo boos ah.
- Baaskiil-wadeyaasha maraya meelaha dadku jidka ka gooyaan waxaa loo tixgaliyaa lugeeyayaal sidood ama inay yihiin dad jidka goynaya oo kale. Waa inaad ka joogsato iyaga marka la marayo meelaha dadku jidka ka gooyaan ee calaamadeysan iyo kuwa aan calaamadda lahayn iyo isgoysyada intaba.

## DHAAFIDDA WADAYAASHA BAASKIILKA

- Ha ka gudbin ilaa ay ammaan kuu tahay adiga iyo darawalka baaskiilkaba.
- Ka gudub hal haad oo dhan haddii ay jiraan laba haad oo isku jiho ah. Haddii uu jiro 1 haad oo kali ah jiho kasta, u gudub haadka kale marka aysan jirin wax gaadiid ah oo soo socda. Ka tag ugu yaraan 3 fiit inta u dhaxaysa baaskiil-wadaha iyo qaybta ugu ballaaran ee gaarigaaga. (Xusuusnow in baaskiil-wadaha laga yaabo inuu u baahdo inuu beddelo booskiisa si uu uga fogaado khatar aadan arki karin.)
- Waligaa ha u gudubin gaadiid soo socda si aad uga gudubto baaskiil wade.
- Si tartiib ah ugu gudub dhinaca bidix ee baaskiilka oo waligaa ha dhex gelin gaadiidka soo socda.
- Hubi inaad ka fogaatay baaskiil-wade ka hor inta aadan ku laaban haadka. U leexashada xilli hore waxay gelin kartaa baaskiil-wadaha khatar.
- U daa baaskiil-wadaha inuu ka gudbo isgoyska ka hor intaadan leexan. Haddii aad midig u leexanayso, ha dhaafin baaskiil-wadaha ka hor inta aadan leexan.

## HAADADKA WADDADA EE BAASKIILKA

- U fiirso haadadka baaskiillada, kuwaas oo sida caadiga ah lagu rinjiyeeyo cagaar, lehna khadad cad oo toosan, isla markaana lagu calaamadeeyo astaanta baaskiilka. Inkasta oo calaamadaha haadka baaskiilka ay kala dheeryihiin, waa inaad u wadataa sidii in ay sii socdaan.
- Ku wad haadadka baaskiilka kaliya marka aad leexinayso ama aad ka gudbayso haadka si aad u dhigto gaariga meel u dhow qarka.
- Si taxadar leh uga eeg jihooyinka oo dhan baaskiil-wade ka dib markaad baarkinto gaariga iyo ka hor inta aanad furin albaabkaaga.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wadidda baaskiillada, booqo wsdot.wa.gov oo raadi **bicycling and walking** (baaskiil wadida iyo lugeynta).

## 4.7 | LA WADAAGISTA WADADA TAREENADA

**Jidadka tareenada waxay mudan yihiin dareen taxadar leh.**




Keliya ka goo wadooyinka tareenada markaad gaari wado isgoysyada la qoondeeyay. Raadi calaamado badbaado, nalal biligleynaya, iyo albaabada ganjeellada ah ee meelaha laga gudbayo. Nalalka casaanka ee biligleynaya ee isgoyska tareenka waxay ka dhigan yihiin in tareen soo socdo, adiguna waa inaad ka baxsanaataa albaabka.

Tareenadu MAR WALBA waxay leeyihiin mudnaanta marista wadada. Way culus yihiin oo degdeg uma istaagi karaan xitaa haddii ay ku socdaan xawaare hooseeya. Waxay qaadan kartaa ilaa hal mayl in tareenku si buuxda u joogsado.

**Marka nalalka biligleynayaan oo gambaleeladu yeerayaan isgoyska tareenka, waa inaad istaagtaa — xitaa haddii ganjeelka hoos uusan u dhicin. Weligaa ha u gudbin ganjeelka adigoo gaariga wado.**

Joogso inta u dhaxaysa 15 ilaa 50 fiit ka hor inta aanad gaarin khadka tareenka ee ugu dhow isgoyska marka:

- Calaamadu ay biligleedahay.
- Iridda ganjeelka ah ee isgoyska ay hoos u dhacayso ama mar horeba hoos ay u dhacday.
- Calanlaha uu bixinayo calaamad muujineyso inaad joogsato.
- Tareen uu aad usoo dhow yahay oo uu abuuri khatar degdeg ah.
- Aad maqlayso hoonka digniinta ah ee tareenka.
- Calaamad joogsi la dhejiyay.

Waad socon kartaa marka nalalka cas ay joojiyaan biliglaynta iyo dhammaan marka calaamadaha digniinta ee kale ay damaan.

## XUSUUSINO BADBAADO OO MUHIIM AH

**Ha isku dayin inaad uga badiso tareen wadada.**

Isla marka digniinaha la daaro: joogso.

**Haku joogsan khadadka tareenka.**

Haddii gaarigaagu ku xayirmo meel isgoys ah, qof walba si degdeg ah uga soo saar.

**Tixgalin la'aan ha ku samayn calaamadaha digniinta.**

Xitaa haddii aadan arkin tareen, ku kalsoonow calaamadaha. Tareenadu waxay noqon karaan kuwo ka dhow, aamusan, kana dhaqso badan sida ay u muuqdaan. Tareenadu waxay ka iman karaan labada jiho waxayna ku socon karaan khad kasta oo tareen.

## GOORTA LOO WACANAYO CAAWIN




Haddii ay jiraan wax ama waxyaabo saaran ama u dhow khadadka tareenka, wac lambarka ku qoran calaamadda Nidaamka Wargelinta Degdegga ah (Emergency Notification System) ee buluugga iyo caddaanka ah. Sii lambarka aqoonsiga qofka wax soo diraya. U sheeg goobtaada iyo faahfaahinta xaaladda. Calaamad malaha miyaa? Wac 911.

## KHADKA TAREENKA LAYTKA AH

Khadka tareenka fudud ee Sound Transit waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah shabakada gaadiidka ee Washington ee mudada dheer. Waa kuwan qaar ka mid ah tilmaamaha ku wadida gaariga meel u dhow xarumaha tareenada iyo khadadka:

- U fiirso dhammaan calaamadaha iyo astaamaha waddooyinka.
- Ka digtoonow oo u fiirso tareenada khadka tareenada fudud ee soo socda.
- Ka fogow ugu yaraan masaafada dhererka hal baabuur (ama in ka badan) u dhaxaysa gaarigaaga iyo tareenka laytka ah.
- Haku joogsan, haku baarkingareysan, hana kaga tagin gaadhigaaga khadadka tareenka! Dhig gaadhigaaga meel bannaan si tareenka uu kuu ag maro si fudud.

# 4.8 | WADDO LA WADAAGISTA BAABUURTA BEERAHA

Baabuurta dalagga iyo beeraha ee loogu talagalay inay socdaan 25 mitir saacadii ama ka yar waxay gadaal ku yeelan doonaan calaamad ama astaan saddex xagal ah. Markaad aragto baabuur si tartiib ah u socda, xasuuso inaad:

- Samirto oo aadna hoos u dhigto xawaaraha.
- Siiso boos badan oo taxaddar markaad gudbayso ama dhaafeyso gaariga kale.

Haddii aad u baahan tahay inaad dhaafto baabuur beer oo ay jiraan laba haad oo isku jiho ah, ka gudub hal haad oo buuxa ama dhan. Haddii uu jiro hal haad oo qura jiho walba, eeg gaadiidka soo socda oo si taxadar leh u wad gaariga. Markaad gudbeyso, waa in uu u dhexeeyaa ugu yaraan 3 fiit inta u dhaxaysa qaybta ugu ballaadhan ee gaadhigaaga iyo gaadhiga beeraha.

## 4.9 | WADDO LA WADAAGISTA BAABUURTA GURMADKA

**Gawaadhida dab damiska, ambalaasyada, iyo baabuurta booliiska ee isticmaala nalalka iyo/ama seeriga ayaa had iyo jeer xaq u leh wadada inay marka hore maraan.**

Isla markaad aragto ama maqasho calaamadaha ama digniinaha, isla markiiba u dhig baabuurkaaga dhinaca midig ee wadada oo istaag. Sug ilaa uu gaadhiga xaaladaha degdega ahi dhaafo meesha ka hor inta aanad fareejo daarin oo dib u galin jidka. Waa inaad dib ugu soo noqotaa wadada qaabkii aad markii hore u socotay. Sug ilaa uu gaadhiga xaaladaha degdega ahi dhaafo meesha ka hor inta aanad fareejo daarin oo dib u galin jidka. Waa inaad dib ugu soo noqotaa wadada qaabkii aad markii hore u socotay. Markaad u dhaqaaqdo dhanka midig, waxaad caawinaysaa darawallada baabuurta gurmadka si ay shaqadooda u gutaan, taas oo ka caawin karta badbaadinta naf!

# XEERARKA WADADA

## 4.10 | SHURUUCDA WADOOYINKA

Shuruucda waddooyinka waxaa loo dejiyey in dadka lagu badbaadiyo. Waxay ka hortagaan shilalka gaadiidka iyagoo dejinaya sharciyo qof kastaa ogolaado inuu raaco marka uu wadada isticmaalayo. Shuruucdu waxay u jiraan inay nidaamyada waddooyinku had iyo jeer u socdaan si habsami leh.

Inta badan, xeerarka aasaasiga ah ee waddadu waa isku mid. Si kastaba ha ahaatee, sharciyada waddooyinka ayaa isbedeli kara. Waxaad ka heli kartaa sharciyada ugu dambeeyay ee waddooyinka adoo ka baadhaya **RCW 46.61** (Revised Code of Washington 46.61, Xeerka Dib loo eegay ee Washington 46.61) onlaynka. Inta aad baabuur wadato, waa mas'uuliyaddaada inaad la socoto sharciyada hadda jira ee waddooyinka.

## TILMAAMAHA GAARI WADISTA GUUD

Ka darawal ahaan jooga gobolka Washington, waa fikrad wanaagsan inaad maskaxda ku hayso hagiddan guud ee gaari wadista:

- Ku wad dhanka midig ee wadada. Marka kaliya ee aad si ku meel gaadh ah bidix ugu safri karto waa haddii aad si badbaado leh oo sharci ah aad baabuur kale ugu baaseyso waddo laba haad ah.
- **Had iyo jeer ku wad dhinaca midig marka laga reebo markaad baabuur dhaafayso.** Marka ay jiraan haadyo badan oo isku dhinac u socda, ku wad gaariga haadka midig. Isticmaal haadka bidix si aad u dhaafto baabuurta gaabiska ah.
- Raac sharciyada xadka xawaaraha, xitaa marka aad isticmaalayso haadka bidix si aad u gudubto gawaari kale.
- Xasuusnoow, haadadka gawaarida la isla raaco ma'aha kuwo laisku dhaafo.
- Ha isticmaalin garbaha wadada ama marshabiyeediga si aad gawaari kale u dhaafto. Ilaa ay ku amraan saraakiisha ama calaamadaha, waa inaadan ku wadin garabka wadada.
- Ka fogow xiridda haadadka safarka. Haddii aad u baahan tahay inaad joogsato, sii soco ilaa aad si ammaan ah u joogsan karto.
- Horey usii soco. Gaadhi ha ugu wadin gadaal-gadaal wadada dhexdeeda, xitaa haddii aad seegto leexashadaada ama bixitaanka. Waa sharci darro in gaadhi gadaal-gadaal loogu wado garabka wadada ama waddo weyn.

- Ha ka dalban lifti jidadka xorta ah ee Washington macnaha waaweyn ama haka qaadin dad lifti dalbanaaya. Waa sharci darro waana khatar.

## QALABKA LAGU HAGO GAADIIDKA

Aaladaha lagu xakameeyo gaadiid waa calaamado, astaamo, iyo calamadaha wadooyinka ee xakameynaya isku socodka gaadiidka, taasoo ka dhigaysa wadooyinka iyo wadooyinka waaweyn kuwo amaan u ah wadayaasha, baaskiilayda, iyo dadka lugeynaya. Waa mas'uuliyaddaada inaad raadiso oo aad raacdo dhammaan calaamadaha, signallada, iyo calaamadaynta waddooyinka.

Xaalado gaar ah markii ay jiraan, sharci fulinta, shaqaalaha dhismaha, shaqaalaha dayactirka, iyo ilaalada iskoolka ee ardayda jidka goysiiya ayaa hagi kara gaadiidka. Dadkani waxay burin karaan calaamadaha taraafigga, waana in la raaco amarradooda ama tilmaamahooda.

## NALALKA AMA CALAAMADAHA JABAN

Haddii calaamada taraafiggu aanay shaqaynayn, ula dhaqan isgooyska sida joogsiga isgoyska afar-jidlaha ah. Joogsi dhammaystiran joogso. Ka joogso gaadiidka midigtaada ah. Si taxaddar leh u wad marka ay nabdoon tahay ama badbaado leedahay.



**Casaan Tikh ah**
Joogso. Sug ilaa uu nalka taraafigu noqdo cagaar oo aanay jirin wax gaadiid ah ama dad lugaynaya oo kujira isgoyska ka hor intaadan horay u dhaqaaqin.

Ka dib markaad si buuxda u joogsato nalka cas, waxaad u leexan kartaa *midig* haddii aadan arkin calaamad "no turn on red (ma leexan kartid marka nalka cas yahay)" oo aad haysato meel ku filan oo aad ku dhex gasho taraafikada.

Ka dib markaad si buuxda u joogsato nalka cas, waxaad u leexan kartaa *bidix* waddo hal-jid ah haddii aadan arkin calaamad "no turn on red (ma leexan kartid marka nalka cas yahay)" oo aad haysato meel ku filan oo aad ku dhex gasho taraafikada.



**Gaduud Bilig leh**
Joogso. Nalka taraafigga ee cas oo bilig leh wuxuu u shaqeeyaa sidii calaamad joogsi. Joogsi buuxa joogso, ka dibna tag marka ay timaado tookadaada.



**Falaadh Cas**
Joogso. Falaadh guduudan waxay ka dhigan tahay inaadan aadi karin jihada falaarta.



**Jaalle Tikh ah**
Dhin xawliga. Tani waxay ka dhigan tahay in iftiinku isu beddelayo casaan. Markaad aragto iftiin jaale ah, hoos u dhig xawaaraha oo isu diyaari inaad joogsato. Haddii aad ku sugan tahay isgoyska marka iftiinka jaalaha ah uu shidmo, ku sii soco isgoyska adi oo kusocda xawaaraha la dhejiyay.

Laguuma oggola inaad sheelareyso oo karaar qaadato wax ka baxsan xadka xawaaraha la dhejiyay si aad u gasho ama uga baxdo isgoyska marka iftiinku yahay jaalle.



**Jaalle Bilig leh**
Dhin xawliga. Iftiin huruudi ah oo biligleynaya waxay la micno tahay calaamad mudnaan siineysa. Ula dhaqan isgoyska sidii isgoys aan la xakameynin. Sii wad marka aad leedahay mudnaanta dariiqa, macnaha inaad marka hore marto.



**Fallaadha Jaallaha ah**
Dhin xawliga. Falaadh jaale ah waxay la macno tahay in iftiinku uu guduudan doono dhawaan. U diyaargarow inaad joojiso oo siiso dariiqa gaadiidka soo socda ee xaqa u leh.



**Cagaarka Tikh ah**
Sii wad socodka, laakiin hubi inaad:

- Sug inta isgoysku banaanaanayo.
- Ka joogso baabuurta gurmadka degdega ah sida sharcigu farayo.
- Sii dariiqa dadka lugeynaya.

Markaad bidix u leexanayso iftiinka cagaarka ah, jid sii baabuurta soo socda. Gaadiidka soo socdaa waxaa uu leeyahay xaqa-jidka, macnaha inuu marka hore maro. Ku hako meel aad si fiican uga arki karto gaadiidka soo socda, ka dibna si badbaado leh u dhammeystir leexashada marka uu jiro fursad ammaan ah.



**Cagaar Bilig leh**
Kuma arki doontid iftiin cagaaran oo ifaya gudaha gobolka Washington. Si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa inaad ku aragto iyaga gudaha British Columbia, Canada, iyagoo ka digaya in dadka lugeyn ay sugayaan inay gudbaan.



**Falaadh Cagaaran**
U bax jihada falaarta. Falaadh cagaaran ayaa ku siinaysa dariiqa mudnaan aad marka hore ku marto oo aad ugu safri karto jihadaas. Waa in aanay jirin baabuur soo socota, gaadiid jidka goynaya, ama dad lugaynaya inta ay fallaadhu cagaaran tahay.

## NALALKA TARAAFIGGA EE YARYAR EE WADDOOYINKA WAAWEYN

Nalalka taraafigga ee yaryar ayaa u shaqeeya sidii calaamadaha taraafigga caadiga ah. Marka nalka cas uu shidmo, joogso khadka joogsiga cad. Marka nalka cagaar noqdo, waxaad ku sii socon kartaa jidka kor-dallaca.

## 4.12 | CALAAMADAHA

Calaamadaha taraafigga ayaa kuu sheegaya shuruucda waddooyinka, khataraha, jihooyinka waddooyinka, iyo goobaha adeegyada waddooyinka. Qaabka iyo midabka calaamadahan, iyo astaamahooda iyo erayadooda, ayaa tilmaamo ku bixinaya nooca macluumaadka ay bixiyaan.

| | | |
|---|---|---|
| **Casaan** | Tallaabo mamnuuc ah ama xaddidan |  |
| **Liimi** | Digniinta dhismaha iyo dayactirka |  |
| **Jaalle** | Digniin kusaabsan xaaladaha guud iyo kuwa lama filaanka ah ee waddooyinka |  |
| **Jaalle Cagaar ah oo Dhalaalaya** | Digniin ku saabsan iskool, lugeeyayaal, iyo dhaqdhaqaaqa baaskiil wadida |  |
| **Caddaan** | Sharci Xeer Nidaamiye ah |  |
| **Cagaar** | Tilmaamaha ama macluumaadka jihaynta |  |
| **Buluug** | Hagida adeegyada wadaha |    |
| **Bunni** | Madadaalada dadweynaha, aqoonsiga goobta dhaqanka iyo taariikhda |    |

# CALAAMADAHA UGU BADAN




**Joogso**
Calaamada joogsiga waxay la macno tahay inaad joogsato laynka, meesha dadku jidka ka gooyaan, ama koonaha. U fiirso dhammaan jihooyinka gaadiidka iyo dadka lugeynaya, oo u ogolow inay marka hore maraan.




**Calaamad muujineysain loo baahan yahay in aayar loo socdo**
Calaamadda mudnaanta waxay ka dhigan tahay inaad hoos u dhigto xawaaraha oo aad u ogolaato gaadiidka xaqa leh inay marka hore gudbaan.




**Xadka Xawaaraha**
Calaamadahani waxay kuu sheegayaan xawaaraha ugu badan ee badbaadada ah ee la ogol yahay ama xawaaraha ugu yar ee badbaadada ah ee loo baahan yahay.

- Xadka xawaaraha ugu badan waxaa loogu tala galay xaaladaha ugu habboon. Yaree xawaarahaaga marka xaaladaha waddooyinku u baahan yihiin sidaas — sida waddadu inay simbiriirixo tahay ama ay ceeryaamo leedahay oo ay adagtahay in wax la arko. Xitaa haddii aad ku wado xawaare ka hooseeya xadka xawaaraha la dhejiyay, waxaad heli kartaa tigidh maadaama aad wali xawli ku socoto marka loo eego xaaladaha waddooyinka.
- Wadooyinka qaarkood waxay leeyihiin xadka ugu yar ee xawliga. Waxaa lagaa rabaa inaad u safarto ugu yaraan si dhakhso ah si aadan khatar ugu noqon darawallada kale.



**Midig ku Wad**
Calaamadani waxay ku xasuusinaysaa inaad joogtid haadka saxda ah ilaa aad dhaafayso baabuur kale.




**Kaamirooyinka badbaadada taraafigga oo otomaatig ah**
Kamaradahani waxay si toos ah u duubaan sawirada haddii aad:

- Ku guuldareysato inaad ku joogsato nal cas oo joogto ah mar uu daaran yahay.
- Ku guuldareysato inaad ku joogsato calaamada isgoyska wadada tareenada iyo jidka baabuurka.
- Ka gudubto xadka xawaaraha aag iskool.

Dhammaan goobaha leh kamaradaha taraafiggu si cad ayaa loo calaamadeeyay. Tigidhada xawaaraha ee meelahan waxaa loo diraa milkiilaha gaariga.




**Digniinta xawaaraha**
Calaamadahani waxay muujinayaan in isbeddelka xawaaraha lagu taliyay khatar iman karta ama xaalad waddo darteed (badanaa qalooc ama leexasho). Si habboon u hagaaji xawaarahaaga marka la eego dhammaan sababaha (wado, cimilada, gaadiidka, iwm.) oo raac xadka digniinta xawaaraha.




**Xadka xawaaraha kala duwan iyo ogeysiin horumarsan**
Calaamadahaan dhijitaalka ah waxay isku dayaan inay qaybiyaan socodka gaadiidka iyagoo dhajinaya beddelka xadadka xawaaraha. Calaamadaha ogeysiiska horumarsan ee dhijitaalka ah ayaa sidoo kale si dhakhso ah u xidhi kara dhammaan haadadka oo waxay siin karaan macluumaadka digniinta darawaliinta ka hor inta aanay gaadhin gaadiid gaabis ah.




**Hal Jid — macnaheedu waa waddo dhexda ka xiran oo gawaarida u socdaan hal jiho, loona oggol yahay hal dhinac.**
Calaamadahani waxay tilmaamayaan halka uu gaadiidku u socdo oo keliya jihada falaarta. Weligaa haku wadin jid qaldan waddo hal jiho ah.



**Lama ogola**
Qaar ka mid ah calaamadaha sharciga waxay leeyihiin goobaabin casaan ah oo calaamad cas ku dhexda kaga jirta. Calaamadahani waxay muujinayaan falalka qaarkood, sida leexashada bidix, leexashada midig, ama leexashada kala wareegga ah, lama ogola.




**Ha Gelin**
Calaamad afargees ah oo leh xariiq toosan oo caddaan ah oo ku dhex jira goobaabin waxay la macno tahay inaadan jidkaas ka soo geli karin jihadaa.




**Jid Qaldan**
Tani waxay kugu baraarujinaysaa inaad waddo qaldan kusocoto waxaana loola jeedaa in laga hortago isku dhacyo madax-madax ah. Istaag oo isla markiiba kala wareeg.







**Ma jiro gudbid iyo meelo dhaafid ammaan ah**
Calaamadahani waxay kuu sheegayaan halka aan laga oggolayn gudbida. Waxaa laga yaabaa inaad aragto calaamadahan meelaha ay ka jiraan khataro imaan kara, sida buuro, qaloocyada, iyo isgoysyada, iyo meelaha kale ee uu gaari ka soo gali karo wadada. Waxaa kale oo jira calaamado iyo astaamo haad oo kuu sheegaya marka ay ammaan tahay in la dhaafo.




**Haadka dhexe ee la wadaago u leexashada bidix oo kaliya**
Calaamadani waxay muujinayaan halka haad loogu talagalay baabuurta bidix u leexanaysa markii laga yimaado labada dhinac oo aan loo isticmaali karin gaadiidka in lagu dhex maro ama dhaafitaanka baabuurta kale. Fallaadho ayaa inta badan lagu rinjiyeeyaa wadada.



**Raanboodka**
Calaamadahani waxay calaamadiyaan galitaanka wareega ama raanboodka. Raanboodyada waxay sidoo kale yeelan karaan calaamadaha joogsiga, digniinta dadka lugaynaya, iyo calaamada fallaadha jihaynta.

## CALAAMADAHA AAGGA SHAQADU AY KA SOCOTO




Calaamadahaan dhismaha, dayactirka, ama hawlaha degdegga ah waxay kaaga digayaan dadka ka shaqaynaya meel u dhow waddada. Wadayaasha, dadka lugaynaya, iyo baaskiil wadayaasha waa in ay u hogaansamaan oo ka joogsadaan shaqaale kasta oo ka shaqeeya dhismaha wadada weyn, baabuurta leh nalalka jaalaha ah ee biligleynaya, ama qalabka dhismaha wadada weyn ama aagga shaqada dayactirka. Ganaax labanlaab ah dembiyada lagu galo marka baabuur lagu wado meelaha dhismaha marka shaqaaluhu joogaan.

## CALAAMADAHA ADEEGGA




Calaamadaha adeegga ayaa muujinaya goobta adeegyada kala duwan, sida isbitaallada, xarumaha baabuurta korontada ku shaqeeya lagu dabeeyo, iyo meelaha nasashada.

## CALAAMADAHA MADADAALADA



Calaamadaha madadaalada waxay muujinayaan soojiidashada maxalliga ah, sida jidadka socodka, meelaha loo dalxiis tago, iyo meelaha barafka lagu ciyaaro.

## CALAAMADAHA MEESHA LOO SOCDO

Calaamadaha meesha la aadayo waxay muujinayaan jihooyinka iyo masaafada meelo kala duwan, sida magaalooyinka, garoomada diyaaradaha, ama khadadka gobolka ama meelaha gaarka ah sida jardiinooyinka qaranka, meelaha taariikhiga ah, ama matxafyada.

Qaabka iyo midabka calaamadaha lambarka dariiqa waxay muujinayaan nooca waddada—haddii ay tahay waddo goboleed, Maraykan, waddo dowlad-goboleed, magaalo, ama degmo.




Masaafada ay magaaladu qofka u jirto




Ka bixid iyo bixid ikhtiyaari ah kaliya




Calaamadaha waddooyinka waaweyn

# CALAAMADAHA KALE EE GAADIIDKA

Qaar, laakiin aan dhammaan ahayn, calaamadaha Gobolka Washington ayaa hoos lagu muujiyey.
Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ogaato dhammaan calaamadaha, oo ay ku jiraan calaamadaha magaalada iyo degmada.




Lama leexan karo marka nalka cas uu daaran yahay




Xakamaynta isticmaalka haadka




Calaamadeeyaha maylka ama masaafada




Xadka xawaaraha aagga iskoolka




Xadka xawliga oo in la dhimo ay tahay horay




Isgoyska tareenka iyo jidka baabuurta-meesha ay kukulmaan



Waddada isgoyska ah



Qallooc – meesha ay waddadu ka leexanayso ama qalloocan tahay



Waxaa jidka goynaya ama goyn karta waqti kasta deero



Buur yar




Meel dhererkeedu hooseeyo oo aan u oggola-anayn baabuurta dhaadheer inay maraan



Isku dar ama soo gal jidka oo ku soo darsan gawaarida kale ee halkaa mareysa



Isku dhafka gaadiidka




Aag aan laga gudbi karin



Halka dadku jidka ka gooyaan



Qalloocyo isdaba joog ah—jidka marka hore bidix u qalloocda ka dibna midig



Isgoyska ardayda



Waddada dhinaceeda



Calaamad ayaa horay ah



Waa meel lagu sixbxan karo markii ay qoyan tahay




Garab jilicsan – meel aan laami ahayn oo halis u leh in baabuurku ku dhego



Horay istaag



Meel jidku aad uga qalloocsan yahay



Jid labada dhinac gawaari maraan-hal wado oo laisla isticmaalo



Haad dheeri ah ( oo midig lagaga daray, loomana baahna in lagu dhex milmo)



Digniinta hore ee loogu tala galay baaskiil-wadaha



Jid cidhiidhi ah ama buundo ayaa kaa horeysa



Isgoys wareeg ah




Qallooc bidix— waxaa laguugula talinayaa xawaare dhan mitir saacadii



Jidka weyn (waddo) kala qaybsan ayaa bilaabmaya



Jidka weyn (waddo) kala qaybsan ayaa dhammaanaysa




Gaadhi si tartiib ah u socda



Waddada leexleexad badan




Xawaaraha lagu taliyay inuu badbaado leeyahay




Siliska lagu taliyay in la isticmaalo



Khadka Tareenka Laytka ah



Qallooc aad u xoogan ayaa kaa horeeya




Isgoyska tareenka iyo waddada baabuurta



Jihada gaadiidku usocdaan




Aagga khatarta Tsunami




Kaynta qaranka




Waddada daadgureynta foolkaano markii ay qaraxdo

## 4.13 | ISGOYSYADA CAADIGA AH EE UGU BADAN

Isgoys waa meel kasta oo ay isku yimaadaan laba waddo ama ka badan. Waxaa jira noocyo badan oo isgoysyo ah: jidadka isgoysyada ah, wareegyada ama raanboodyada, wareegyada xasilinta, wadooyinka dhinaca ah, wadooyinka baabuurta, xarumaha wax iibsiga ama dukaamaysiga, iyo meelaha baabuurta la dhigto meelaha laga soo galo. Isgoys kastaa sharci ahaan waa meel dadku jidka ka goyn karaan, ha ahaato mid calamaysan ama mid aan calaamad lahayn. Nooc kasta oo isgoys ah wuxuu u baahan yahay go'aan qaadasho xikmad leh, dhaqan taxaddar leh, iyo ka warqabka naftaada iyo dadka kale.

Kahor intaadan galin isgoys:

- Jooji oo mudnaanta sii dadka lugeynaya iyo gaadiidka kale ee isgoyska.
- Jiho kasta eeg dhowr jeer.
- Eeg muraayadaha dhinacyada iyo gadaashaada si aad u hubiso inuusan jirin baaskiil wade, mooto wade, ama qof lugaynaya oo jidkaaga soo galaya.
- Raadi calaamadaha wadada si aad u raacdo markaad u sii socoto haad ama waddo cusub.
- Hubi inaad si cad u arki karto gaadiidka goynaya ka hor inta aadan gelin isgoys. Haddii aad ku istaagto khadka joogsiga, laakiin aragtidaada jidka isgoyska ay xanniban tahay, si tartiib ah u sii soco ilaa aad aragto. Tani waxay u ogolaanaysaa darawalada goynaya inay arkaan xagga hore ee gaadhigaaga ka hor intaadan arkin ayaga. Tani waxay siinaysaa fursad ay ku dhimaan xawaaraha oo ay kuugu digaan haddii loo baahdo.

- Xaqiiji in ay jirto meel banaan oo kugu filan oo aad ka gudbi karto ama aad ka leexan karto adoon xannibin isgoyska.

Aad bay muhiim u tahay inaad si taxaddar leh u eegto dhammaan agagaarka isgoyska, gaar ahaan marka aad u dhowdahay xarumaha dukaamaysiga, meelaha baabuurta la dhigto, meelaha dhismaha, waddooyinka mashquulka ah, garoommada ciyaaraha, jardiinooyinka, iyo barxadaha iskuulada.

**Xaqa u lahaanshaha mudnaanta marista wadada**
Xeerarka xaqa mudnaanta ayaa go'aamiya nidaamka ay baabuurta uga gudbaan isgoyska. Sharcigu wuxuu go'aamiyaa cidda ay tahay inay ka tanaasusho (oo joojiso) xaqa mudnaanta marka hore.

**Joogsiga afar jid isgoys ah**
Markaad u dhawaato isgoys leh calaamadaha joogsiga, sharciyada soo socda ayaa khuseeya:

- Baabuurka ugu horreeya ee yimaada waa kan ugu horreeya ee taga.
- Baabuurka labaad ee imanaya waa kan labaad ee taga, iwm.
- Haddii laba baabuur ay yimaadaan qiyaastii isku mar, halaga joogsado ha maree marka hore meesha asagu kan midigta.
- Baabuur kasta oo bidix u leexanaya waa inuu siiyaa mudnaanta baabuurta toos u socda iyo kuwa midig u leexanaya.

**Joogsi laba jid ah**
Gawaadhida leexanaya waa in ay kajoogsadaan baabuurka si toos ah u socda. Baabuurka toos u socdaa wuxuu leeyahay xaqa mudnaanta in meeshaa asagu maro marka hore

# 4.14 | LEEXASHADA

Haddii aad bidix u leexanayso ama midig isgoys, sharciga gobolku wuxuu kaa rabaa inaad u leexato haadka ugu dhow jihada aad ka timid.

Haddii ay jiraan wax ka badan hal haad oo leexasho, joog haadkaagii asalka ahaa markaad leexanayso. Hubi inaad si taxadar leh u qorsheyso leexashadaada si aadan ugu leexan haad kale oo aan loo baahnayn markaad leexinayso.

Markaad dhammayso leexashadaada, waxaad u beddalan kartaa haad kale haddii aad u baahato.






Daar fareejada dhankaad u leexanayso ugu yaraan 100 fiit ka hor intaadan u leexan bidix ama midig intaysan kugu imaan gaadiidka soo socda. Dabadeed, ka raadi meel nabdoon oo bannaan oo gaadiidka dhexdiisa ah. Ka eeg jidka aad u leexanayso si aad u hubiso in aanay baabuur, lugeeyayaal, ama baaskiil wadayaashu aanay soo galin ama ku soo dhawayn jidkaaga.

**Gadaashaada ka fiiri baaskiil-wadayaal oo kajoogso ha dhaafaane ka hor inta aadan leexan.**

Baaskiil-wadeyaasha ayaa laga yaabaa inay kuugu soo socdaan si ka dhakhso badan inta aad ogtahay. Hubi inaad haysato wakhti aad si badbaado leh ugu leexato.

## Soo noqoshada guud ahaaneed ee ama loo yaqaano kala wareegga

Haddii aad u baahan tahay inaad leexato oo aad kala wareegto macnaha, raadi calaamado muujinaya in leexashada kala wareegida ah la oggol yahay iyo in kale. Waa inaad lahaataa muuqaal cad oo macnaha aad si waadax ah u aragtaa jihooyinka oo dhan walba ah ka hor inta aanad kala wareegin. Sababtaas awgeed, ha ku kala wareegin meel jidku ka qalloocan yahay ama marka aad u soo dhowaanayso buur yar qeybteeda ugu sarreysa. Gudaha Washington, soo noqoshada guud ahaaneed ee ama loo yaqaano kala waregga waa la oggol yahay haddii aan la dhejin calaamad kuu sheegaysa in aan la ogolayn.




### Isgoys Afar Meel Laga Soo Galo Afarna Lagaga Baxo

Isgoyska caynkaan ah waa mid leh afar jid oo hal haad ama in ka badan ay u baxayaan jiho walba. Waxaa lagu calaamadayn karaa nalalka taraafigga, astaamaha waddooyinka, iyo/ama calaamadaynta waddooyinka. Ogow oo ku dabaq sharciyada jidka ama mudnaanta cida macnaha hor mareysa isgoysyada.




### Isgoyska T

Isgoyska T waa isgoys saddex jid leh oo ay waddo ku dhammaato oo ay la kulanto waddo horteeda marta. Isgoysyada T qaarkood waxay yeelan doonaan calaamad muujinaysa xaqa dadka uleh inay maraan marka hore ama calaamad joogsi si ay kuu ogeysiiyaan in gaadiidka maraya markaa meesha uu leeyahay xaqa jidka.




### Isgoyska Y

Isgoysyka Y waa marka waddo yar ay ku xiranto wadooyin badan oo waaweyn. Waxaa laga yaabaa inay jirto calaamad joogsi halka wadada yar ay kaga xiranto wadada weyn. Baabuurta waddooyinka waaweyn haya ayaa xaq u leh inay maraan marka hore.



**Meelahaa dhexe ee dadku jidka ka gooyo**
Kuwani waa meelo dadku ka gooyo wadada oo dhexda ah jidka ah. Dadka lugeynaya ayaa **had iyo jeer** xaq u leh inay maraan marinka calaamadeysan marka hore oo loogu tala galay dadku inay wadada ka gooyaan.

Darawaliintu waa inay istaagaan si ay ugu oggolaadaan dadka lugaynaya iyo baaskiil wadayaasha inay gudbaan, iyadoon loo eegayn haddii meesha jidka laga gooyo ay calaamad joogsi leedahay ama mayee aysan lahayn.

## 4.15 | ISGOYSYADA KALE



**Wareegyada dejinta ama xasilinta gaadiidka**
Wareega dejinta ama xasilinta gaadiidka waa isgoys leh meel la riinjiyeeyay ama sare loo dhisay oo dhexe oo jasiirad ahaan ah oo hareeraheeda gaadiidku u qulqulo dhanka saacadu usocoto maahee dhanka kale. Isgoysyka noocaan ah wuxuu yeelan karaa calaamado joogsi ah ama kuwa mudnaanta siinaya in marka hore uu dhaafo gaadiidka xaqa u leh kuwaasi oo ku yaala dhammaan, ama qaar, ama midnaba aanan ku oolin meelaha laga soo galo. Waxaa laga heli karaa isgoysyada 4ta-jid, 3da-jid, ama 2da-jid. Kudabaq isla sharciyada ama xaqa jidka ee mudnaanta la siinayo cida xaqa u leh inay meesha marka hore marto sida aad yeeli lahayd isgoys kasta oo kale.

Wareegyada qaboojinta gaadiidka waxaa loogu talagalay baabuurta rakaabka waxaana laga yaabaa inaysan si fudud u qaadin baabuurta waaweyn sida baabuurta dab-demiska, basaska, ama kuwa xamuulka qaada ee geegeeya meelo kala duduwan. Sii baabuurta waaweyn boos badan oo ka digtoonow inay ku qasbanaan karaan inay u wareegaan saacadda dhankay usocoto si ay u dhex maraan wareegga.

## RAANBOODYADA

Raanbood waa isgoys wareeg ah halkaas oo dhammaan baabuurta soo socota meesha laga soo galayo ay xawliga dhimaan ayna u socdaan dhanka saacadu usocoto maahee dhanka kale ayagoo ku wareegaya meel dhexe oo sare loo qaaday oo jasiirad ahaan ah.

Raanboodyada waxaa loogu talagalay isticmaaleyaasha kala duwan, oo ay ku jiraan baabuurta, baabuurta dab-damiska, basaska, gawaarida meelo wax geeya, kuwa xamuulka, baaskiil wadayaasha, iyo dadka lugeynaya.



Raanboodyadu waxay lahaan karaan laami ay maraan gawaaridu oo ah agagaarka meesha dhexe ee jasiirad ahaanta ah. Gawaarida laamigooda ee halkaasi mara waxaa loogu talagalay baabuurta waaweyn. Sii baabuurta waaweyn meelo badan oo nafaas ah oo kufilan maadaama loo ogol yahay inay ka gudbaan laamiyada waaweyn ee gawaarida iyo labada haad marka ay ku soo dhawaadaan oo ay dhex marayaan isgoyska.

Baaskiiley waxay dooran karaan inay maraan hareeraha raanbood sidii dad lugeynaya ama gaadiid ahaan yey u mari karaan. Marka aad u safraysid gaadhi ahaan, baaskiillayda waa in ay raacaan haadka badhtankiisa si ay u kordhiyaan muuqaalkooda ama sida wadayaashu u arki karaan.

**Sida loogu wado gaari raanboodka**

1. Hoos u dhig xawaaraha markaad u soo dhowaanayso raanboodka. Raanboodyada waxaa loogu talagalay xawaaraha u dhexeeya 15 iyo 25 mitir saacadii.
2. Dooro haad markaad u dhawaato raanboodka. Calaamadda doorashada haadka waxay ku tusinaysaa haadyada loo isticmaalo u leexashada dhanka midig, si toos ah u socoshada, iyo u leexashada dhanka bidixda. Marka aad gashid haad, ku jir haadkaas ilaa aad ka baxdo raanboodka.
3. Ka joogso dadka lugeynaya iyo baaskiillada meelaha dadku jidadka ka gooyaan marka aad soo galayso ama ka baxayso raanbood.
4. Ka joogso ama dhin xawliga si marka hore ay u gudbaan dhammaan gaadiidka ku jira raanboodka. Bidix fiiri oo ka istaag dhammaan gaadiidka horayba ugu jiray raanboodka maadaama ay ayagu kaa xaq leeyihiin. Marka aad aragto meel bannaan oo gaadiidka dhexdooda ah, geli goobada oo u gudub meeshii aad ka bixi lahayd. Xusuusnow in aad ka fogaato masaafo badbaado leh gadaasha baabuurta xamuulka sababtoo ah waxay u baahan yihiin boos badan waxaana loo ogol yahay inay isticmaalaan labada haadba.
5. Ugal raanboodka midig, u soco saacadda dhanka ay u socoto maahee dhanka kale oo joog haadkaaga.
6. Ka bax jidka aad rabto.
7. Ku kaxee gaariga hareeraha raanbood oo jooji haddii uu gaari qaabilsan xaalad degdeg ah soo dhawaado, si la mid ah sidii la yeeli lahaa isgoys kasta oo kale.




## ISGOYS DHEEMANEEDKA KALA BAXAYA

Isgoys dheemaneedka kala baxaya waa nooc cusub oo isgoys ah oo ku yaal gudaha Washington Waxaa loo qaabeeyey si ay gaadiidku ugu gudbaan dhinaca kale ee wadada. Tan waxaa laga yaabaa inaysan u muuqan mid macquul ah sababtoo ah waxaad ka gudbaysaa haadadka iyadoo gaadiidku ay u socdaan jihada ka soo horjeedka ah. Isgoysku waxaa uu ogolaadaa in baabuurtu ay bidix u leexdaan (gudaha iyo dibada hoobadyada jidadka waaweyn) si aad u waxtar badan. Isgoysyadani waxay yareeyaan tirada meelaha ay baabuurtu ka gudbaan dariiqyada, taas oo iyaduna hoos u dhigta khatarta isku dhaca. Iyagoo meesha ka saaraya u leexashada bidix ee ka dhanka ah gaadiidka soo socda, isgoysyada dheemanka ee kala baxaya waxay hagaajiyaan socodka gaadiidka waxayna yareeyaan ciriiriga.

**Maxaa la filan karaa**

- Baddalashada Haadka. Markaad u dhawaato isgoyska, waxaa lagugu hagi doonaa inaad u gudubto dhanka bidix ee wadada. Tani waxay noqon kartaa mid la yaab leh marka hore, maadaama aad ku wadi doonto dhinaca ka soo horjeedka ah ee wadada, laakiin calaamado cad iyo astaamo ayaa ku hagi doona.
- Leexashooyinka Bidix ee Qulqulka Xorta ah. Faa'iidada ugu weyn ayaa ah in ay kuu ogolaato inaad u leexato dhanka bidix ee wadada xorta ah macnaha wadada weyn adigoon joojin gaarigaaga ama xawliga ka dhimin gaadiidka soo socda.
- Ku soo noqo Caadiga. Ka dib markaad ka gudubto marinka sare ama marinka hoose, waxaa laguu tilmaami doonaa inaad dib ugu gudubto dhanka midig ee wadada.

**Waxa ay tahay in la sameeyo**

- Fiiro gaar ah u yeelo calaamadaha iyo astaamaha laamiga dhinaciisa ah ee marshabiyeediga. Waxay kugu hagi doonaan baddalashada haadka iyo leexashooyinka.
- Ha ka werwerin gaadiidka soo socda marka aad bidix ugu leexanayso laamiga xorta ah, macnaha laamiga weyn. Naqshadu waxay meesha ka saaraysaa kudhicitaanka baabuurta soo socda.
- Feejignow had iyo jeer oo ku wad gaariga xawaare badbaado leh. Inkasta oo socodka taraafiggu uu hagaagay, waa muhiim inaad ka warqabto agagaarkaaga.

## ISGOYS AAN LA XAKAMEYN

Isgoysyada aan la xakameynin ma laha calaamado, laakiin sharciyada caadiga ah ee gaariga xaqa uleh marka hore ayaa khuseeya. Isgoysyadan waxaa sida caadiga ah laga helaa jidadka iyo waddooyinka maxalliga ah. Markaad galayso isgoys aan la koontaroolin, waa inaad siisaa gaariga kaaga xaq leh mudnaanta haddii arrimahaan wax ka mid ah uu khuseeyo:

- Gaadhi ayaaba horay ugu jira gudaha isgoyska.
- Waxaad ka soo galaysaa ama ka gudbaysaa waddo weyn oo mid gobol ah dhanka jid heer labaad ah, macnaha oo aanan aad u horumarsanayn.
- Waxaad ka soo galaysaa waddo laami ah dhanka waddo aan laami ahayn.
- Waxaa aad qorshaynaysaa in aad bidix u leexato, gaari ayaana wuxuu ka soo socdaa dhinaca kasoo horjeedka ah.

# 4.16 | CALAAMADAYNTA WADDOOYINKA

Calaamadaha jidadku waa xariiqyo, fallaadho, erayo, ama calaamado lagu xardhay jidka si ay kuu siiyaan tilmaamo ama digniino. Waxaa loo isticmaalaa in lagu qaybiyo haadadka. Calaamadaha waddooyinka ayaa muujinaya marka aad dhaafi karto baabuurta kale ama aad bedelan karto haadadka. Waxay muujinayaan haadadka loo isticmaali karo leexashada, waxay qeexaan marinnada lugaynta ama dadka lugeynaya ay maraan, oo waxay muujiyaan meesha ay tahay inaad u istaagto calaamadaha ama signallada taraafigga.

## HAADADKA



Khadadka cad-cad ee tikhda ah ee macnha xiriirsan waxay calaamadiyaan wadada qarkeeda waxayna ka soocaan haadadka baaskiilka kuwa gaadiidka kale.



Haddii aysan jirin calaamado waddada, u dhowow dhinaca midig sida badbaadada leh ee ugu macquulsan.



Khadadka cad-cad iyo kuwa jaalaha ah ee kala saaraya haadka safarka ama calaamadeynaya bartamaha wadada ayaa kuu sheegaya haddii gaadiidku u socdo hal ama laba jiho.

Khadadka jaalaha ah ayaa kala sooca gaadiidka jihooyinka iska soo horjeeda. Khadadka cadcad waxay kala soocaan haadyada gaadiidka isku dhinac u socda.



Xariiqyo cad oo jajaban macnha kala gogoan oo gaaban ayaa ka dhigan in haadku soo dhammaanayo. Waxaad u baahan doontaa inaad ku biirto gawaarida jidka maraya ama aad ka baxdo. Waxaad ka gudbi kartaa xariiqyada jajaban ee macnaha kala gogoan ama dhaashdhaashta ah haddii ay ammaan tahay ama badbaado ay leedahay in sidaasi la yeelo.



Waxyaabo dhexda ah oo la taaban karo ayaa kala qeybsha labo waddo ama wax ka badan. Waxay noqon karaan meelo banaan, kala qaybiyayaasha shamiitada ah, ama calaamadaha jaalaha ah ee marshabiyeediga ee ah 18 inji oo leh xariijimo. Waa sharci darro in lagu dhex wado, lagu dul wado, ama laga dul gudbiyo gaari waxyaabaha dhexda ah.



Xariiq cad oo go'goan ama dhaashdhaash ah oo u dhexeeya haadyada gaadiidka waxay la macno tahay inaad ka gudbi karto si aad u beddelato haadadka haddii ay ammaan tahay sidaasi inaad yeesho.

Layn cad oo adag ama macnaha xiriirsan macnihiisu waa in adi ay tahay inaad kusii joogto isla haadkaaga haddii xaalad gaar ah aysan u baahnayn inaad adigu baddalato haadadka.

Xariijimo cad oo labo ah oo adag ama macnaha aan kala googonayn ayaa ah xijaab ukala dhexeeya haadyada. Waa sharci darro inaad ka gudubto khadadka cad ee labada ah.



Xariiq jaale ah oo jajaban ayaa muujinaya bartamaha waddo laba-jid leh, waddo laba haad ah. Haddii ay ammaan tahay, waxaad isticmaali kartaa haadka soo socda si aad baabuur kale u gudubto.

Xariiq huruudi ah oo adag macnaha xiriirsan ayaa tilmaami kara qarka waddada ama aag wax lagu -baas mareeyo inaanu jirin. Ha gudbin xarriiq jaale ama huruudi ah oo adag macnaha xiriirsan oo aanan kala googonayn si aad u baas mareyso gaari kale.

Xariiqyo jaale ah oo laba ah oo adag ayaa muujinaya bartamaha waddo laba-jid ah. Laguuma oggola inaad wax gudubto ama wax baas mareyso, labada dhinacba, waddooyinka leh khadadka jaalaha ah ee labada is feer socda ah.



Jaalle adag iyo xariiq jaale ah oo jajaban ayaa sidoo kale muujinaya bartamaha waddo laba-jid ah. Laguuma ogola inaad dhaafto gaari kale ama aad wax baas mareyso marka laynka jaalaha ah ee adag uu yahay dhinacaaga wadada. Haddii xariiqda googoan uu yahay dhankaaga wadada, waxaa laga yaabaa inaad dhaafto ama wax waad baas mareyn kartaa hadii ay nabdoon tahay inaad sidaa sameyso.



Haadadka leexashada caadiyan waxay ku yaalaan isgoysyada waaweyn. Waxaa jira astaamo iyo calaamado waddooyin oo tilmaamaya haadadkan. Mararka qaarkood calaamada fallaadha ayaa kaa caawinaysa xakamaynta haadadkaan. Markaad ku jirto haadka leexashada, waa **inaad** raacdaa leexashada.



Waxaad ka gudbi kartaa khad huruudi ah oo adag oo ku yaal wadada dhinacaaga si aad u gasho haad dhexe. Haadkan waxaa lagu calaamadeeyay fallaadho u leexashada bidix ku saabsan.

Haadadkaan dhexda ah ee la wadaago waxaa loogu talo galay baabuurta bidix u lexanaysa labada jihaba ee kasoo leexanaysa ama u leexanaysa jidka (ama kala wareegeysa markii loo ogolaado).

Indhaha ku hay gaadiidka u socda jihada kale sababtoo ah baabuurtaasi waxay sidoo kale xaq u leeyihiin inay isticmaalaan isla haadka leexashada.

Haadadkaan waa inaan loo isticmaalin dhaafida gawaarida kale. Waa inaadan ku safrin meel ka fog 300 oo fiit gudaha haadka dhexe.

## HOV / GAWAARIDA LAWADA KIREYSTO INTA LACAGO LA ISKU DARSADO






Haadadka HOV(High-Occupancy Vehicle, Gaariga Qaadka Dadka Badan) waxa loo qoondeeyay gawaarida lawada kireysto inta lacago la isku darsado, fatuuradaha lawada kireysto inta lacago la isku darsado, iyo basaska.
Haadadka HOV waxaa lagu gartaa calaamadda dheemanka ee astaamaha dushooda iyo marshabiyeediga ah. Haadadkaan waxaa ka sooca haadadka kale ee ku yaal wadada weyn khad cad oo adag.
Si uu ugu safarto haadka HOV, baabuur waa inuu buuxiyaa shuruudaha inta ay tahay tirada rakaabka saaran ee ku dhejisan calaamadaha. Mootooyinka sidoo kale waa loo ogol yahay inay isticmaalaan haadadka HOV.




## HAADAD JIHADA GAWAARIDU UGU SOCOTO LA BADDALI KARO

Haadad jihada gawaaridu ugu socoto la baddali karo, sida haadadka degdegga loo maro, waxay wax ka qabtaan ciriiriga gaadiidka iyadoo la beddelayo jihada safarka ee hal ama in ka badan oo haad marka loo baahdo baaxad dheeri ah. Haadad jihada gawaaridu ugu socoto la baddali karo waxaa sida caadiga ah looga shaqeysiiyaa si joogto ah, jadwal go'an oo ka tarjumaya qaababka socodka maalinlaha ah. Waxa kale oo loo hawlgelin karaa dhacdooyin ama shilal waaweyn.

Waddooyindkan waxaa badanaa lagu calaamadeeyaa khadadka cad ee labada ah ee kala gogoan ama dhaashdhaashta ah. Ka hubi calaamadaha kore ka hor intaadan bilaabin inaad ku wadid gaariga haad jihada gawaaridu ugu socoto la baddali karo. Falaadh cagaaran waxay ka dhigan tahay inaad isticmaali karto haadka, oo, casaan X ah macnaheedu waa inaadan awoodin inaad isticmaasho. Jaallaha joogtada ah ee X macnaheedu waa haadku waa beddelayaa jihada, waana inaad ka dhaqaaqdaa haadka isla marka ay badbaado leedahay sidaasi.

## WADDOOYIN SI KHAAS AH GAADIID GAAR AH LOOGUGU TALA GALAY

Haadad jihada gawaaridu ugu socoto la baddali karo waxaa lagu gartaa calaamado iyo/ama astaamo ku dhigan marshabiyeediga oo tilmaamaya in haadka loo qoondeeyay isticmaalka gaarka ah. Tusaale ahaan, haadadka taraansit-ka waxaa loogu tala galay inay isticmaalaan basaska oo keliya.

## WADDOOYINKA LACAGAHA LAGU BIXIYO

Haadadka degdega ah ama sida degdegga ah loo maro iyo dariiqyada gawaarida badani maraan ee lacagta lagu maro waxay bixiyaan safarro degdeg ah oo bilaash u ah basaska, fatuuradaha la isla kireysto, baabuurta la wada kireysto, iyo mootooyinka, laakiin sidoo kale waxay siinayaan darawallada shakhsi ahaaneed ikhtiyaarka ah inay bixiyaan kharashka si ay ku isticmaalaan haadadka safarka degdegga ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, ka raadi **toll roads** (waddooyinka lacagaha lagu bixiyo) mareegta wsdot.wa.gov.

Isticmaalka koontada Good To Go! waa habka ugu wanaagsan ee lagu bixin karo lacag bixinta gudaha Washington. Isticmaalka koontada Good To Go! waxay kuu badbaadin kartaa lacag mar kastoo kharash aad waddo ku bixinayso gudaha gobolka oo ku siinaysaa habboonaanta lacag bixinta tooska ah.

Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan koontooyinka Good To Go! accounts, booqo mygoodtogo.com.

## CALAAMADAHA WADDOOYINKA EE KALE



**Meelaha jidka laga gooyo** waxay siiyaan waddo badbaado leh dadka lugaynaya iyo baaskiillada si ay uga gudbaan waddada. Waa inaad ka joogsataa dadka soo galay ama soo gali raba halka wadada laga gooyo.

Caado u yeelo in aad ka digtoonaato dadka lugeynaya iyo baaskiilleyda marka aad ka gudbayso isgoysyada ama aad leexanayso.

Meelaha wadada laga gooyo qaarkood ayaa sidoo kale laga yaabaa inay leeyihiin nalal marshabiyeedi oo ay shidaan dadka lugeynaya. Waa inaad sugtaa markii nalalku ay biligleynayaan oo aad joogsataa.

**Meel dadku jidka uu ka goyn karo oo kasta lama calaamadeeyo oo qaar yaan calaamad lahayn! Isgoys kasta si sharci ah ayaa loo qeexay inuu yahay meel dadku jidka uu ka goyn karo iyadoo aan loo eegin in calaamadda meel dadku jidka uu ka goyn karo ay jirto.**



**Waddooyinka baaskiilka** waxaa lagu calaamadeeyaa khadadka cad cad ee xiriirsan iyo calaamadaha baaskiilka.

Qaar ka mid ah dariiqyada baaskiilka ayaa laga soocay haadka safarka ee ku xiga oo leh meel xiran oo ka kooban laba xariiq oo cadcad oo adag ayadoo la isticmaalayo astaamo janjeera oo u dhexeeya. Meeshaa xiran waxaa loo tixgalinayaa inay tahay qayb ka mid ah haadka baaskiilka oo waa in aan la gelin inaad leexasho sharci ah leexanayso maahee ka dib markaad hubiso inay badbaado tahay in la sameeyo sidaas.

Haadadka baaskiilka qaarkood ayaa toos looga soocaa gaadiidka meesha maraya ayadoo la isticmaalayo habab sida boodhadhka waaweyn, boorar kale, ama dhir fuustooyin iwm ku jirta.




**Khadadka joogsiga** waxay ka muuqdaan calaamada joogsiga ama signalka. Waa inaad istaagtaa ka hor inta aanu gaadhigaagu gaadhin khadka joogsiga ama meel dadku jidka ka gooyo (haddii meel caynkaas ahi ay jirto).




**Haadadka dab demiska** waxaa caadiyan lagu calaamadeeyaa xariijimo cas ama gees meel ah oo kaabi ahaan ah oo guduudan. Ha dhiganin gaariga ama ha istaagin jidadka dab demiska. Bulshooyinka ama xaafadaha qaar, wadada hor marta xarunta dab-damiska ayaa loo calaamadeeyaa inay tahay haad dab-damis si ay wadada ugu ilaaliso baabuurta gargaarka.



**Xariijimaha jaalaha ah** ayaa muujinaya halka aan laguu ogolayn inaad baabuur ku wado.



**Wadada leh calaamada baaskiilka oo kor ka wadata labo xariiqmo** waa calaamado waddooyinka loo isticmaalo si loogu muujiyo haadka baabuurka ee lala wadaago baaskiilka.

Haddii aad aragto calaamado fiiqan ama ka dhexeeya baabuur iyo baaskiillo, u fiirso dadka baaskiillada wata. Si tartiib ah u wad oo bixi ugu yaraan 3 fiit oo meel bannaan ah marka aad gudbayso.

Baaskiilladu waa inay u joogsadaan si waafaqsan calamadaha ay wadaagaan baabuurta iyo baaskiilladu oo ay aadaan jihada ay fallaadhu tilmaamayso.




**Sanduuqyada baaskiilka**
Marka uu iftiinku cagaar noqdo, baaskiil wadayaasha ayaa marka hore ka gudba isgoyska waxayna galayaan haadka baaskiilka ee dhinaca kale ee isgoyska. Midig uma leexan kartid marka uu midabka casaanka ka ag shidan yahay meel u dhow sanduuqa baaskiilka. Joog gadaasha xariiqda cad ilaa inta sanduuqa baaskiilku uu waadax ka noqonayo.

Baaskiiladu waa in ay is hor taagaan baabuurta isgoysyada.

## 4.17 | AAGAGGA




### AAG ISKOOL

Aag iskool waxaa loola jeedaa waddooyinka ku xeeran dhisme iskool ama garoonka ciyaaraha. Meelahan waxaa lagu calaamadeyn karaa calaamado, calaamado laami marshabiyeed, iyo nalal biligleynaya.

Xadka xawliga aaga iskoolku waa 20 mitir saacadii sababtoo ah xawaaraha sare wuxuu kordhiyaa halista shilalka dhimashada. Waxaa laga yaabaa inaad aragto calaamado caddaynaya marka xawliga 20 mitir saacadii uu khuseeyo.

Xusuusnow: Ardaydu waxay ka qaybqaadan karaan hawlaha iskoolka waqtigiisa ka dib, kooxaha ciyaaraha, ama geli karaan garoonka ciyaarta saacado ka dib. Hoos u dhig xawliga oo wax u fiirso marka aad baabuur ku wadid meel u dhow iskool. Dedaal kasta oo lagu dhimayo khatarta carruurta ku iman karta waa u qalantaa waqtigaaga iyo dareenkaaga.




## AAG SHAQO

Aag shaqo waa aag ay ka dhacdo shaqo dhisme waddo ah ama dhisme. Waxay ku lug yeelan kartaa xidhitaannada haadka, leexinta jid baddal ah, iyo qalab dhaqaajin.




Ogsoonow xubnaha shaqaalaha ee ka shaqeeya inay badbaadiyaan dadka socotada ah marka ay baabuurtu dhaafayaan meesha had iyo jeer ayagoo xawli ku socda. Shaqaalaha aagagga shaqadu waa waalidiin, lamaanayaal, walaalo, iyo asxaab u baahan jawi shaqo oo badbaado leh.

**Fadlan ka qayb qaado ilaalinta shaqaalahan had iyo jeer.**

- U fiirso calaamadaha, koojooyinka, fuustooyinka, baabuurta waaweyn, iyo shaqaalaha markaad u dhowaanayso aagga shaqada laga wado.
- Meesha ka saar waxyaabaha wax mashquuliya si aad kor ugu qaaddo diiradda ama wax u dhug yeelashada. Dhin codka muusiga oo haki wada sheekaysiga.
- Had iyo jeer dhin xawaarahaaga gudaha aag shaqo, xitaa haddii aysan joogin shaqaale. Laamiyada dhuuban iyo laamiyada qalafsan ee maarshabiyeediga waxay abuuri karaan xaalad khatar ah.
- Kordhi masaafadaada idiin dhexeysa gaariga aad daba socoto, u fiirso gaadiidka agagaarkaaga ah, oo u diyaargarow inaad istaagto.

- Taxaddar aad ah isticmaal markaad baabuur ku dhex waddo aag shaqo habeenkii, haddii aad aragto shaqaale iyo haddii kaleba.
- Dhaqso markii ay suurtagal tahay si aad boos ugu banneyso shaqaalaha iyo baabuurta dhismaha.
- U fiirso calaamadaha aagga shaqada ee dhejisan ilaa aad ka aragto calaamadda End Road Work (Dhammaadka Shaqada Dhismaha Wadada).
- Filo dib u dhac, u tabaabusheyso iyaga, oo goor hore u bax si aad u gaadho meesha aad ku socoto wakhtiga loogu talagalay.
- Isticmaal waddo kale si aad uga fogaato aagagga shaqada markii ay suurtagal tahay.




## AAGGA XAALADAHA DEGDEGA AH

Aagga xaaladaha degdega ah ayaa la abuuraa si looga jawaabo ama wax looga qabto xaalad wadada dhinaceeda ah oo u baahan feejignaan degdeg ah. Waxay noqon kartaa shil, baabuur jabay, ama qof dhibaataysan. Kuwani waa xaalado aan qofna qorsheyneynin, waxayna uga baahan yihiin daryeel iyo dulqaad dhammaan isticmaaleyaasha waddooyinka.

Aagagga xaaladaha deg-degga ah waxaa laga yaabaa inay ku lug yeeshaan ololka waddooyinka ama calaamadaha, laakiin baabuurta waddooyinka dhinacooda ah ee arrinka wax ka qabanaya waxay isticmaali doonaan nalal bilig leh. Isla markaad aragto gaadhi jawaab celin ah ama yacni wax in looga qabto arrin dhacay loogu tala galay oo wadada dhinaceeda ah oo leh nalal biligleynaya, waa inaad:

1. **U gudubto** haad sii fog.
2. **Ama aad xawliga dhinto** oo aad gaarsiiso ugu yaraan 10 mitir saacadiiba xadka xawaaraha la dhejiyay ka hoose. Waligaa ha ku kaxayn wax ka badan 50 mitir saacadii xaalad degdeg ah meel ay ka jirto.

Baabuurta wax ka qabata wixii dhib ah ee dhaca ee ah wadada dhinaceeda waxaa ka mid noqon kara baabuurta jiidista wax jiida gaar ahaan gawaarida hallaabay iwm, kuwa qashinka adkaha ah, ka jawaabista shilka, dayactirka wadada wayn, baabuurta tamarta, kuwa ilaalinta sharciga, baabuurta dab damiska, iyo ambalaasyada.

U samee meel aamin ah shaqaalaha wadada dhinaceeda ah sida ugu dhakhsaha badan. Waad caawin kartaa iyaga inta ay halkaas joogaan ayaga oo caawinaya kuwo kale.

## 4.18 | BAARKINKA

### XEERARKA GUUD EE BAARKINKA

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso in gaarigaaga la dhigay meel uusan khatar ku ahayn dadka kale.

Hubi inaad dhigato gaariga meelaha loo qoondeeyay oo kaliya. Iska hubi calaamadaha mamnuucaya ama xaddidaya gaari in aad meel ku baarkinto. Calaamadaha kaabiga ama qarka jidka ah ee midabka leh waxay muujin karaan xannibaadyada baarkinka. Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad hubiso in gaarigaaga la dhigay meel uusan khatar ku ahayn dadka kale.

**Haku baarkin-gareysan gaariga:**

- Gudaha isgoyska.
- Waddada meesha dadku ka gooyaan, laamiga marshabiyeedigiisa, ama haadka baaskiilka.
- In 30 fiit u jirta calaamad taraafik, calaamadda joogsiga, ama calaamadda muujinaysa inaad ka joogsato oo xaq siiso ha maree marka hore gaariga xaqa kaaga leh wadada.
- Meel u jirta 5 fiit waddo baabuur, luuq, ama waddo gaar loo leeyahay.
- In 75 fiit u jirta jidka xarunta dab demiska ee dhinaca ka soo horjeeda ee wadada.

- In 20 fiit u jirta aagagga badbaadada ee dadka lugeynaya.
- Jidadka tareenada.
- In 50 fiit u jirta meesha jidka iyo khadka tareenka ay iska gooyaan.
- Aagga dhisme ka socdo.
- Baabuur horay meel loo dhigay agtiisa (laba baarkin).
- Garabka ama si kale haddii loo yiraahdo marshabiyeediga wadada weyn (inay xaalad degdeg ahi ku haysato maahee).
- Buundada dusheeda, marin dhanka sare mara, ama tunnel ama marin-hoosaad.
- Kasoo horjeedka gaadiidka soo socda.
- In ka badan 12 inji meel u jirta kaabiga ama qarka wadada.
- Meel kasta oo leh calaamad odhanaysa ma dhigan kartid gaariga.
- In 15 fiit ujirta meel biyaha dadka dab demiska qaabilsan ay ka helaan markii ay dab demin kujiraan.

Calaamadaha ama kaabiyada la riinjiyeeyay waxay tilmaami karaan xannibaado kale oo baarkimida gaariga ka dhan ah.

- Caddaan macnaheedu waa in joogsiyada gaaban oo kaliya la oggol yahay.
- Jaalle ama casaan ayaa tilmaamaya aag wax laga raro ama xaddidaad kale.

**Hanbareeg u jiid**

Had iyo jeer hanbareeg u jiid gaariga markaad baakinto, gaar ahaan buur yar dusheed.

**Hubi gaadiid kale inuusan kugu soo dhaweyn ka hor inta aanad furin albaabkaaga**

- Fiiri muraayadaada dambe iyo muraayad haadka.
- Ku fur albaabka gacantaada kale ee inta ugu badan ka fog albaabka. Tan waxa loo yaqaan habka "Gacan Ku Furida Gaariga Gacanta Ugu Dhaw (Dutch Reach)". Waxay jidhkaaga ku qasabtaa inuu leexdo, taas oo kuu ogolaanaysa inaad aragto baaskiil soo socda. Waxay kaloo ka hortagtaa in albaabka gaariga si degdeg ah loo furo. Tani waxay ilaalin kartaa baaskiil-wadeyaasha waxayna ka ilaalin kartaa albaabkaaga inuu waxyeello u geysto baabuur soo socda.

**Waligaa ha uga tagin carruurta ama xayawaanada iyada oo aan lala jirin baabuur baarkin-gareysan.**

**Hubi in dadka waaweyn, carruurta, iyo xoolaha ama xayawaanka ay si habboon uga baxaan baabuurka**

- Waa dembi in looga tago ilmo ka yar 16 jir iyada oo aan lala jirin gaadhi meel la dhigay inta uu matoorku daaran yahay.
- Waa dembi in looga tago ilmo ka yar 12 jir iyada oo aan lala jirin gaadhi meel la dhigay.
- Waa dembi in neef ama xayawaan looga tago iyada oo aan lala jirin baabuur haddii neefka uu waxyeeleyn karo ama xayawaanka ama uu dili karo kuleyl badan, qabow, hawo la'aan, ama la'aanta biyo lagama maarmaan ah.
- Haddii qofna aagga u dhow uusan geli karin gaariga, sharci fulinta waxaa loo oggol yahay inay isla markiiba ka saaraan carruurta ama xoolaha/xayawaanka si kasta oo macquul ah si loo badbaadiyo caafimaadkooda iyo badbaadadooda. Sarkaalka, ama hay'adda shaqaalaysatay sarkaal, kama masuula ahan waxyeelada gaadhiga haddii ay u baahan yihiin inay ka saaraan carruurta ama xoolaha sababo sharci ama badbaado dartood.

**Qaado furahaaga oo xidh albaabkaaga**
Xiridda albaabkaaga waxay ka hortagtaa xatooyada waxayna ka ilaalinaysaa gaarigaaga kuwa aan la rabin inay soo daakhilaan.



## BARKIN TOOSAN IYO MID XAGLO LEH

**Gelida goob baarkin ah oo toosan ama xagal leh**

1. Arkoo booska aad rabto inaad dhigto gaariga, oo iska eeg gaadiidka kale.
2. Fareejo daar si aad u muujiso inaad doonayso inaad leexato.
3. Si tartiib ah horay ugu soco, adigoo u leexinaya isteerinka bidix ama midig sida ku habboon, ilaa uu gaadhigu ka gaadhayo badhtamaha booska.
4. Dhex dhig baabuurka inta u dhaxaysa khadadka la riinjiyeeyay.
5. U dhaqaaq dhanka hore ee goobta baarkinka, istaag, oo sug ama sugidtaan ku samee gaariga.

**Ka baxida barkin toosan ama mid xaglo leh**

1. Iska eeg gaadiidka dhammaan jihooyinka oo idil.
2. Sii wad iska ilaalinta gaadiidka kale oo si toos ah dib ugu dhaqaaq ilaa uu bambarkaagu ka dhammaado gaadhiga ku ag yaal.
3. Si fiican ugu leexi isteerinka jihada aad rabto in baabuurkaagu u dhaqaaqo.
4. Kasoo bax meesha baabuurta la dhigto oo istaag. Horey u soco, adigoo si habsami leh u sheelareynaya oo isteerinka leexinaya markii loo baahdo si loo toosiyo taayirrada.



## BAARKIN BARBAR AH

**Gelida meel baarkin ah oo barbar ah**

1. Aqoonso ama arkoo meesha aad dhigan doonto gaariga, iska eeg gaadiidka kale, oo fareejee
2. U wad gadaal gaariga oo fiiri jihada uu baabuurku u socon doono.
3. Si tartiib ah ugu laabo gadaal ilaa bambarka hore uu la siman yahay bambarka dambe ee baabuurka aad gadaashiisa dhiganayso gaariga.
4. Si fiican ugu leexi isteerinkaaga oo si tartiib ah ugu soo laabo booska.
5. Si degdeg ah u leexi isteerinka si aad u dhex dhigto baabuurka meesha.
6. Joogso ka hor intaadan taaban bambarka baabuurka ka dambeeya.
7. Hore u soco si aad gaarigaaga ugu hagaajiso goobta baarkinka. Hubi in gaadhigaagu aanu 12 inji wax ka badan u jirin  qarka ama geeska baakinka.

**Ka bixida meel baarkin ah oo barbar ah**

1. Iska eeg gaadiidka jihooyinka oo dhan, cagtaada saar biriiga, inyaataro gali si aad dib u laabato, oo gadaal u soco inta suurtogalka ah ee dhinaca baabuurka kaa dambeeya.

2. Iska eeg gaadiidka kale oo fareejee.
3. Si tartiib ah horay ugu soco, adoo haadka ku leexin.
4. Hubi in baambarka hore ee baabuurkaagu uu kadhammaado baabuurka hore; haddii kale, dib u wad gaariga oo hagaaji isteerinka.
5. Horey ugu soco haadka ugu dhow ee gawaarida marka albaabkaaga hore uu ka dhammaado bambarka dambe ee baabuurka hortaada yaalla




## KU BAARKIN-GAREYSASHADA BUUR GAARIGAAGA

**Had iyo jeer ujiid haambareegga marka aad meel sare dhiganeyso gaariga** Waxaad u baahan tahay inaad hubiso in gaarigaagu uusan ku soo dhacayn wadada. U-soo-jeedinta taayirradaada dhinaca qarka waddada waxay ku siinaysaa ammaan dheeraad ah haddii uu hanbareeggaagu shaqeyn waayo.

**U jeedsashada buurta yar dhankeeda**
Buuraha leh qararka dhaadheer dushooda, ka leexi isteerinkaaga qarka oo ka fogoow macnaha ilaa dhabarka taayirkaaga hore uu taabto qarka. Haddii uu gaadhigu bilaabo inuu dib usoo laabto, gadaal ayuu usoo laaban doonaa ilaa qarka. Buuraha leh qararka hoose ama wareegsan, u jeedinta isteerinkaaga dhinaca qarka waxaa laga yaabaa inay badbaado badan tahay sababtoo ah gaarigaaga ayaa ka sii durki kara wadada haddii bareeggaaga baarkinku uu shaqeyn waayo.

**U jeedsashada buurta yar hoosteeda**
Isteerinkaaga u leexi dhanka qarka ilaa dhanka hore ee taayirkaaga hore uu taabto qarka. Haddi uu gaarigaagu bilaabo inuu taraaraxo, wuxuu horay ugu taraarixi doonaa qarka.

**Haddii qar ama kaabi uusan jirin**
U leexi isteerinkaaga iyo taayiradaada dhanka wadada geeskeeda ah. Sidan, haddii baabuurku bilaabo inuu taraaraxo, wuu ka dhaqaaqi doonaa dhanka gaadiidka kale.

## BAARKINKA DADKA NAAFADA AH LOOGU TALA GALAY




Meelaha baarkinka ah qaarkood waxaa loogu talagalay baabuurta leh taarikada baarkinka ee naafada ah ama calaamada baarkinka naafada. Xariijimaha cad ee ku xiga meel bannaan oo la asteeyay, oo loo yaqaan marin galitaan, waa in si cad loo ilaaliyaa. Waxaa lagugu ganaaxi karaa inaad dhigato gaari meelo adiga oo aan soo bandhigin boorarka loo baahan yahay iyo/ama xannibidda marinka gelitaanka.

Haddii aad tahay naafo xaddidaysa ama wiiqaysa awooddaada socodka, waxaad codsan kartaa mudnaanta baarkinka naafada ku meel gaadhka ah ama joogtada ah.

Ha ka soo laad laadin boorka baarkinka muraayadaada gadaal lagu eego marka aad baabuur wadid sababtoo ah waxay hor istaagi doontaa aragtidaada.

Si aad u codsataan, adiga iyo dhakhtarkaagu waa inaad buuxisaan foomka Codsiga Baarkinka Naafada ee Shakhsiyaadka **(Disabled Parking Application for Individuals)** oo laga heli karo dol.wa.gov.

# BAARKINKA GOOBTA GAARIGA KORONTADA KU SHAQEEYA LAGU JAAJGAREEYO




Waa sharci-darro in baabuur la dhigto xarun kasta oo baabuur koronto ah lagu jaajgareeyo haddii gaadhigu aanu ku xidhnayn qalabka jaajgareynta.

## 4.19 | GAADIID WAX KU SAFRIN

### JIIDID

Haddii aad jiidayso wax, sida doon, tareelar, ama isjiid guri ahaan ah oo lugo leh oo meel markii la aadayo la jiito si loogu hoydo, waxaad mas'uul ka tahay inaad raacdo dhammaan heshiisyada soo saarayaasha, sharciyada gobolka, iyo heerarka federaalka. Waxaad u baahan tahay inaad ogaato oo aad raacdo dhammaan tilmaamaha ku saabsan:

- Xadka miisaanka inta aan laga sara marin karin.
- Xayiraadaha baabuurta.
- Kaawooyinka wax lagu jiido iyo laydhka gadaal ee isjiidka meesha looga xiriirsho.
- Fariinnada caadiga ah ee gaariga.
- Shatiga iyo dukumentiyada.

## HUBI OO SUG CULAYSKA XAMUULKAAGA

Wadida gaari sida rar aan la hubin waa ka soo horjeedaa sharciga waana khatar aad u weyn. Hubi oo sug xamuulka aad ku sido gaariga si aanay alaabta dabacsan ama sida dabacsan u xirxiran hawada u galin inta haadaan ama aysan u taraarixin, u dhaqdhaqaaqin, ama aanay ugu dhicin wadada oo aanay u sababin shil.

Si aad u ilaaliso ama u sugto xamuulka saaran gaadhigaaga ama tareelarkaada:

- Wax walba ku xidh xadhig, shabag, ama xadhigo ballaaran oo warsheele ah.
- Walxaha waaweyn si toos ah ugu xidh baabuurkaaga ama tareelarka.
- Ku rar gaadhigaaga ama tareelarka kaliya alaabta aad si badbaado leh oo ammaan ah u qaadi karto.

## XAYAWAANADA

- Waa sharci-darro in qofi uu ku qaado neef baabuur neefkii oo u eg wax yaala dibadda gaariga (sida qeybta dambe ee xamuulka in la saaro) iyada oo aan la haysan suunka difaaca ama meel lagu xidho neefka, si aanu xayawaanku u boodin ama u dhicin.
- Waa fal-dambiyeed in loo qaado xoolaha ama xayawaanka qaab khatar u keeni kara xayawaanka ama badbaadada dadwaynaha, marka loo eego Sharciyada Washington ee ka Hortagga Naxariis-darrada ka Dhanka ah Xayawaannada (Prevention of Cruelty to Animals laws) Haddii lagu hayo ama lagu qabto sabab kasta oo jirta darteed, sarkaalku wuxuu qaadi karaa mas'uuliyadda xayawaan kasta oo gaariga saaran. Haddii neefkaaga ama xayawaankaaga boolisku qabto, waxaad u baahan doontaa inaad bixiso lacag ganaax ah ka hor inta aanad qaadin xayawaanka oo aan laguu ogolaan.
- Waa sharci-darro inaad samayso hawl dareenkaaga ka jeedinaysa si badbaado leh u kaxaynta gaadhigaaga. Xayawaanka saaran gaadhiga ayagoo aanan xirneyn ama si fiican loo sugin amnigooda ama dhabta u saaran darawalka ayaa khalkhal keeni kara.

## DOOMAHA WAAWEYN

Doomaha Waaweyn ee Gobolka Washington (Washington State Ferries), oo mararka qaarkood loo yaqaan nidaamka waddo ee badda ee gobolka, waa qayb ka mid ah shabakadda waddooyinka waaweyn ee Washington. Maadaama ay yihiin qayb ka mid ah shabakadaas, dhammaan sharciyada waddada ayaa khuseeya.

Markaad u soo dhawaato terminalka doonta, waxaa laga yaabaa inaad aragto calaamado kugu hagaya haad loo qoondeeyay. Gadaal ka istaag baabuurta kale ee safka horay ugu jiray. Inaad safka doomaha horay ka gasho adigoon xaq u lahayn sidaas waa dembi taraafik taasoo keeni karta ganaax. Haddii aad ku jirto haadka doonta ee aag la deggan yahay, fadlan ha xidhin waddooyinka baabuurtu maraan ee meeshaa la daggan yahay ama isgoysyada.

Baaskiil-wadayaashu waxay helayaan rarid mudnaan leh, oo macnaha ayagaa la hor saarayaa doonta ama hor fuulaya doonta inta badan doomaha waxayna leeyihiin meel wax lagu sugo baaskiiladu taasi oo ah dhanka ka horreeya baabuurta. Baaskiilleydu waxay dhaafi karaan baabuurta wax ku sugaya haadka wax lagu sugo ka hor intaan doonta la fuulin. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka Doomaha Gobolka Washington, ama qiimaha nooliyada iyo jadwallada si aad u ogaato, fadlan booqo wsdot.wa.gov oo raadi **ferries (doomaha waaweyn)**.

## XEEBAHA

Gaari ku wadista ayaa loo ogol yahay xeebaha badweynta kaliya degmooyinka Grays Harbor iyo Pacific. Xeebta waxaa loo tixgeliyaa waddo weyn oo gobolka ah sideeda oo kale, sidaa darteedna dhammaan sharciyada darawalnimada ayaa khuseeya. Xadka xawaaruhu waa 25 mitir saacadii, dadka lugaynaya iyo baaskiil wadayaasha ayaa xaq u leh dariiqa oo ay tahay inay helaan mudnaan ay meesha marka hore ku maraan mar walba.

Waxaad ka soo gali kartaa xeebta adigoo wada gaadhigaaga oo keliya wadooyin xeebeed calaamadsan waxaadna ku wadi kartaa oo keliya ciid adag dusheeda. U fiirso calaamadaha mamnuucaya gaari ku wadista xeebta meelaha qaarkood iyo xaaladaha qaarkood.

# CUTUBKA 5-AAD
# KHATARTA



# 5.0 | KHATARTA WADISTA GAADIIDKA

Waad ogtahay in wadista gaadiidku leedahay khataro halis ah iyo cawaaqib xumo. Adigana khaladaad ayaad samayn doontaa, dadka kugu xeeranna iyaguna way samayn doonaan khaladaad. In kasta oo khatartu had iyo jeer jirto, haddana wadista si ammaan ah waxay yareyn kartaa suuragalnimada shilalka.

La tacaalidda khatarta waxay u baahan tahay inaad ahaato qof feejigan, la saadaalin karo, si deggan u dhaqaaqa, kuna xirfadaysan wadista. Si aad si wanaagsan oo shil la'aan ah u waddo, waa inaad si ula kac ah u tababartaa kuna dhaqantaa caadooyin wadis oo ammaan ah si ay u noqdaan habkaaga wadis ee joogtada ah.

**Sababaha ugu waaweyn ee keena shilalka dhimashada leh**

- Xawaare
- Awood-yaraan
- Mashquulid
- Dadka aan xirnayn suunka badbaadada
- Khibrad la'aan*

*Gobolka Washington, shilalka gaadiidku waa sababta ugu badan ee dhimashada dadka da'doodu u dhaxayso 16 ilaa 25 sano. Kooxdan jirta da'dan waxay aad ugu nugul yihiin shilalka keena dhaawacyo halis ah ama dhimasho.

## WACYIGELINTA KHATARTA

Wacyigelinta khatartu waa awooddaada aad ku aqoonsan karto khataraha hadda jira iyo kuwa iman kara ee wadada. Waxay kaa caawisaa inaad ogaato waxyaabaha kaa baahan in aad beddesho habdhaqankaaga si aad uga fogaato shil. Wacyigelinta khatartu waxay ku jirtaa in aad tixgeliso dadka kale ee wadada isticmaalaya, xaaladaha cimilada, iyo mashquuliyeyaasha suuragalka ah.

Wacyigelinta khatartu waxay ku xirantahay fahamka waxa kugu xeeran iyo waxa dhici kara daqiiqadaha xiga.

- Had iyo jeer madaxaaga u rogo si aad u eegto hareerahaaga. La soco waxa ka dhacaya hortaa, hareerahaaga, iyo gadaashaada. Tan waxaad ku samayn kartaa adigoo adeegsanaya araggaaga ballaadhan iyo muraayadaha gaariga.

- Uga tag meel in filan bannaan horta gaarigaaga si aad u aragto waxa ka socda wadada hortaada ah.
- Iska eeg gadaashaada marka aad aragto khatar kaaga baahan inaad wax beddesho. Waxa gadaashaada ka dhacaya ayaa saameyn kara go'aamada aad qaadanayso

Ma'aha suurtogal inaad gebi ahaanba meesha ka saarto khatarta. Si kastaba ha ahaatee, waxaad baran kartaa sida looga fogaado ama loo yareeyo khataraha adigoo aqoonsanaya kadibna habkaada wadista u hagaajinaya si habboon.

## AQOONSIGA KHATARTA

Aqoonsiga khatartu waa awooddaada aad ku aragto khataraha iman kara ee wadada ka hor inta aysan dhibaato noqon. Xirfaddani aad bay muhiim ugu tahay wadista ammaan ah waxayna kaa caawisaa ka hortagga shilalka. Aqoonsiga khatartu wuxuu u baahan yahay:

- Feejignaan.
- Go'aan degdeg ah oo sax ah.
- Kartida inaad si sax ah uga jawaabto xaaladaha isbeddelaya.

**Khatar waa wax kasta oo kaa baahan inaad wax beddesho. Markaad gaariga waddo, waa inaad had iyo jeer eegtaa khataraha oo aad uga jawaabtaa.**

Khatar ayaa kaa dalban karta inaad beddesho xawaaraha ama jihada.

- Khatar waxay noqon kartaa halis degdeg ah sida ilmo wadada ku ordaya, ama mid sahlan sida qashin lagu arkay wadada, calaamadda xawaaraha oo soo dhow, ama meel laga leexanayo gurigaaga.
- Khatartu waxay noqon kartaa mid taagan ama mid dhaqaaqaysa.
- Hal mar waxaa jiri kara in ka badan hal khatar. Waa mas'uuliyaddaada ka ahaan wadaha inaad go'aamisaa khatarta u baahan jawaabta ugu degdegga badan.

U wado si tartiib ah marka aad u dhowdahay khatar si aad u haysato meel iyo waqti aad ku qaadato go'aanno ammaan ah.

## WACYIGELINTA XAALADDA

Wacyigelinta xaaladdu waa inaad fiiriso waxa kugu xeeran oo dhan oo aad saadaaliso waxa xiga ee lagaa rabo inaad diyaariso. Tani waa inaad si joogto ah u samaysaa.

Waa inaad ogaataa cidda ay saameyn karto ficilkaaga iyo cidda u baahan inay ogaato waxa aad damacsan tahay. Wadayaasha gadaashaada ayaa noqon kara kuwa ugu badan ee saameeya go'aamadaada.

## MAAREYNTA KHATARAHA

Wadada waxaad kula kulmi doontaa xaalado aan xad lahayn. Way adkaan lahayd in la saadaaliyo ama qorshe loo sameeyo mid kasta. Halkii taas laga sameyn lahaa, waa inaad samaysataa hab joogto ah oo lagu wajaho halista oo kaa rabta inaad:

- **Qorsheeyso.** Eeg deegaankaaga si aad u ogaato waxa kugu hareeraysan. Hubi inaad sidoo kale eegto muraayadda dambe si aad u aragto waxa ka dhacaya gadaashaada. Go'aansato haddii isbeddelka aad rabto inaad samayso uu ammaan yahay.
- **Ka hadasho.** U sheeg dadka kale waxa aad damacsan tahay. Isticmaal calaamadahaaga oo hubi in qof walba uu si fiican u fahmay waxa aad damacsan tahay.
- **Hubiso.** Diyaari booska iyo xawaaraha gaarigaaga si aad u haysato meel ku filan oo aad isbeddelka u samayso adigoon si xooggan u bareegin. Mar kale hubi muraayadaha oo dhinac u fiiri si aad u aragto dadka lugaynaya iyo kuwa baaskiil wadayaasha ah. Hubi in wadayaal kale aysan isku dayayn inay galaan booskaas.
- **Fuliso.** Samee isbeddelka si tartiib ah oo siman. Iska ilaali inaad cid la yaabiso. U diyaargarow inaad beddesho qorshahaaga haddii loo baahdo.
- **Qiimeeyso.** Ka fiirso sida ay wax u dhaceen. Eeg haddii aad u baahan tahay inaad hagaajiso habkaaga marka xigta.

## 5.1 | XAWAARAHA

Xitaa haddii aad degdegayso, halista xawaaraha sare ma aha mid mudan. Xawaaraha xad dhaafka ah wuxuu halis gelinayaa qof walba oo waddada jooga. Raac xadka xawaaraha ee la dhajiyay si aad u ilaaliso naftaada, dadka ku jecel, iyo dadka kale ee wadada kula wadaagaya.

Raacitaanka xadka xawaaraha la dhajiyay ma aha oo keliya ilaalinta sharciga. Xitaa haddii aad degdegayso, halista xawaaraha sare ma aha mid mudan. Xawaaraha xad dhaafka ah wuxuu halis gelinayaa qof walba oo waddada jooga. Mudnaanta sii badbaadada oo wad xawaare kuu saamaxaya inaad xakameyso gaariga isla markaana uga jawaabto khataraha.

## XAWAARE AAD U SARREEYA

Wadista xad-dhaaf ah waxay dhaawici kartaa gaarigaaga, dadka kale, iyo adiga. Xawaareynta aadka u sarreeysa waxay sababi kartaa:

- **Yareeynta waxtarka suunka badbaadada.** Suunka badbaadada waxaa loo sameeyay inuu ku ilaaliyo marka shil dhaco, balse waxtarkiisu wuu yaraadaa marka xawaaruhu bato.
- **Xaddidida awooddaada aad ku arkayso khataraha.** Markaad si degdeg ah u waddo, waqti yar ayaad u haysataa inaad eegto wadada hortiisa si aad uga digtoonaato halisaha sida dadka lugeynaya, baaskiil wadayaasha, ama gaadiidka kale.
- **Yareeynta xakameynta iyo qabashada gaariga.** Xawaare sare wuxuu ka dhigaa mid adag in la xakameeyo gaariga, gaar ahaan marka roob ama baraf jiro. Tani waxay keeni kartaa siibasho ama in si buuxda laga waayo xakameynta.
- **Waxay kordhiyaan masaafada joojinta.** Waqti dheer ayaa loo baahan yahay in la joojiyo gaariga marka xawaaruhu sareeyo. Tani waxay kordhisaa khatarta shil haddii aad u baahan tahay inaad si lama filaan ah u bareegto.
- **Waxay kaa tagtaa waqti yar oo aad ku qiimeyso wadadaada safarka iyo inaad samayso isbeddello lagama maarmaan ah.** Xawaaraha badan wuxuu kaa dhigayaa in waqti yar kuu hadho si aad uga jawaabto isbeddellada wadada sida qalloocyada, isgoysyada, ama caqabadaha.

- **Waxay kordhisaa darnaanta dhaawacyada marka shil dhaco.** Xoogga saameynta shilka wuu kordhaa marka xawaaruhu sareeyo, taasoo keenta dhaawacyo halis ah ama dhimasho.

## XADKA XAWAARAHA

Xadka xawaaraha wuxuu muujinayaa xawaaraha ugu badan ee sharci ah marka xaaladdu tahay mid wanaagsan. Sharciga Washington wuxuu sidoo kale kugu waajibinayaa inaad waddo xawaare ammaan ah marka la eego xaaladda waddooyinka ee hadda jirta. Taas micnaheedu waa inaad hoos u dhigto xawaaraha marka xaaladdu ay liidato. Waad ka waddi kartaa xadka xawaaraha hoose, balse ka sarreeyntiisu waa sharci-darro.

**Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad mar walba gaariga ku waddo xawaare ammaan ah, iyadoon loo eegin xadka la dhajiyay.**

## HAGAAJINTA XAWAARAHA MARKA LOO EEGO XAALADAHA

Xawaare sare waa khatar halis ah oo aan loo baahnayn. Inaad timaado goor danbe ayaa ka fiican in aadan imanba. Hoos u dhig xawaarahaaga xaaladaha soo socda:

- Qalloocyada ama buuraha ay aragtidu xaddidan tahay
- Wadooyin simbiriirix ah oo sabab u ah roob, baraf, ama dhaxan
- Goobaha ay ku badan yihiin dadka lugeynaya, carruurta, baaskiil wadayaasha, ama xayawaanka
- Goobaha dukaamada, meelaha baabuurta la dhigto, iyo meelaha dadka badani lugeeyaan
- Taraafik cufan oo badan
- Buundooyin iyo godad ciriiri ah
- Xaafado lagu noolyahay

## 5.2 | MEESHA BANAAN

Qiimeynta meesha banaan markaad gaari wadayso waa xirfad qiimo leh. Waxay qaadan kartaa waqti iyo tababar ka hor intaadan xirfad u yeelan, waana sababta wadayaasha cusub ay khatar badan ugu jiraan. Waxaad ku qiyaasi kartaa masaafada meel ama waqti, balse waa inaad si joogto ah u qiimeysaa booskaaga wadada. Isku day inaad meel bannaan oo ku filan ka tagto adiga kugu wareegsan inta aad waddo.

Adigoo ka tagaya meel ku filan oo bannaan gaarigaaga ku wareegsan, waxaad yareyn kartaa khatarta oo waxaad helaysaa waqti aad ku doorato waddo kale haddii loo baahdo. Tani waxay ku siin doontaa meel dheeraad ah oo aad ku falceliso haddii dhibaato ka timaado jidka aad marayso.

Marka aad waddo meel ay gaadiid kale jiraan, waa muhiim inaad u dhaafto masaafad ugu yaraan laba jeer dhererka gaarigaaga u dhaxaysa adiga iyo gaariga hore. Marka aad isku darto, iska sii meel kugu filan si aad si nabad ah ugu dabaqdo habkaaga maaraynta khataraha oo ay ku jiraan **qorsheynta**, **ka hadlida**, **hubinta**, **fulinta**, iyo **qiimeynta**.



# 5.3 | ISKU-DARID

Marka aad isku darayso taraafikada, geli adigoo haysan meel kugu filan si aadan dadka kale ku dhow ugu qasbin inay leexdaan, gaabiyaan, ama istaagaan. Ku isku dayidda inaad gasho meel ciriiri ah waa khatar, gaar ahaan haddii wadaha hore u baahan yahay inuu istaago ama gaabiyo.



Wadayaasha horey ugu jira wadada weyn waxay leeyihiin xaqa wadada, sidaas darteed abuurista meel lagu galo waxay kaa doonaysaa inaad hagaajiso xawaarahaaga, mid dheereeya ama gaabiya. Adeegso gebi ahaanba ramp-ka gelitaanka, calaamadda leexashada, iyo muraayadaha si aad ugu gasho meel ammaan ah wadada weyn.

## ISKU-GALIDDA QAABKA SIINYEERKA XIRMAYA

Marka taraafikadu si tartiib ah u socoto ama istaagto sababo la xiriira xiritaanka laan, waa muhiim inaad si habsami leh oo hufan u gasho. Isku-galidda qaabka siinyeerka xirmaya waa farsamo:

- Oo hagaajisa socodka taraafikada ilaa 60 boqolkiiba.
- Waxay abuurtaa qaab isku-gelid oo la saadaalin karo, taasoo yaraysa halista shilalka ka dhasha leexasho lama filaan ah.
- Waxay kaa caawisaa inaad ka fogaato niyad-jab ka yimaada safaf dhaadheer iyo rabitaanka in safka la jaro.

**Sida la isugu-galo qaabka siinyeerka xirmaya:**

- **Ku sii wad haadkaaga.** Sii wad isticmaalka labada laamood ilaa aad gaadho goobta lagu heshiiyey ee isku-gelidda.

- **Ku gasho saf ku saleysan is-dhaafsi.** U kala beddelso galitaanka adigoo la mid ah ilkaha siinyeerka oo isu imaanaya.
- **Noqo mid edeb leh.** U oggolow hal gaari oo ka imaanaya haadka dhammaanaysa inuu kaa hor galo, kadibna adigu gel haadka bannaan.
- **Ilaali xawaaraha.** Sii wad gelitaanka adigoo ilaalinaya xawaare deggan oo la mid ah taraafikada laanta bannaan.

## 5.4 | WAQTI

Si aad khatarta u yarayso, sii waqti kugu filan inaad qiimeyso oo aad si ammaan ah ugu dhex wareegto taraafikada. Waxaad isticmaali kartaa farsamo sida, taasoo kuu oggolaanaysa inaad indhaha ku sii eegto wadada hore si aad u ogaato khataraha iman kara. Waqtiga hogaaminta indhaha waa qayb muhiim ah oo ka mid ah wadista difaaca. Waxay ku siisaa waqti aad ku aragto, ku falanqayso, oo aad uga jawaabto khataraha. iska sii indha-indhee ilaa inta ugu fog ee hore kaa horeysa iyo dhinacyada. Adeegso muraayadaha si aad u eegto gadaal. Haddii aad hore u ogaato khatar, waxaad haysataa waqti badan oo aad isku diyaariso, sidoo kale dadka kale waxay haystaan waqti ay ula qabsadaan isbeddelladaada. Tani waa hab wadis oo ka hor taga dhibaatooyinka. Waa mid khatar yar marka loo eego inaad sugto inaad ka falceliso khatar.

### XISAABI ILBIRIQSIYADA

Ku tababar qiyaasidda masaafada uu gaarigaagu mari doono waqti gaaban adigoo adeegsanaya layligan fudud:

1. Dooro calaamad, sida calaamadda jidka ama tiir koronto, oo aad u malaynayso inuu 15 ilbiriqsi kaa horeeyo.
2. Tirso ilaa aad ka gaadho calaamaddeeyaha.

Ka qiyaasitaanka kahor tirinta waxay kaa caawisaa inaad barato sida saxda ah ee loo qiyaaso masaafada uu gaarigaagu mari karo ilbiriqsiyo gudahood. Saxnaantaada way sii fiicnaan doontaa markaad sii wadato tababarka habkan.

Aad bay muhiim u tahay inaad naftaada siiso waqti aad ku istaagto ama uga wareegto caqabadaha iyo xaaladaha lama filaanka ah ee taraafikada. Marka aad haysato waqti kugu filan, waad qiimeyn kartaa oo mudnaanta siin kartaa go’aannadaada taraafikada. Tani waxay kaa caawin kartaa yaraynta argagaxa iyo falcelinta degdegga ah ee aan qorshaysanayn.

# LEEXASHADA HORTA GAADIID KUGU SOO SOCDAAN

Waad khibrad yeelan doontaa markaad waqti wadid, balse way adag tahay inaad qiimeyso inta waqti ee aad leedahay si aad u leexato marka taraafikada soo socota jirto. Way ka fiican tahay inaad siiso waqti badan naftaada halkii aad ka siin lahayd wakhti yar.




Xusuusnow taraafikada soo socota waxay leedahay xaqa wadada. Waxaad daawan kartaa gaadiidka soo socda iyagoo dhaafaya calaamad dhinaca wadada ah, sida geed, kadib tirso inta ilbiriqsi ee ay qaadato inta ay ka gudbayaan wadada aad rabto inaad leexato.

Waqtigaas waxaad ku qiyaasi kartaa inta uu qaadan doono gaariga xiga inuu maro isla masaafadaas. Markaas ayaad ogaan doontaa goorta aad haysato waqti kugu filan oo aad si nabad ah u leexato.




Leexashada lagu galayo taraafikada socota waxay u baahan tahay hab la mid ah. Waxaad u baahan tahay waqti aad ku dhammayso leexashada adigoon carqaladayn socodka taraafikada aad ku biirayso. Waxaad u baahan tahay waqti kugu filan si aad u leexato oo u gaarto xawaaraha taraafikada socota.

## 5.5 | DIIRAD SAARIDDA

Daryeelka maskaxda iyo feejignaanta waxay kaa caawin doonaan inaad mudnaanta siiso badbaadada iyo wacyiga wadada.

- **Maskaxdaada ha joogto wadada.** Go'aanso inaad si buuxda ugu hawlan tahay wadista adigoo aan mashquul ahayn. Demi qalabka kaa mashquulin kara sida taleefankaaga iyo qalabka madadaalada ee gaariga.
- **Is diyaari.** Ogaaw khataraha adigoo si joogto ah u eegaya wadada hore. Ka warhay deegaankaaga oo dhan markaad waddo.
- **Noqo qof ka hor taga dhibaatooyinka.** U hagaaji xawaarahaaga iyo qaabka wadista xaaladaha wadada, cimilada, iyo taraafikada.

### FEJIGNAANTA

Fejignaantaada buuxda waa muhiim si aad u waddo si ammaan ah. Maskaxdaadu waxay hal mar diiradda saari kartaa hal arrin oo keliya. Go'aanso inaad si firfircoon diiradda u saarto markaad kuraasta wadaha fadhido. Is waafaji feejignaanta maskaxdaada iyo diiradda araggaaga. Feejignaantaadu waa hantida ugu qiimaha badan markaad wadayso.

Ka saar waxyaabaha gudaha iyo dibedda kaa mashquulin kara. Mashquul kasta, xitaa dhowr ilbiriqsi oo keliya, wuxuu keeni karaa natiijooyin halis ah. Adigoo feejigan oo ka fog mashquul kasta, waxaad si weyn u yarayn kartaa khatarta shil.

## AAGGA ARAGGA

Marka aad waddo waxaad adeegsan doontaa saddex nooc oo arag ah. Xawaare sare wuxuu yareeyaa tayada mid kasta oo ka mid ah noocyada aragga.

1. **Aragga dhexe** wuxuu kuu oggolaanayaa inaad si faahfaahsan u aragto wixii si toos ah kuu hor yaalla. Waa aragga aad hadda ku akhrinayso erayadan.
2. **Aragga dhinacyada** waa kan aad ku arkayso geesaha boggan tilmaamaha wadaha. Waad arki kartaa, laakiin si buuxda uma aha mid diiradda saaraya.
3. **Aragga dhinac** waa waxa aad ku arki karto dhinacyada adigoon lumin diiradda erayada hortooda. Waxay noqon kartaa darbiyada qolka aad joogto ama qof agtaada socda.



## JIDKA AAD MARAYSO

Jidka aad marayso waa wadada ama jihada aad u waddo si aad uga tagto hal meel una tagto meel kale.

Mararka qaar waxaad u baahan doontaa inaad beddesho jidka aad marayso. Waxaad u baahan kartaa inaad hagaajiso sabab la xiriirta khatar, cimilada, ama sababtoo ah waxaad rabtaa inaad u leexato jihada cusub. Waa inaad maskaxda ku sawirtaa goobta bartilmaameedka cusub ee aad u socoto iyo jidka aad rabto inaad raacdo.

Qayb weyn oo wadista ah waa inaad si joogto ah u beddesho diiraddaada arag iyo maskaxdaada inta u dhaxaysa meesha aad joogto iyo meesha aad rabto inaad gaarto.




## XARIIQDA ARAGGA

Marka aad doorato meesha aad rabto inaad tagto, xariiqda aragga waa waxa u dhexeeya adiga iyo bartilmaameedkaas. Waxaad si degdeg ah oo soo noqnoqota u beddeli doontaa diiraddaada aragga iyo maskaxda inta u dhaxaysa jidka aad marayso iyo xariiqda aragga. Ogow inaad u baahan doonto inaad kala qaybiso diiraddaada aragga iyo feejignaanta maskaxda u dhaxaysa:

- Jidkaaga aad marayso
- Xariiqda araggaaga
- Aag bartilmaameedkaaga aad qorsheysatay
- Khataraha hadda jira iyo kuwa iman kara
- Gaadhigaaga (gudihiisa iyo dibaddiisa)
- Isticmaalayaasha kale ee wadada
- Naftaada

### URURINTA MACLUUMAADKA

Diiradda ula kac ah iyo feejignaan firfircoon ayaa kaa caawinaya inaad ururiso xogta aad ugu baahan tahay go'aanno xikmad leh markaad wado. Iska eegida wadada aad ku socoto iyo jihada aragtidaada waa hawl joogto ah oo mararka qaarkood culays dareen leh yeelan karta, gaar ahaan marka aad baranayso wadista. Isu diyaari guul adigoo samaynaya caadooyin iyo nidaamyo ku salaysan feejignaan joogto ah iyo mashquulid yar.

## 5.6 | XAALADAHA WADADA IYO WADISTA

Qayb ka mid ah wadista waxay ka dhigan tahay raacista xeerarka xawaaraha iyo la qabsiga xaaladaha wadada. Tusaale ahaan, waxaad yareynaysaa xawaaraha ka hor leexasho adag, marka wadadu qoyan tahay, ama marka ay biyo yaallaan si aad u ilaaliso xakamaynta gaadhigaaga. Wacyigelinta khataraha, go'aan qaadashada, iyo doorashooyinka xikmadda leh waxay saamayn weyn ku yeeshaan badbaadada safarkaaga xaalado kala duwan.

### WADISTA HABEENKII

Habeenkii way adagtahay in wax si cad loo arko, waana inaad:
- Ku waddaa xawaare kuu oggolaanaya inaad istaagto gudaha iftiinka hore ee gaadhigaaga (caadiyan 400 fiit).
- Isticmaal iftiinka sare marka aysan jirin wax gaadiid ah oo kugu soo socda. Ku noqo iftiinka caadiga ah marka ay jiraan gaadiid kale oo ku soo abaarayaan.

- Isticmaal iftiinka caadiga ah marka aad raacayso gaadhi kale.
- Ka fogow inaad si toos ah u eegto iftiinka gaadiidka ku soo abaarayaan. Indhahaaga ku sii hay raadinta wadada ah horta gaarigaaga.
- Isku day inaad eegto meel ka fog meesha uu nalka gaarigaaga iftiiminayo. Raadi qaabab madow ama hoos ka muuqda wadada.
- Mararka qaarkood eeg dhinacyada si aad u ogaato geeska wadada iyo khataraha kasoo iman kara dhinacyada.
- Ha xirran muraayadaha qorraxda ama kuwa midabka leh markaad waddo habeenkii ama maalinta daruurtu jirto. Muraayadaha midabka leh waxay yareeyaan aragtidaada.
- Kordhi masaafada aad raacayso markaad waddo habeenkii ama wadada aanad aqoon.

**Haddii gaadhi kuu soo socdo oo leh iftiin sare, eeg dhinaca midig ee wadada si aan iftiinku kuu mashquulin.**

## GOOLADAHA




Wadista meelaha gooladaha ah waxay u baahan tahay feejignaan iyo xakameyn buuxda oo gaadhigaaga ah. Isteerinka deggan iyo caadooyinka wadista xikmadda leh waxay ku siinayaan xakameyn iyo dheelitirnaan. Xeerarka dhaqdhaqaaqa oo aanad adigu xakamayn karin ayaa sidoo kale saameeya booska iyo dheelitirka wadista.

### Marka aad u dhowdahay goob goolad ah

- **Fiiri xawaarahaaga.** Yaree xawaaraha inta aadan galin goolada. Tani waxay kaa caawisaa ilaalinta qabsashada wadada waxayna ka hortagtaa in gaadhigaagu siibto ama wadada uga baxo. Gooladaha buurta kor u socda waxay u baahan karaan xawaare kordhin, halka gooladaha hoos u socda ay u baahan karaan bareeg dheeraad ah.
- **Eeg horay.** Ka baar wadada si aad u saadaaliso adkaanta iyo dhererka goolada. Tani waxay kaa caawinaysaa go'aaminta xawaaraha iyo hagaajinta isteerinka ee ku habboon.
- **Door booska ugu fiican ee laanta.** Dhig gaadhigaaga si yar bannaanka laanta markaad u dhowdahay goolada. Tani waxay ku siinaysaa meel badan oo aad ku dhaqaaqdo waxayna hagaajinaysaa aragtidaada hareeraha goolada.

### Gudaha goolada

- **Ku soco xawaare deggan.** Ka fogow bareegid ama xawaare kordhin lama filaan ah inta aad ka leexanayso goolada. Tani waxay carqaladayn kartaa dheelitirka gaadhiga waxayna keeni kartaa luminta xakameyn.
- **Isteerinka si tartiib ah.** Ku jeedi isteerinka si deggan oo tartiib ah inta aad ka baxeyso goolada. Ka fogow isteerinka xad-dhaafka ah ama dhaqdhaqaaqyo degdeg ah, kuwaas oo sababi kara in gaadhigu siibto.
- **U diyaargarow hagaajin.** Noqo mid diyaar u ah inaad hagaajiso xawaarahaaga ama isteerinkaaga iyadoo ku xiran xaaladda wadada, aragtida, iyo wadista dadka kale.

### Marka aad ka baxayso goolada

- **Si tartiib ah u kordhi xawaaraha.** Marka aad ka soo baxdo goolada, si tartiib ah ugu laabo xawaaraha aad rabto. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad ilaaliso degganaanshaha oo si siman ugu laabato wadista toosan.
- **Eeg muraayadahaada.** Ka hubi muraayadaha in aad haysato meel ku filan haddii aad u baahan tahay inaad beddesho laan ama isdhexgasho.

**Xeerarka dhaqdhaqaaqa**

Marka aad waddo waddooyin leexleexda, waa muhiim inaad fahanto xoogagga saameeya gaadhigaaga si aad u xakamayso wadistaada.

- **Rogid iyo liicliicasho.** Rogiddu waxay saamaysaa inta uu gaadhigu u janjeero marka uu leexanayo, liicliicashadu wuxuu saamaynayaa dhaqaaqa dhinacyada labaduba waa muhiim si loo ilaaliyo xakameyn. Hagaajinta xawaaraha iyo isteerinka waxay kaa caawinayaan dheelitirka rogitaanka iyo liicliicashada marka aad leexanayso.
- **Dhaqdhaqaaq joogto ah.** Marka aad waddo si toos ah, gaadhigaagu wuxuu leeyahay dhaqdhaqaaq joogto ah jihadaas. Si kastaba ha ahaatee, marka aad gasho goolada, waxaad u baahan tahay inaad bedesho jihada iyo xawaaraha gaadhigaaga.
- **Xoogga iska-caabinta is-beddelka dhaqdhaqaaqa.** Marka aad mareyso goolada, gaadhigu wuxuu doonayaa inuu sii wado dhaqaaqiisa toosan. Haddii aad si lama filaan ah u rogto isteerinka, miisaanku wuxuu isku dayayaa inuu gaadhiga sii wado jihadiisii hore. Taasi waa sababta ay tahay inaad si taxaddar leh oo deggan u jeediso isteerinka markaad leexanayso.
- **Tamarta dhaqdhaqaaqa.** Xawaare sare wuxuu abuuraa tamar badan, taasoo u baahan waqti iyo meel dheeraad ah si loo joojiyo ama jihada loo beddelo. Yaraynta xawaaraha markaad leexanayso waxay dhimaysaa tamarta dhaqdhaqaaqa waxayna kaa caawinaysaa inaad leexato adigoon lumin xakameyn ama qabsasho.
- **isku-xoqmashada.** Isku-xoqmashadu waa xoogga u dhexeeya taayirrada iyo dusha wadada. Waxay u oggolaanaysaa gaadhigaaga inuu si fiican u qabsado wadada. Haddii xoogga isku-xoqmashadu bato, taayirradu si fiican ayey u qabsanayaan wadada. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad si badbaado leh u gaabiso, u dedejiso, ama u leexato. Wadooyinka siibta ee sababta roobka, barafka ama dhaxanta waxay si weyn u yareeyaan xoogga isku-xoqmashada ee ka jira marka la maraayo gooladaha. Yaree xawaaraha si ka badan intii hore oo iska ilaali dhaqdhaqaaqyo lama filaan ah xaaladahan.

# WADOOYINKA SIIBTA



Cimilada Washington waxay keeni kartaa wadooyin siibta. Roobka, barafka, iyo dhaxantu waxay abuurayaan khataro wadada ah. Marka wadadu siibto, waa inaad la qabsataa wadista xaaladda, taasoo laga yaabo inay kaa dhigto inaad waddo xawaare ka hooseeya kan lagu qoray calaamada.

Haddii roobku da'o maalin kulul, wadadu waxay noqon kartaa mid aad u siibta daqiiqadaha ugu horreeya. Kuleylku wuxuu keenaa in saliidda ku jirta laamiga ay soo kacdo dusha sare. Wadadu way sii siibaysaa ilaa saliiddu ka dhaqanto.



Wadooyinka barafka leh waxay u baahan doonaan masaafad raacid oo dheer iyo xawaare aad loo dhimo.



- Isticmaal taayirro baraf ama silsilado marka loo baahdo.
- Bilaha jiilaalka, waxaad hagaajin kartaa qabsashada wadada adigoo silsilado ku rakibaya taayirrada ama isticmaalaya taayirro la dhajiyey.

Ka fogow wadooyinka barafka leh inta ugu badan ee suurtagal ah. Haddii aad khasab ku tahay inaad waddo wado baraf leh, yaree xawaaraha oo ka tag meel badan oo firaaqo ah agagaarka gaadhigaaga.

- Maalmaha qabow ee qoyan, meelaha hooska leh waxay noqon karaan baraf.
- Buundooyinka iyo meelaha la midka ah waxay yeelan karaan baraf inkastoo inta kale ee wadada aysan lahayn.
- Marka heerkulku kor u kaco isagoo ka hooseeya baraf, barafku wuu dhalaali karaa wuxuuna noqon karaa mid qoyan. Tani waxay wadada ka dhigaysaa mid aad u siibta.
- *Barafka madow* waxaa loola jeedaa dahaarka khafiifka ah ee barafka oo ay adag tahay in darawaladu arkaan. Xitaa haddii aadan arkin baraf, feejignow markaad waddo meelaha heerkulku hooseeyo ama u dhow yahay baraf. Darawaliin badan ayaa shil gala marka ay lumiyaan xakameynta gaadhigooda dusha barafka madow.

## SIIBASHO

Siibashadu waxay dhacdaa marka taayirradu awoodi waayaan inay qabsadaan wadada. Xawaare sare iyo wado siibta ah waxay kordhiyaan suurtogalnimada siibashada haddii aad si lama filaan ah u leexato ama u istaagto. Maadaama aadan xakamayn karin gaadhi marka uu siibto, waa tan ugu fiican inaad iska ilaaliso siibashada marka hore.

Haddii aad siibato, samee waxyaalahan soo socda:

1. **Cagtaada ka qaad goobta sheelareynta.**
2. **Riix ama si tartiib ah u garaac bareegyada.** Joojinta xannibaadda waxay kaa caawin doontaa in la xakameeyo wareegtada taayirrada si ay dhaqso u yareeyaan. Waxay sidoo kale kuu oggolaanayaan inaad sii wadato isteerinka gaadhiga. Haddii aadan haysan biriiga qufulka, si degdeg ah oo aad hoos ugu riixdo baabuurka bireega waxay kuu horseedi kartaa inaad si badan u booddo.

3. **Ku jeedi isteerinka jihada uu gaadhigu u socdo.**
4. **Sii wad hagaajinta isteerinkaaga.** Hagaaji isteerinka ilaa taayirradu dib u helaan qabsashada wadada oo ay u socdaan jihada aad wado.
5. **Qiimee xaaladda.** Marka aad dib u hesho xakamaynta, tixgeli xaaladda wadada oo hagaaji wadistaada si waafaqsan.

## BIYAHA DUSHOODA KU SABBAYNTA

Biyaha dushooda ku sabbaynta wuxuu dhacaa marka biyo ay ka dhex samaysmaan taayirrada iyo dusha wadada. Tani waxay keentaa in taayirradu lumiyaan qabsashada wadada oo ay siibtaan. Gaadhigu wuxuu dareemi karaa inuu sabbaynayo ama siibanayo, taasoo adkeyneysa inaad xakamayso. Habka ugu fiican ee looga hortago hydroplaning waa in la yareeyo xawaaraha marka wadadu qoyan tahay.

Haddii aad ku dhacdo hydroplaning, waa muhiim inaad samayso waxyaalahan:

1. **Cagtaada ka qaad goobta sheelareynta.**
2. **Si tartiib ah u riix bareegyada.** Joojinta xannibaadda ayaa ka caawin doonta baabuurka inuu dib u helo xiriirkii waddada. Haddii aadan haysan biriiga qufulka, si xoog leh oo aad u cadaadiso badhka biriiga waxa ay kugu sababi kartaa in aad diyaarada sido.
3. **Ku ilaali/hay isteerinka si deggan.** Ka fogow isteerinka oo aad si xoog leh u rogtid ama u dhaqaajisid si lama filaan ah.
4. **Eeg jihada aad rabto inaad u socoto.** Ku sii hay diiradda wadada adigoo deggan intaad sugayso taayirrada inay dib u helaan qabsashada.
5. **Qiimee xaaladda.** Marka aad dib u hesho xakamaynta, tixgeli xaaladda wadada oo hagaaji wadistaada si waafaqsan.

## 5.7 | CILAD-XUMADA BAABUURTA

Haddii aad la kulanto dhibaato gaadhi inta aad waddada ku jirto, xusuusnow talooyinkan:

- Haddii ay suuragal tahay, gaadhiga waddada ka saar oo ka fogee taraafikada.
- Joog meel ay darawallada kale si cad u arki karaan gaadhigaaga, gaar ahaan haddii aadan awoodin inaad waddada ka saarto. Iska ilaali inaad istaagto meel buuro ah ama leexasho ku dhow.
- Daar nalalka degdega ah iyo nalalka hore.
- Ku dhig nalal digniin ah 200 ilaa 300 feet gadaasha gaadhiga si aad uga digto isticmaalayaasha kale ee waddada.
- Joog meel ammaan ah, kuna tilmaam darawallada kale inay ka wareegaan gaadhigaaga haddii aadan haysan nalal digniin ama qalab kale oo digniin ah.
- Kor u qaad daboolka hore ama ku xid maro cad anteenooyinka, muraayadda dhinaca, ama gacanta albaabka si aad u muujiso xaalad degdeg ah.

### TAAYARADA

Haddii taayir qarxo ama si lama filaan ah u daato:

- Si adag u qabso isteerinka oo gaadhiga toos u wad.
- Si tartiib ah u yaree xawaaraha. Cagtaada ka qaad goobta sheelareynta.
- Ha qaban biriiga. U daa gaadhiga inuu si dabiici ah u yaraado, ama si tartiib ah u jooji haddii loo baahdo.
- Haddii ay suuragal tahay, ka leexo waddada meel ammaan ah oo daar nalalka digniinta degdegga ah. Haddii aadan heli karin meel ammaan ah oo aad taayirka ku beddesho, daar nalalka digniinta, gudaha gaadhiga joog oo wac caawimaad.
- Ka hagaaji ama beddel taayirka.

## KORONTADA

Haddii matoorku istaago inta aad wadid:

- Si adag u hay isteerinka. Ogaaw in isteerinku adkaan karo in la leexiyo, balse wali waa la leexin karaa.
- Raadi meel aad si ammaan ah uga baxdo. Ha u qaban biriiga si xoog ah. Halkii aad si degdeg ah u joojin lahayd, si tartiib ah u riix biriiga, u yaree xawaaraha, dabadeedna waddada uga bax meel ammaan ah.
- Jooji oo isku day inaad dib u shiddo matoorka. Haddii uusan shidmin, kor u qaad daboolka hore oo daar nalalka digniinta khatarta. Wac caawimaad.

## NALALKA HORE

Haddii nalalka hore si lama filaan ah u bakhtiyaan:

- Daar nalalka digniinta, calaamadaha leexashada, ama nalalka ceeryaanta haddii aad haysato.
- Si degdeg ah uga leexo waddada.

## SHEELARADA

Haddii gaadhigu sii wado inuu xawaaraha kordhiyo:

- Indhahaada ku hay wadada.
- Si degdeg ah ugu beddel giyarka dhexdhexaadka.
- Gees uga bax waddada marka ay ammaan tahay.
- Dami matoorka.

## 5.8 | KHATARTA ISGAARSIINTA

Khatartu waxeey ka jirtaa meel kasta: magaalooyinka iyo miyiga, wadooyinka waaweyn, jidadka yaryar, meelaha baabuurta la dhigto iyo jidadkaba. Iska ilaali khataraha jira iyo kuwa iman kara. Mararka qaar waxaa dhici karta inaad u sheegto dadka kale in khatar jirto. Isticmaalka si xikmad leh ee nalalka, hoonka, iyo calaamadaha gacanta ayaa noqon kara siyaabo wax ku ool ah oo lagu wargeliyo isticmaalayaasha kale ee waddada.



## 5.9 | ISKU DHACYADA

Dhammaan darawalladu ugu dambayn waxay la kulmi doonaan xaalad degdeg ah. In kasta oo aad taxadar badan samaynayso, haddana xaalado ayaa dhici kara oo dhibaato keeni kara. Darawalladu waxay leeyihiin masuuliyadda ka hortagga shilalka. Mararka qaar tani waxay kaa baahan kartaa inaad isticmaasho xeelado degdeg ah, balse fahamka aasaasiga ah ee xeerarka cilmiga jidhka ayaa kaa caawin kara inaad shil iska ilaaliso. Si kasta oo aad u waddo si fiican, wali waad ku lug yeelan kartaa shil.

Shilalku badanaa waxay leeyihiin saddex sababood oo waaweyn:

1. Xawaare aad u badan
2. Meel cidhiidhi ah
3. Fahan la'aanta xaaladda kugu xeeran.

### MARKA GAADHI SHIL GALO

- Ha sii wadin gaadhigaaga. Haddii qof dhaawacmay ama dhintay, wac 911. Booliiska waa in si degdeg ah loo ogeysiiyo.
- Si degdeg ah gaadhiga u dhaqaaji dhinaca waddada, laakiin meel u dhow goobta shilka.
- Ha istaagin ama ha socon meel ay baabuurta ka socdaan. Waxaa dhici karta in baabuur kale ku dhufto.

- Isticmaal nalal digniin ah ama qalab kale si aad ugu digto darawallada kale in shil dhacay.
- Dami gaadhiga shilka galay.
- Haku ag cabbin sigaar meel uu yaallo gaadhi shil galay. Waxaa dhici karta in shidaal daatay, dabna waa khatar dhab ah.
- Haddii shilku ku lug leeyahay gaadhi la dhigey, waa inaad isku daydaa inaad hesho milkiilaha. Haddii aadan heli karin, ka tag warqad meel uu si fudud u arki karo. Ku qor taariikhda iyo waqtiga shilka iyo faahfaahinta xiriirkaaga.

## KA SOO WARBIXINTA SHIL

Ka dib isku dhaca shileed, ururi xogta kaa caawin doonta inaad warbixinta si sax ah u bixiso.

- Ka soo ururi xogta dadka kale ee ku lugta leh. Sidoo kale waa inaad adigu la wadaagtaa xogtaada. Waxaad u baahan doontaa inaad is-weydaarsataan:
    - Magaca, macluumaadka xiriirka, iyo lambarka laysanka darawalnimada
    - Shirkadda caymiska iyo lambarka siyaasadda
- Sawirro ama muuqaallo ka qaad dhaawaca gaadhiyada.
- Sii xogta booliiska ama mas'uuliyiinta degdegga ah haddii lagu weydiiyo.
- Gudbi foomka warbixinta shilka 4 maalmood gudahood haddii sharci fulintu aanay kuu sameynin adiga. Foomka waxaa waajib ka dhigaya sharciga gobolka. Booqo dol.wa.gov iyo raadinta **collision report form** (foomka ka soo warbixinta shilka).

## KASOO WARBIXINTA DHAAWAC

Dhaawacyadu waxay kordhiyaan walbahaarka ka dib shilka. Isku day inaad degganaato, naftaada hubi, ka dibna dadka kale caawi.

- Wac 911.
- Ha dhaqaajin dadka dhaawacmay haddii aysan ku jirin gaadhi gubanaya ama khatar degdeg ah.

- Caawi qof kasta oo aan soconayn ama hadlin. Hubi neefsashada, dabadeedna hubi dhiig-baxa.
- Raac tillaabooyinkan haddii aad aragto dhiig-bax:
  - Cadaadis saar gacmahaaga.
  - Ku xir faashad/maro.
  - Isticmaal qalabka xanniba dhiigga.
- Ha siinin dadka dhaawacan wax cabitaan ah — xitaa biyo ha siin.
- Dadka dhaawacan ku duub buste ama jaakad si ay diirimaad u helaan oo looga hortago inay miyir beelaan.

## WICITAANKA 911

Waa muhiim inaad wacdo 911 haddii uu dhaco shil baabuur si loo helo caawimaad degdeg ah. Xusuusnow inaad:

1. **Is-dejiso.** Isku day inaad deggenaato oo aanad argagixin. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad bixiso xog cad oo sax ah markaad la hadasho qofka qaata wicitaanka.
2. **Qiimeeyso xaaladda.** Si degdeg ah u qiimee sida uu shilku u daran yahay iyo haddii adiga ama dadka kale dhaawac soo gaaray.

Marka aad la hadlayso qofka qaata wicitaanka 911, waa inaad:

1. **Soo sheegto meesha aad joogto.** Si cad ugu sheeg goobtaada, oo ku dar calaamado ama meelaha caanka ah ee ku dhow. Haddii aadan hubin meesha aad joogto, ku dadaal inaad bixiso faahfaahin badan si ay kuwa gurmadka ahi kuugu helaan.
2. **Sharaxdo xaaladda.** Si kooban u sharax shilka, tirada baabuurta ku lugta leh, dhaawaca jira, iyo haddii dad waxyeelo soo gaadhay.
3. **Raac tilmaamaha qofka qaata wicitaanka.** Qofka qaata wicitaanka wuxuu ku weydiin karaa su'aalo si uu u fahmo xaaladda oo uu kuu siiyo tilmaamo.

4. **Bixiso faahfaahin.** U diyaargarow inaad bixiso xog dheeraad ah haddii loo baahdo. Faahfaahintaas waxay ka mid noqon karaan nooca gaadhiga, lambarka taarikada, iyo khatar kasta oo jirta.
5. **Ku sii jirto wicitaanka telefoonka.** Ku sii jir wicitaanka ilaa ay caawimaaddu timaaddo.

## MARKA AAD LA KULANTO FIILOOYINKA KORONTADA

**Haddii fiilo koronto ah taabato gaadhigaaga, ha ka bixin gaadhiga.**

Haddii shilku ku lug leeyahay fiilooyin koronto, waa inaad qaaddaa taxadar gaar ah. Dame matoorka, wac 911, oo gudaha gaadhiga joog ilaa gurmadka degdegga ahi yimaaddo. Marna lama oga goorta ama sida fiiladu u koronto leedahay, sidaas darteed u qaado in dhammaan ay koronto wataan.

Haddii aad si kama' ah u dulmarto fiilo koronto, si degdeg ah u istaag. Hore ama gadaal u dhaqaaqidu waxay halis gelinaysaa in koronto ku dhacdo. Wac 911 oo gudaha gaadhiga joog ilaa lagu wargeliyo in ay ammaan tahay inaad baxdo.

Haddii fiilooyin koronto ay ku dul dhacaan gaadhigaaga, ama aad ku dhacdo sanduuqa korontada ee transformer-ka, gudaha gaarigaaga joog oo wac 911. Dhulka ku wareegsan gaadhigaaga sidoo kale wuxuu noqon karaa mid koronto leh. Marka ay suurtagal tahay, dadka ku dhow ku dhiirageli inay ugu yaraan 35 fiit kaa fogaadaan.

Haddii gaadhigaagu taabto fiilo koronto oo dab kaco, waa inaad si degdeg ah uga baxdaa gaadhiga. Aad bay muhiim u tahay inaad si buuxda uga booddo gaadhiga. Albaabkaada fur, oo istaag dhinaca hoose ee albaabka. Ka bood gaadhigaaga, gacmahana dhinacyadaada ku hay. Ka taxadar inaadan taaban gaadhiga. Hubi in labada lugood ay isku mar dhulka u dagaan. Si aad uga fogaato koronto, si tartiib ah ugu dhaqaaq 35 feet si aad u badbaado. Ha u noqon gaadhiga sidaa ugala soo baxdo waxyaalahaaga ilaa laguu sheego in ay ammaan tahay.

## MARKAAD LA KULANTO SHIL DHACAY

- Ha xannibin kuwa gurmadka degdegga ah.
- Raac tilmaamaha ay bixiyaan booliiska, dab-damiyayaasha, iyo cid kasta oo loo oggolaaday inay taraafikada maamusho.
- Ku dadaal in aad ilaaliso badbaadada kuwa gurmadka iyo dadka shilka ku lugta leh, adigoo wadistaada si taxadar leh u sii wadata. Inaad gaadhiga u joojiso si aad u eegto goobta shilka waxay keentaa ciriiri taraafiko.

## SANDUUQA GURMADKA DEGDEGGA AH

Waa fikrad wanaagsan in aad ku hayso qalab degdeg ah gaadhigaaga. Waa kuwan qaar ka mid ah agabka muhiimka ah ee aad u baahan karto xaalad degdeg ah:

- ☐ **Qalabka gargaarka degdegga ah**
- ☐ **Nalka gacanta lagu qaato**
- ☐ **Buste**
- ☐ **Biyo**
- ☐ **Fiilooyinka lagu shido baabuurka**
- ☐ **Sanduuqa qalabka ama qalab badan u adeeg ah**
- ☐ **Qalabka dheeraadka ah ee dabeynta taleefannada ama il koronto**
- ☐ **Taayir kayd ah, birta taayirka lagu furo, iyo qalabka kor u qaada gaadhiga**
- ☐ **Calaamadaha saddex-xagalka ah ee milicsan ama nalalka digniinta**

Waa fikrad wanaagsan in aad haysato nuqul warqad ah oo leh lambarrada muhiimka ah (qoyska, shirkadaha caymiska). Nuqulkaas warqadda ah wuu kaa caawinayaa haddii batari taleefankaaga uu dhaco oo aad u baahan tahay inaad wacdo telefoon kale.

# 5.10 | LAANTA FULINTA SHARCIGA

Waddooyinka Washington waxaa maamula booliiska iyo hay'adaha dowladda ee gobolka Inta aad safarka ku jirto, waxaad la kulmi kartaa booliis gobol, degmo, ama mid degaan, iyo sidoo kale kooxaha gurmadka degdegga ah.




## MARKA BOOLIISKU JOOJIYO BAABUURKAAGA

Baabuurta booliiska ee doonaya inay joojiyaan darawal waxay shiddaan iftiinka biligleynaya ama siren-ka dhawaaqa. Haddii sarkaal fulinta sharcigu ku joojiyo, xasuuso inaad:



1. Isticmaasho calaamaddaada leexashada oo gaadhiga u dhigato dhinaca midig ee waddada marka ay nabdoon tahay.



2. Damiso matoorka iyo qalab kasta oo dhawaaq soo saaraya, sida raadiyaha.



3. Ku dhex jirto gudaha gaadhigaaga ilaa sarkaalku uu kuu sheego inaad soo baxdo.



4. Haddii lagu joojiyo habeenkii, shid iftiinka gudaha gaadhiga. Sarkaallada ayaa laga yaabaa iney isticmaalaan iftiin xoog leh si ay kuugu arkaan si cad.



5. Gacmahaaga ku heyso dusha isteerinka.



6. Raac dhammaan tilmaamaha uu sarkaalka ku siiyo adiga ama rakaabkaaga.

**Sarkaalka wuxuu ka imaan karaa dhinac kasta oo gaadhiga ah. Marka sarkaalka uu soo dhowaado, xasuuso inaad:**

1. Dajiso daaqadda dhinaca uu sarkaalka joogo si aad u wada hadashaan.
2. U sheegto sarkaalka isla markiiba haddii aad hub ku siddo gaadhiga.
3. Sugto tilmaamaha sarkaalka ka hor intaadan gaadhin liisankaaga darawalnimo ama waraaqahaaga gaadhiga.

**Haddii lagu joojiyo, sarkaalka badanaa wuu:**

- Kuu sharaxi doonaa sababta lagu joojiyey.
- Kaa codsan doonaa:
    - Liisanka darawalnimada (Driver license)
    - Caddeynta caymiska (Proof of insurance)
    - Diiwaangelinta gaadhiga (Vehicle registration)

**U sheeg sarkaalka halka ay waraaqahaasi yaalliin ka hor intaadan soo qaadin.**

- Wuxuu kuu sharxi doonaa waxa uu sameynayo (inuu b ku siiyo digniin ama tikid, ama xitaa inuu ku xidho). Haddii sarkaalka uusan sharraxin waxa uu samaynayo, waad codsan kartaa inuu sharaxo.

Waxaa laguu oggol yahay inaad su'aalo si edeb leh u weydiiso sarkaalka. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka sarkaalka, ha murmin, si aad uga fogaato xaalad sii dheeraata. Waxaad xaq u leedahay inaad dacwad ka furto maxkamad si aad uga hortagto go'aanka.

Haddii aad aaminsan tahay in sarkaalka si khaldan u dhaqmay ama aad qabto su'aalo, waxaad la xiriiri kartaa hay'adda uu ka tirsan yahay oo codsan kartaa kormeeraha Waxaa fiican inaad sidaas sameyso sida ugu dhakhsaha badan kadib marka lagu joojiyo.

## HELITAANKA TIKID

Haddii aad hesho tikid, waxaa looga baahan yahay inaad saxiixdo. Saxiixaaga iyo aqbalidda tikidka macnaheedu ma aha inaad qiratay dembi. Si kastaba, diidmada saxiixida tikidka taraafikada waxay sababi kartaa in lagu xiro.

Waa inaad raacdaa tilmaamaha ku qoran dhabarka tikidka muddo 15 maalmood gudahood si looga fogaado in laga joojiyo liisanka darawalnimada. Haddii aad waddo adigoo liisanka laga joojiyey, waxaad halis ugu jirtaa in lagaa qaado gaadhiga ama lagu xiro.

# GUNAANUD

Waddooyinka Washington waxay isku xiraan bulsho kasta oo ku nool gobolka. Waxaan u isticmaalnaa si aan ugu tagno shaqooyinka, alaabo u gudbino, oo aan u daawanno quruxda Pacific Northwest.

Xasuuso in dabeecadaha wado wadista wanaagsan ay saldhig u yihiin wadis ammaan ah oo xiiso leh.

Darawalada wanaagsan waa kuwa:

- **Feejigan.** Had iyo jeer ka war haya deegaanka ku xeeran iyo khataraha suuragalka ah.
- **Suunka xiran.** Si habboon ugu xiran suunka kursiga safar kasta.
- **Deggan.** Ka fogow dabeecad dagaal ah oo maaree shucuurtaada inta aad wadista gaadhiga ku jirto.
- **Diiradda saar.** Ka fogow waxyaabaha mashquuliya oo diiradda saar wadista gaadhiga.
- **Wacyi leh.** Waligaa ha wadin gaadhi adigoo saameyn ku jira khamri ama daroogo.

Khibraddu waxay dhistaa kalsooni; hase yeeshee, ka taxadar inaadan noqon mid dayaca ama kalsooni xad-dhaaf ah yeesha. Wadistu waxay u baahan tahay barasho iyo la-qabsasho joogto ah maadaama sharciyada, gaadiidka, iyo xaaladaha waddooyinka ay isbeddelayaan.

**Ku soo dhawoow bulshada wadaagga wadista ee Washington Aan iska kaashanno sidii aan waddooyinka uga dhigi lahayn kuwo ammaan ah qof walba.**

## EREYBIXIN

**ABS (Anti-lock Braking System, Nidaamka Bareegga ee Lidka ku ah Isxidhida):** waa nidaam kaa caawiya inaad si nabad ah u joojiso gaadhiga.

**ADAS (Advanced Driver Assistance Systems, Nidaamka Tiknaloojiyad Hormarsan ee Caawisa Darawalka):** Waa tignoolajiyada ammaanka gaadhiga ah oo faragelisa, digta, ama caawisa darawallada.

**Aaladaha xakamaynta gaadiidka:** Calaamadaha, astaamaha, iyo siiyaaleyaasha loo isticmaalo xakamaynta gaadiidka.

**Aan deegaan eheen:** waa qof aan si joogto ah ugu noolayn meel gaar ah, sida magaalo ama gobolka.

**Adeeg isdiiwaan-galin ee Xulan (Selective Service):** isdiiwaangelintan waxay ka dhigeysaa qof dhalasho ahaan lab ah oo da'doodu u dhaxayso 18 iyo 25 sano inuu u qalmo in lagu qoro ciidamada haddii ay dhacdo xaalad degdeg qaran.

**Aqoonsi qofeed:** waa cidda qofku yahay, oo ay ku jiraan magaca, taariikhda dhalashada, iyo macluumaad kale oo gaar ah.

**Aqoonsiga:** waa Dukumeenti leh macluumaadkaaga gaarka ah sida magacaaga, taariikhda dhalashada, ama sawirkaaga.

**Aragga:** Sida ugu wanaagsan ee aad u arki karto walxaha ku xeeran gaariga.

**Astamaha taraafikada:** Waa laydh hagta socodka taraafikada ee isgoysyada.

**Baaritaanka aragga:** Waa baaritaan lagu hubinayo sida aad wax u arki karto iyo haddii indhahaagu caafimaad qabaan.

**Baarkin aan toos eheen:** Baarkin lagu dhigto gaadhi xagal si toosan ugu jeeda laamiga.

**Baarkin dhex dhigasho:** Baarkin lagu dhigto gaadhi dhex mara laba gaadhi oo laamiga ku teedsan.

**Baas ama baasid:** Baasida gaadhi kale.

**Badelashada marinka:** Beddelidda marinka marka gaadhigu u guurayo hal marin ilaa marin kale.

**Barkin xagal u yaal:** waa baarkin lagu joojiyo gaadhiga si xagal ah oo aan toos aheyn.

**Barta tixraca:** Khadadka jidka ama walxaha ku dhow gaadhigaaga oo kaa caawiya inaad ogaato meesha aad jidka ku sugan tahay.

**Bireega oo shaqeyn waaya:** Waa marka breega gaadhiga ay si habboon u shaqayn weydo.

**Booska joogsiga:** Meesha uu baabuurku ku joogsado.

**Cadadka taraafikada:** Tirada gaadiidka ee ku socda waddo go'an.

**Calaamad-bixinta:** Isticmaalka tilmaamayaasha si loogu muujiyo darawallada kale waxa aad damacsan tahay.

**Calaamadaha leexinta:** Fareejooyinka xagga hore iyo xagga dambe ee baabuurka kuwaas oo tilmaamaya u jeeddada darawalka ee ah inuu u leexanayo bidix ama midig, ama beddelanayo haadka.

**Calaamadda joogsiga:** Calaamad muujinaysa darawaladu waa inay si buuxda u istaagaan.

**Caymiska baabuurta:** Caymis caawiya bixinta magdhowga waxyeellada ama dhaawacyada shilalka kadhasha.

**Culeys Miisaaman:** waa miisaanka si siman loogu qaybiyo gaadhiga si uu u ilaaliyo xasilloonidiisa.

**DUI (Driving under the influence, Wadista iyadoo la saameysan yahay):** Waa kaxaynta gaadhiga iyadoo qofka uu saameyn ku leeyahay khamri ama daroogo.

**Da'yar:** waa qof aan wali sharcigu u aqoonsan qof qaangaar ah, badanaa ka yar 18 sano.

**Daal:** Dareemida daal saaid ah.

**Dareenka khatarta:** waa awoodda lagu garanayo loogana jawaabo khataraha suurtogalka ah inta lagu jiro wadista gaadhiga.

**Daroogo isticmaalis:** Isticmaalka ama qaadashada in ka badan 1 nooc oo daroogo isku mar.

**Department of Licensing (DOL):** waa hay'ad dowladeed oo bixisa ruqsadaha darawalnimada, kaararka aqoonsiga, taarikada gaadiidka, iyo diiwaangelinta gaadiidka iyo doonyaha.

**Dhaqdhaqaaqa baabuurta:** Ficilada la sameeyo marka la wado gaari, sida leexashada ama joogsiga.

**Dhinac-dhinac u liicashada:** Dhaqdhaqaaqa dhinac-dhinac ee gaadhiga.

**Dib uwadis:** Waa kaxaynta gaadhiga gadaal-gadaal.

**Diiwaangelinta baabuurka (Vehicle registration):** Warqadaha rasmiga ah ee caddaynaya lahaanshaha gaariga.

**Diiwaangelinta cod-bixiyaha (Voter registration):** dukumeenti muujinaya marka qofka deegaanka ahi is-diiwaangeliyey si uu u awoodo inuu ka codeeyo doorashooyinka deegaanka iyo qaranka.

**Diiwaanka mataanaha (Twin registry):** Liiska magacyada mataanaha iyo qaar ka mid ah macluumaadka iyaga ku saabsan, oo inta badan loo isticmaalo cilmi-baarista.

**Diiwaanka wadista:** waa diiwaanka taariikhda wadista qofka, oo ay ku jiraan jebinta sharciga ama shilalka.

**Foorarka ama lulidda hore iyo dambe ee gaadhiga:** Xagasha hore ama gadaasha gaadhiga.

**Gaari wada-qaadashada in ka badan labo qof:** Waa marka 2 qof ama ka badan ay ku jiraan gaadhiga isagoo socda.

**Gaariga kaa horreeya inaad aad si ugu dhow u daba socoto:** Adigoo si aad ugu dhow u raacaya baabuurka hortaada socda.

**Halka aan la arki karin, meesha, ama aaga:** waa meelaha ku hareeraysan gaadhiga oo darawalku aanu si wanaagsan u arki karin, halkaasoo aanu ka arki karin gaadiidka kale.

**Halka amaanka ee dadku maraan:** Aag darawalladu gali karin si dadka loogu siiyo meel nabdoon oo ka fog taraafikada.

**HOV (High occupancy vehicle, Gaadhi rakaab badan wata):** Waddo gaar ah oo loo qoondeeyay gaadiidka wada socda ee ay saaran yihiin laba qof ama ka badan.

**Iftiin digniin:** waa laydhadh tilmaamaya oo ku yaal hore iyo gadaasha gaadhiga, kuwaas oo darawallada iyo dadka lugeynaya u muujinaya inay taxaddar muujiyaan marka ay gaadhiga u dhow yihiin.

**Iftiinka bireega:** waa laydhadhka cas ee gadaasha gaadhiga oo shidma marka darawalku breega qabto, si darawallada kale loogu muujiyo in gaadhigu aayar soconaayo ama istaagayo.

**Imtixaan xirfadeed:** Qiimayn go'aaminaysa kartida qofku u leeyahay in uu qabto hawlo gaari waditaan oo la taaban karo, sida baarkimida gaariga iyo dhex mushaaxida gawaarida kale.

**Imtixaanka aqoonta:** waa imtixaan qiimeeya fahamka qofka ee xeerarka wadista, calaamadaha, iyo macluumaadka kale ee muhiimka u ah wadista si nabad ah.

**Isku dhac ama burbur:** Waa marka laba gaadhi ama ka badan ama shay ay isku dhacaan.

**Isgoos:** Meel wareeg ah oo lagu xakameeyo taraafikada isgoysyada, sidoo kale waxaa loo yaqaan wareega taraafikada.

**Isgoys aan la koontaroolin:** Isgoys aan lahayn calaamadaha taraafig ama astaamo.

**Isgoys dhaqameed:** Isgoys caadi ah oo wadooyinku ku kulmaan xagal qumman ama toos ah.

**Isgoys:** waa meel ay isku xirmaan wadooyin 2 ama ka badan.

**Isgoyska isku dhafan:** waa isgoysyada leh wadooyin badan ama qaababka taraafikada ee aan caadiga ahayn.

**Jebinta xeerka taraafikada:** waa ganaax la siiyo haddii sharciga la jebiyo inta gaadhigu socdo.

**Jiidashada taayirrada laamiga:** Isku qabashada u dhaxaysa taayirrada iyo dusha waddada.

**Ka falcelin dambe:** Ka falcelinta xaalad aad aragto.

**Ka falcenin hore:** Ka falcelinta xaalad aad hore u saadaalisay.

**Ka warqabka xaalada:** Awoodaada inaad si buuxda uga warqabto agagaarkaaga markaad baabuur wadid taas oo kaa caawinaysa inaad gaadho go'aamo gaadhi wadid oo badbaado leh.

**Kamid ahaanshiyaha shil:** waa ka qaybqaadashada shil ama isku dhac.

**Kaxaynta gaadhiga iyadoo labada gacanba isteerinka lagu qabanaayo:** waa farsamo lagu hago gaariga iyadoo gacmaha lagu wareejinayo isteerin-ka, iyada oo aan la is-dhaafin.

**Khatar:** Waa fursadda in wax xun dhaco.

**Ku biirista taraafikada:** waa ku biiridda gawarida socda.

**Kursi horey-ujeedo:** waa nooc kursi gaadhi oo u jeeda xage hore ee gaadhiga, ku habboon carruurta ka weyn kursiyada gadaal-u-jeedsan.

**Kursi kor u qaada:** waa kursi gaar ah oo loogu talagalay carruurta ka weynaaday kursigooda gaadhiga, laakiin weli ka yar si ay si habboon u isticmaalaan suunka caadiga ah.

**Kursiga bad-qabka caruurta ama celiyo:** waa kursi gaar ah oo carruurta loogu talagalay gudaha gaadhiga si loo ilaaliyo badbaadadooda haddii shil dhaco.

**Kuwadista isteerinka hal-gacan:** Waa kaxaynta isteerinka gaadhiga iyadoo hal gacan la isticmaalayo.

**Leexasho yar:** Marka baabuurku aanu leexan inta uu rabo darawalku.

**Leexo:** Beddelida jihada markaad baabuur wadid.

**Leydka hore:** waa laydhadhka hore ee gaadhiga oo iftiimiya jidka hore, si darawalku u arko una muuqdo habeenkii ama xaaladaha iftiinka hooseeya.

**Leysanka taargada:** waa taarikad bir ama caag ah oo leh lambarro iyo xarfo, oo lagu dhejiyo hore iyo gadaasha gaadhiga, si gaadhiga loogu aqoonsado sharci-ilaaliyayaasha iyo dadka kale.

**License Express:** Waa adeeg online ah oo aad ku cusboonaysiin karto ruqsadda darawalnimada, taarikada gaadhiga, ruqsadda ganacsiga, ama aad ku soo sheegi karto markaad iibiso gaadhi.

**Lugeeye:** Qof lugaynaya jidka ama ku dhow jidka.

**Lumista qabashada taayarka:** Marka ay yaraato awoodda in taayirrada ee ku dheggan waddada.

**Masaafadda joogsiga:** Masaafadda laga soo bilaabo marka uu darawalku qabto bareega ilaa uu gaarigu istaago.

**Masuuliyad dhaqaale:** waa in lagu xisaabtamo bixinta kharashka haddii waxyeello dhacdo.

**Midabada calaamadaha caadiga ah:** Midabada loo isticmaalo calaamadaha taraafiga si loo gudbiyo macnayaal gaar ah.

**Nidaamyada ilaalinta rakaabka:** waa qalab ammaanka gaadiidka ku jira, sida airbags-ka iyo suunka kursiga.

**Qaababka calamadaha gaadiidka:** Qaababka calamadaha kala duwan ee leh macnayaal gaar ah.

**Qaraxa taayirka:** Cadaadiska hawada oo si lama filaan ah u luma marka aad baabuur wadid.

**Qooraansi:** Aragga waxyaabaha dhinacyada iyadoo aad si toos ah u fiirinayso hore.

**Qorsheynta safarka ama waddada:** Qorsheynta waddada ama jidka safarka la mari doono.

**Qulqulka gaadiidka:** Sida baabuurtu u socdaan waddooyinka.

**Raadinta muuqaal ah:** Si ula kac ah u raadinta khataraha hadda jira ama iman kara.

**Rogmadka gaadhiga:** Dhaqdhaqaaqa gaadhiga dhinac ilaa dhinac.

**Ruqsada beeraha:** waa oggolaansho u saamaxaya qof ka yar 18 jir inuu kaxeeyo taraktarro iyo gaadiid kale oo beeraha loo adeegsado.

**Shahaada lahaanshiyaha (Certificate of ownership):** waa dukumeenti muujinaya cidda leh gaadhiga ama doonida.

**Sharciga dhalooyinka furan (Open container law):** Sharciga mamnuucaya darawallada iyo rakaabka inay gaadhiga ku haystaan dhalooyinka khamriga ee furan, si looga hortago cabista iyo wadista.

**Sharciga oggolaanshaha tooska ah (Implied consent law):** Sharciga ku qasba darawallada inay maraan imtixaano gaar ah, sida tijaabada neefta (breathalyzer), haddii la tuhmo inay kaxaynayaan gaadhi iyagoo saameyn ku leh khamri ama daroogo.

**Sharciyada wadooyinka:** Xeerarka maamula sida ay tahay in baabuurtu uga shaqeyso wadooyinka.

**Shil sababay quf un:** waa shil dhaca, waxaana la go'aamiyaa in darawal ka mid ah uu inta badan mas'uul ka yahay sababtiisa.

**Siibashada taayirrada:** waa marka gaadhigu wadadoo qoyan darted simbiriirixdo iyo turaanturo.

**Simbariirixasho:** Luminta jiidashada taasoo keenta in baabuurku u taraaraxo si aan la xakamayn karin.

**Soo-booqde:** Qof meel ku jira waqti kooban ama xaddidan.

**Suunka joojinta dhiig-baxa:** Duubista adag ee ka caawisa xakamaynta dhiigbaxa.

**Taayarada oo Waxyaabo Lagu Dahaaray:** Taayarada oo jiilaalka lagu dahaarayo qaybo bir ah, oo loo yaqaan dahaar, kuwaas oo loo isticmaali karo wadista baabuurka markii xaalado baraf dhaggan ah ay jiraan.

**Taraafiko:** Gaadiidka ku socda waddooyinka.

**VST (Vehicle Safety Technology, Tignoolajiyada Badbaadada Baabuurta):** Astaamaha gaadiidka isticmaala dareemayaasha ama kamaradaha si ay wax u soo dhexgalaan, uga digaan, ama kaa caawiyaan inaad si badbaado leh u waddid.

**Waalid ama wakiil:** Qof qaangaar ah oo sharcigu masuul ka yahay daryeelka qof ka yar.

**Wadis maldahan:** waa kaxaynta gaadhiga iyadoo qofku saameyn ku leeyahay khamri, daroogo, ama walxo kale oo saameeya garashada iyo isku hagida.

**Wadista careysan:** Waa hab wadis oo muujinaya caro, khatar, ama degdeg badan, sida xawaaraha badan ama ku dhowaanshaha gaadhiga hore.

**Wadista mashquulsan:** waa wax kasta oo maskaxda ka mashquuliya wadista gaadhiga, sida isticmaalka telefoonka ama hawlo badan oo isku mar ah inta aad wadayso.

**Xaaladaha cimilada:** Sida ay cimiladu tahay.

**Xafiiska shatiga gaadiidka (Vehicle licensing office):** Halka aad u tagto shahaadooyinka gaariga, istiikarrada muujinaya in diiwaanka gaarigu uusan dhacsanayn, iyo caawimaad ah dhanka diiwaangelinta.

**Xafiiska shati-siinta darawalka (Driver licensing office):** waa goob bixisa adeegyada macaamiisha ee la xiriira ruqsadaha darawalnimada.

**Xakamaynta xawaaraha:** Waa nidaam ku jira gaadhiga oo xakameeya xawaaraha la dejiyey iyadoo darawalku cadaadin birta xawaaraha.

**Xawaaraha xaddidan:** Xawaaraha sharci ee ugu badan ee loo ogol yahay waddooyinka in lagu socdo.

**Xubin bixiye:** Qof ogolaaday inuu xubnahiisa bixiyo ka dib dhimashadiisa si uu u badbaadiyo nolosha dadka kale ee u baahan beddelka xubnaha.

**Xuquuqda marin ee jidka:** Xaqa sharciyeed oo kuu oggolaanaya inaad hore u sii socoto taraafikada; tusaale ahaan, gaadhigii ugu horreeyay ee istaaga isgoyska ayaa leh right-of-way.

## HELITAAN IYO FUDUDEYN KHAAS AH.

DOL waxay bixisaa fududeynta ama adeegyo khaas ah marka la codsado, si loo caawiyo macaamiisha u baahan taageero si ay u helaan xarumaheena iyo adeegyada aan bixino.

- Haddii aad u baahan tahay caawimaad ama fududeyn si aad u gasho barnaamijyadeenna, xarumahayaga, ama adeegayaga — wac 360-902-3900, ama la xiriir shaqaalaha ku sugan xafiisyada liisamada ee bulshadaada, kuwaas oo kaa caawin kara.
- Haddii aad u baahan tahay caawimo ku saabsan luqad aan Ingiriisi ahayn, la xidhiidh kooxdayada Luqadda Helitaanka luqadda languageaccess@dol.wa.gov.
- Haddii aad aaminsan tahay in lagugu takooray markaad adeeg ka helaysay Washington (DOL), iyadoo lagu saleynayo xuquuqahaaga la ilaaliyo sida ku xusan Cinwaanka VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Civil Rights Act of 1964), fadlan la xiriir Isu-duwaha U-hoggaansanaanta Xuquuqda Madaniga ah (Civil Rights Compliance Coordinator) ee CivilRtsCoord@dol.wa.gov.

## AFEEF

Hagaha Darawalnimada ee Gobolka Washington(The Washington State Driver Guide) ma aha hay'ad sharci ah, lagumana talagelin in loo isticmaalo maxkamad ama dacwad. Hagahan laguma isticmaali karo saldhig ahaan sheegasho ama ficil sharciyeed. Sharciyada taraafikada ee magaalooyinka, tuulooyinka, iyo degmooyinka waxay ka dheeraan karaan shuruucda gobolka, balse ma khilaafi karaan. Haddii aad rabto inaad barato shuruuc gaar ah oo la xiriira wadista baabuurta iyo shatiga darawalnimada, eeg Title 46 RCW (Revised Code of Washington, Xeer Dib loo eegay ee Washington), Motor Vehicles (Baabuurta).

Qalabka ku jira hagahan waxaa loogu talagalay waxbarasho iyo cilmi-baaris. Haddii aan si kale loo sheegin, dhammaan nuxurka waa hantida xuquuqda daabacaadda Department of Licensing (DOL) ee Washington State. Isticmaalka ganacsi ama siyaasadeed ee qalabkan waa mamnuuc ilaa oggolaansho qoraal ah laga helo DOL. Haddii aad hayso talo ama su'aal ku saabsan macluumaadka lagu bixiyey hagahan, ama xaalad aan la xusin, fadlan iimayl ku dir tse@dol.wa.gov.

Shaqadan waxaa ilaaliya Sharciga Xuquuqda Daabacaadda ee Maraykanka Sharciga Xuquuqda Daabacaadda ee Mareykanka (U.S. Copyright Law).

Washington State Department of Licensing (DOL) ayaa leh xuquuqda daabacaadda ee shaqadan.

© Xuquuqda Daabacaadda 2025, Waaxda Shatiga ee Gobolka Washington Dhammaan xuquuqaha waa la dhowray.